


# Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka  
Tababarka Hoggaamineed

## DHISIDDA AWOODDA

URURRADA AAN XUKUUMIGA  
AHAYN IYO KUWA BULSHADA KU SALAYSAN IYADOO LA  
ADEEGSANAYO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA  
KHAYRAADKA LACAGEED



### QAYBTA 1

ARAGTIYO, ISTRAATIJIYADO IYO HABAB  
TUSMADA BUUGGA

# **DHISIDDA AWOODDA**

**URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO  
KUWA BULSHADA KU SALAYSAN**

**IYADOO LA ADEEGSANAYO**

**MAARAYNTA  
IYO HORUMARINTA  
KHAYRAADKA LACAGEED**

**QAYBTA 1  
ARAGTIYO, ISTRAATIJIYADO  
IYO HABAB**

**TUSMADA BUUGGA**

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

<b>GOGOL-XAADH</b>	<b>2</b>
<b>AQOONSI</b>	<b>7</b>
<b>CUTUBKA 1: DULMARID &amp; HORDHAC</b>	<b>9</b>
<b>CUTUBKA 2: RIKOODHADA LACAGAHA IYO WARBIKINTOODA</b>	<b>17</b>
<b>CUTUBKA 3: MIISAANIYAD LACAGEEDKA HAWLGALKA SANADKA: SWAAFAJINTA DHAKHLIGA IYO KHARASHKA</b>	<b>33</b>
<b>CUTUBKA 4: DHAQDHAQAAQA KAASHKA MIISAANIYADA</b>	<b>61</b>
<b>CUTUBKA 5: MAAMULKA LACAGTA</b>	<b>69</b>
<b>CUTUBKA 6: SIYAASADAHA LACAGTA IYO XILALKA KORMEERKA</b>	<b>87</b>
<b>DHAMAYSTIRKA GOOBADA</b>	<b>92</b>
<b>EREY-BIXIN (Glossary):</b>	<b>95</b>

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **GOGOL-DHIG**

Taxanahan ka kooban tilmaamayaasha tababaridda, ee dhisidda awoodda waxqabad ee NGO-yada iyo ururradda bulshada, waxa loo hindisay inay kobciyaan guud ahaan maareynta fulinaya iyo wax-ku-oolnimada hawl-galadda NGO-yada iyo ururada bulshada, waxay taasi la kulantay jimciyadda quruumaha ka dhaxaya u qaabilsan dejinta dadka (UNCHS), oo laga dhigay xubin buuxda oo ka mida quruumaha midoobay, ee barnaamijka dejinta dadka, hadda ka dibna loo bixiyey UN-HABITAT iyada oo uu ansixiyay Golaha loo dhan yahay ee qaramidda midoobay fadhigiisii 56aad ee diisambar 2001.

Natiijadda dib-u-qaabayntaasi waxay UN-HABITAT siinaysaa kaalin tii hore ka wanaagsan oo ay ka taageeri karto dawladaha iyo hayadaha ay mataanaha yihiin, si ay u fuliyaan ajandaha UN-HABITAT ee uu ansixiyay shirkii qaramida midawbay ee lagu qabtay Istambuul ee dalka Turkiga 1996, laguna sii ansixiyey kalfadhigii gaarka ahaa ee Golaha loo dhan yahay ee qaramida midoobay, ee lagu qabtay Istanbul ee dalka Turkiga; 5dii juun 2001. NGO-yadu iyo ururradda bulshaddu waxay ku leeyihiin kaalin mugle sidii loo gaadhi lahaa ujeedada mudnaanta le ee UN-HABITAT, ee ah deegaan nololeed oo wanaagsan inay helaan dadka oo dhami.

Hirgelinta taxanahan tilmaamayaasha ah waxa kale oo ay la kowsadeen abuuridda QAYBTA HABITAT u qaabilsan tababaradda iyo dhisidda awoodda waxqabad, taasoo sawir ka bixinaysa aqoonsiga aragtidda cusub ee dhisidda awoodda waxqabad inay ka mid tahay furayaasha qalabka hawl-galka ee lagu gaadhi karo kor-u-qaadidda nololaha ugu yaraan boqol milyan oo hadda ku nool degaamo nolooshoodu aanay bani-aadamka u qalmin. Taasoo ku cad baaqa kun guuradda ee sanadka 2000.

Waxa isa soo taraya maragyo iyo aqoonsiyo dhawr qiyam oo qeexaya qaabaynayana ajandaha magaalooyinka ee kun guuradda ka mid ahaanshuhu waa mid ka mid ah ajandahaas. Bulshooyinka doonaya inay ka mid noqdaan kuwa safka hore ka gelaya isbeddelka dhaqan-dhaqaale waa inay aqoonsadaan ahamiyada ka-mid-ahaanshaha xubin kasta ee bulsho iyadoo aan loo eegin dhaqaale, da' , jinsi, diin iyo isir toona waa inay ka qayb qaataan habraaca lagu gaadhayo go' aano saamayn kara tayada noloshooda.

Aqoonsiga labaad waa hogaamin wadaaga oo wada gaadha haya' adaha iyo bulshada qaybaheeda kala duwan Taasi micnaheedu waa in NGOyada iyo ururada bulshada loo arkaa kuwo hawlqabad leh oo mutaystay inay ka qayb galaan hogaaminta iyo masuuliyadaha.

TILMAAMAHA: "Building bridges" oo ay soo saartay UN-HABITAT oo xidhiidh la leh taxanahan, ayaa loo hindisay in uu xoogga saaro maarynta qorsheynta howlgalada wadaagga ah, iyo maareynta isqabadyada iyo iska-hor-imaadyo bulshad dhexdeeda ama ururada bulshada ee aan macaash doonka ahayn ka dhaca.

Aqoonsiga ugu danbeeyaa waa baahidda loo qabo hawlqabadka urur ee ka mida NGO iyo ururradda bulshada taasoo koobaysa aqoon, xirfado, waayo –aragnimo iyo u-heelalaan xoojin karta go' aankooda ah inay maareeyaan lacagahooda iyo khayraadka aadamaha iyo inay si wax-ku-oolnimo iyo waxqabad leh ku gaadhsiiyaan bulshada ka durugsan. NGOyada iyo ururada bulshada hadday doonayaan inay noqdaan mataano wax-ku-ool ah waa inay muujin karaan in arrimaha gudaha ururkoodu uu habaysan yahay.

Taxanahan barashada agabka fulineed wuxuu ku yimi iskaashigga UN-HABITAT iyo PARTENERS ROMANIA FOUNDATION ee horumarinta maxaliga ah, iyadoo ay maalgelinta u badan ay bixisay Open Society Institute iyo Dawladda Netherland. Waxa kale oo dejinta taxanahan ka qayb-galay kuwa kale oo ay ka mid yihiin:

1. Koox NGO; ururo bulsho iyo hogaamiyayaal Dawladaha Hoose oo Afrika ah ee lama degaanka saxaraha koonfur ka xiga, oo isugu yimid Nakuru, Kenya Nov. 1998 sida ay qeexaan baahiyahooda

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

waxbarasho, halkaas oo UN-HABITAT ka waday aqoon isweydaarsi ku saabsan istaraatiijiyada dhisidda awoodda waxqabad. Kooxahaasi waxay ka qayb-galeen naqtiinka qoraalo qabyo ah, kuwaas oo ku dhamaaday aqoon isweydaarsi qiimayn ah oo lagu qabtay Nyeri, Kenya 2001; iyo 2. Shabakat haya' do iyo tababarayaal wakiilo ka ah barnaamij goboleedka Dhisidda awoodda wax-qabad ee xukunka iyo hogaaminta maxaliga ah ee Bariga iyo badhtamaha dalalka Europe, kuwaas oo ka qayb-galay tijaabinta qoraaladdii qabyada ahaa.

Ugu danbayntii, waxaan u mahadnaqayaa Fred Fisher, oo qoray tilmaamayaashan iyo kooxdii iskaashi ee uu u keenay inay dajiyaan qalabka waxbarasho. Kooxdii xirfadyaqaanada ahayd ee UN-HABITAT ee uu madaxna ka ahaa Tomasz Sudra ,waxay la yimaadeen waayo-aragimo, iyo xeeldheerinimo balaadhan , iyo xirfadyaqaanimo ay ku soo gabagabeeyeen inay qabyo tiraan qoraaladii qabyada ahaa iyo wax-soo-saaro kale, kooxda PARTNER ROMONIA FOUNDATION ee horumarinta maxaliga ah madaxna ay ka ahayd Ana vasilachae waxay ka masuul ahaayeen hindisaha hababka wax baridda iyo qaabaynta kama dambaysta ah ee tilmaamayaasha .

**Anna Kajumulo Tibaijuka  
Under Secretary General and  
Executive Director  
(UN – HABITAT)**

## **AQOONSI**

Tarjumadda iyo habaynta af soomaaliga ah ee “*dhisidda awoodda ururrada aan xukuumiga ahayn(NGOs) iyo kuwa bulshada(CBOs)oo ku salaysan maaraynta iyo horumarita ilaha maaliyadeed*” waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda af Soomaaliga ah ee buugan waxa ka hawl-galay Mr. Cabdi Haybe Cilmi. waxa dib u habayn ku sameeyay Mr. Mohamed Farah Warsame (Gafote) oo tifa-tirka ku xeel dheer. Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhistada iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

*This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at [www.unhabitat.org/roaas](http://www.unhabitat.org/roaas).*




**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## HORDHAC IYO DULMARID


C  
U  
T  
U  
B  
K  
A

1



## **DULMARID & HORDHAC**

Ugu horeyn waxaynu u baahan nahay inaynu qeexno ereyada NGO iyo ururada sal ku leh Bulshada. Aragtida tilmaamaha iyo doodahiisa, NGO waa ururo aan macaash doon ahayn oo ka madax banaan dawladda. Qeexideenaasi waxay koobtaa ururada bulshada ee ku nool degaan kooban ilaa kuwa aan macaash doonka ahayn ee dowladana ka madaxa banaan iyo kuwo labadaas meel u dhexeeyaa ka hawl gala. Waxaan si badheedh ah uga reebnay NGO/CBO caalamiga ah anagoo rumaysan inay leeyihiin habab maarayn maaliyadeed. Tanise kama reebayso inay ka qayb qaataan safarkan baadigoobka ah, in kasta oo ay iyaga ula mid tahay meel hore oo ay safar ku tageen oo ay ku noqonayaan. NGO-yada iyo ururada bulshadu waxay si wadajir ah uga wada shaqeyeen dhul aad u balaadhan. Waxay ka hawl galaan una



adeegaan danyarta, badbaadinta deegaanka, dugsiyo, shay baadhyo caafimaad, maktabado, iyo waxyaalo kale oo badan sida hawlaha gargaarka, dhexdhexaadinta isqabadyada. Waxa kale oo ay ku hawlan yihiin sidaan u ahaan lahayn kooxo cadaadis oo ra'yigoodu dawladda iyo hayadaha muhiimka ah saamayn ugu yeelan lahaa. Liiskan kooxaha qaar ka mid ahi waa lama huraan in ay dhaliilaan sida kuwo ku hawlan rumaynta mabaadida bani aadaminimo. NGO-yadu waxay u abaabulan yihiin inay ka hawlgalaan fidinta faaiido ama baahi madani ah oo gaara, waxay maalgalin ka helaan tabarucaad dadweyne, deeqo dawladeed, hayadaha horumarinta iyo ururo gaar ahaaneed. Ururadaasi oo ay ka qaadaan kharash yar oo la awoodi karo iyagoo halbeeg daadagsan adeegsanaya oo tixgalinaya tirada qoyska iyo dakhligooda, si kale haddeynu u dhigno

ilaha lacageed ee saldhigga u ah ururadan waxay u badan yihiin sida ay u kala duwan tahay sababaha jiritaankoodu. Iyadoo kala duwanaanshahaasi laga duulayo, buugga tilmaamaha tababaruhu wuxuu liishaamayaa aragtiyada aasaasiga u ah istraatiijooyinka, habab iyo habraaciyada maareynta maaliyadda kuwaaso lama huraan u ah ururadaas iyo deegaanka ay ka hawl galayaan.

Agabyada maaliyadeed ee buuggan tilmaamaha waxay ku salaysan yihiin ogaanshaha lama huraan ee ay ururadaasi doonayaan in ay iyaga iyo adeegyada ay bixiyaan u noqdaan kuwo muddo dheer sii jira, ururaduna inay xag maaliyadeed ilaa xad ay iswadi karaan, iyagoo adeegsanaya awoodda, si wax ku ool ahna u maareynaya khayraadka maaliyadeed.

Waxa xusid mudan, kalfadhiiyadii tababar ee tijaabada ahaa ee Nyeri ee ay adeegsadayaaashii tilmaamayaashu sheegeen wax yaalaha loo baahan yahay in laga beddalo tilmaamayaasha ka hor intaanay daabicid gelin.

Dhawr arimood oo u muuqday inay ku haboon yihiin in go'aan laga gaadho ayay tilmaameen, kuwaas oo taabanaya dhinac kasta ee habka maaraynta maaliyada. Halkan ayay u muuqataa inay ku haboon tahay in lagu falanqeeyo, maadaama ay caalamka oo dhan khuseeyaan waxaana ka mida ah:

### **DULMARID IYO HORDHAC**

- ✓ Wax badan kamaynu hadlin computer agabkiisa fudud oo wakhtigan laga helo aduunka oo dhan, loona adeegsado dejin hababka maareynta maaliyada, iyo sida loo maareeyo dhaqdhaqaaq maaliyadeed. Waa la heli karaa ee waa in la hubiyaa hadii aad hayso agabka culus ee taageeri kara. Buuggan tilmaamaha ahi waxa uu koobaa hababka aasaasiga ah iyo habraacyada lagu maarayn karo heer kasta oo uu yahay.
- ✓ Arrinta kale ee muhiimka ah ee uu tilmaamuhu si fudud u dulmaray waa baahida loo qabo in la fahmo loona hogaansamo sharciyada qaran iyo halbeegyada xukuma maaliyada NGO iyo ururada bulshada. Taasi waa arin mudnaanteed leh, waa inaynu sheegeynaa xaqiiqada kala duwanaanshaha hababka qaran iyo gobol ee sharci dajinta iyo xakamaynta la xidhiidha maareynta maaliyada laakiin idinka ayaan idiin dhaafnay wax ka qabadkeeda.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- ✓ Marka aynu ka hadalno kala duwaanasha heer gobol, waxa jira ereyyo sooc u ah Maraykan iyo Ingiriiska oo sharxa hawl qabadyo iyo habab hoosaadyo ay leeyihiin hababka maaraynta maaliyadda. Waxa dhici karta in ay jiraan kuwo intaa ka badan, hase ahaate aynaan ogaal u lahayn waqtigan aynu joogno. Waxaanu adeegsanay erey bixinta Mareykanka.
- ✓ Waxaa laga yaabaa habraacyada iyo qaababka laga doodayaa inay ilaa xad ku adag yihiin NGO-yada iyo ururada bulshada ee yar yar. Waan ku faraxsan nahay dareenkan aad ka qabtaan arrintan, laakiin waxa ina hortaagan baahida loo qabo in aynu raacno wadiiqo waxbarasho oo u dhaxaysa qaababka waaweyn oo wax yar ka faa' idaysanaya, aragtiyaha, agabyada, iyo ururada yar yar ee ka hawl gala aduun aad u yar. Kuwa hore kama werwersanin hase ahaatee kooxda labaad aan ku dhiiri galino inay casharada ka qaataan aaraa' da iyo agabka ku sar go'an heyntooda. Inta kale ilaa waqti ha iska dhaafaan ilaa ay korayaan ee ay u baahanayaan isbeddel ku dhacayo sida ay u maareenayaan maaliyadaada iyo khayraadkooda maaliyadeed.
- ✓ Waxa jirta arrin ka dhexeeya diiwaangelinta iyo xisaabinta. Ka qaybgale ka mida kooxdii aqoon isweydaarsigii NYERI (Kenya) ayaa si aynaan hore u maqal u fududeeyey kala duwanaashahooda, waxay nala noqotay inaan kuu soo gudbino. Diwaangelin waa xafidid, xisaabinina waa xafidid iyo iswaafijin.
- ✓ Baahiyaha loo qabo siyaasad maaliyadeed waxaynu kaga doodi doonaa qaybta u danbeysa ee ka hadlaya hawsha kormeerka maaliyada ama hawlaha hanti dhawrka. Waxa laga yaabaa in dad badani ay qabaan in siyaasaduhu ay ka horeeyaan. Waxay noola muuqataa in ka doodidda siyaasaddu ay ku haboon tahay inay timaado kadib marka la dhamaystiro maaraynta dhaqdhaqaaqa maaliyada; oo ah mishiinka ay tahay inaad haysato marka aad siyaasadaha ka doodaysa. Ta ka sii muhiimsani, siyaasadaha waa aasaaska hantidhawr adagi ku hirgeli karo. Haddii ay kala horaysiintayada ka doodidda siyaasaduhu ku wareerisay waxaannu kuu soo jeedinaynaa inaad soo horaysiisan kartid cutubka lixaad ee buugan.
- ✓ Qaybtan tilmaamuhu si qoto dheer ugama doodin qorshaynta maaliyadda, hase ahaatee qaybta labaad waxa ku jira agabyo maareyn dhawr ah, oo tafatiraya maareynta maaliyadda.
- ✓ Ugu dambeyn waxa jira ereyo iyo weedho xooggan oo ka doodidda maareynta maaliyada NGOyada iyo ururada bulshada ah ugu soo noqnoqanaya, gaar ahaan marka ay arrintu taagan tahay deeq-bixiyayaasha. Waxaannu isku deyi doonaa inaan idiin iftiimino ereyada lagama maarmaanka ah inta aynaan dhexgalin sida ay u shaqeeyso maareynta maaliyaddu, waana kuwa soo socda:

### **WAX-KU-OOLNIMADA IYO TAYADA WAX QABAD:**

Erayada wax ku oolnimo iyo tayada wax-qabad waxay ku soo noqnoqon doonaan doodaheena. **Wax-ku-oolnimada** waxa lagu tilmaamaa marka wixii haboonaa la qabanayo. halka **TAYADA-WAX-QABAD** lagu qeexo wixii wanaagsanaa oo la qabanayo. Tusaale: NGO-ga aad xubinta ka tahay ayaa goosatay in ay xarumo adeeg ka dhiso deegaanada ay ka hawl gasho si ay bulshada ugu sahasho gaadhistooda; mar haddii aanay muwaadiniinta u safri Karin meel ka fog deegaamadooda. Taas waa siyaasada qeexaysa wax ku oolnimo. Si aad u hawl geliso xarumaha oo baahiyaha dadweynaha oo dhan loogu heli karo iyo sida aad u gaadheysa hadafyada siyaasadeed ayaa ah tilmaamayaasha *tayada-wax-qabad*.

#### **DULMARID IYO HORDHAC**

Waa aragtiyo lagama maarmaan ah in maskaxda lagu hayo mar kasta oo aad dib-u-milicsi ku sameyso mawaadiicda laga doodi doono laga bilaabo hadda.

### **WAARIDA (SUSTAINABILITY)**

Hadaf kale oo aasaasi ah oo uu tilmaamuhu inuu gudbiyo ay tahay waa war/xog iyo fikrado sida ay NGO-yadu iyo ururada bulshada u-sii-jiri lahaayeen iyagoon is dhimin. Masalan NGO-du ama ururka bulsho ee aad ka tirsan tahay ma leeyahay awood uu ku hawl galo hadii uu la kulmo dhibaatooyin dibada kaaga

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

yimaada, sida adigoo waaya maalgelintii deeq bixiyaha!

NGO-ga ama ururka bulsho ee aad ka tirsan tahay ma awoodi karaa inuu hindiso ilo maalgelineed oo kala duwan, oo ay ka mid noqon karaan barnaamijyo dakhli dhalin ah iyo tabarucaad dibedeed, oo NGO-ga ama ururkiina bulsho awood siin kara inuu muddo sii jiro!

NGO-da ama urukiina ma leeyahay awood uu sii jiri karo isagoo adeegsanaya istraatijooyin hawlgal ah, sida ururinta tabarucaadka, u qorista soo jeedimo aad u wanaagsan deeq-bixiyayasha, iyo hawlo dakhli dhalin adigoo adeegsanaya ibiinta badeecado ama adeegyo?

Saddex qaybood ayaa lagama maarman u ah in NGO ama urur bulsho uu sii jiro isagoo is dhimeyn. Inkasta oo ay u muuqan karto in shuruudahani loogu tala-galay NGO-yada iyo ururada bulsho ee waaweyn oo keli ah; yar yari waa inay ku dadaalaan inay gaadaan meel kasta oo suurto gal u ah.

### **1. HABABKA IYO HABRAACYADA MAALIYADEED WAXA KA MID AH:**

#### **✓ DULMARID & HORDHAC**

- ✓ Maareyn maaliyadeed oo xooggan iyo xakamayn ay ka mid tahay qiimaha hab xisaabeedka haboon;
- ✓ Kharashyada asaasiga ah (sida, mushaharka, kirada xafiiska, biyaha, laydhka, isgaadhsiinta iwm.) ee ay NGO-du ama ururka bulsho ku daboolo dakhli dhalin, tabarucaad guud, ganacsi ama siyaabo kale oo dakhli dhalin ah.
- ✓ Siyaabo kala duwan oo dhaqaale lagu heli karo, awoodda qorshe maaliyadeed, jiritaanka istraatijiyada maalgelineed.

### **2. AWOOD GUUD OO MAAREYN SIDA:**

- a) Qaab dhismeed urur oo cad.
- b) Guddi siyaasad dejin oo hawl galsan.
- c) Awoodda dejinta qorshe maaliyadeed oo tusmaysan.
- d) Hawl qabad maareyn oo hufan.
- e) Hab maamul sare oo hawlgashan oo leh hab maareynta wararka
- e) Xirfadaha suuqaynta ee balaadhinta adeegyada

### **3. BARNAAMIJKA IYO GUDBINTA ADEEGYADA OO AY KA MID YIHIIN:**

- a) Awooda iyo ka go'naanta gudbinta barnaamijyo iyo adeegyo tayo sare leh.
- b) Jiritaanka halbeegyo iyo cabbiro kale oo lagu hubiyo tayada.
- c) Awoodda war gelin, wax barrid iyo xidhiidhin.

Sii jiritaanimadu waa qayb muhiim ah, siiba marka laga hadlayo NGO-yada iyo ururada bulshada ee ay ujeedadooda kowaad tahay u adeegidda danyarta aan awoodi Karin inay bixiyaan kharashka adeegga. Badiba NGO-yada iyo ururada bulshadu waxay ku tiirsanadaan, ilaa xad, maalgelin dibedeed gaar ahaan kuwooda ku hawlan adeegyada ka-hortagga iyo barnaamijyada fidinta ee ka faaiidaystayaashu aanay bixin Karin. Casharada soo socda ayaa ka heli doontaa dhawr liis hubineed iyo waraaqo shaqo oo NGO-yada iyo ururada bulshada ka caawin kara inay hore u mariyaan xirfadahan.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**DIB-U-EEGID**

Dhawr daqiiqo qaado oo dib-u-eeg in ururka aad ka mid tahay uu waqtigan aynu joogno uu ku hawlan yahay gaadhista sii-jiritaanimo ku salaysan:-

Habab maaliyeed iyo xeerarka, Awood guud ee maareyneed, iyo Barnaamijyo iyo gudbin adeeg. Qeyb kasta oo saddexdan ka mid ah, waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad qiimayso wax-ku-oolnimadeeddu inay wax ku kordhisay sii-jiritaanimada ururka adigoo isticmaalaya halbeeg 1 ilaa 5, 1= sinaba wax qabad uma aha; 3= si uun buu waxqabad u yahay; 5= aad buu wax qabad u yahay. Meesha banaan ku qor isqiimayntaada.

-----  
-----  
-----  
-----

Adigoo ka shidaal qaadanaya natiijada qiimaynta, sheeg talaabooyinka gaar ahaaneed si dhakhso aad u qaban karto si aad u kordhiso awoodaada uu ururku ku sii waari marka waqtigu sii dheeradaba.

-----  
-----  
-----  
-----

Hadaba ku celi layliga adigoo eegaya dhinacyada shafaafada iyo xilqaadka

La xisaabatanka iyo habraacyada lacageed si ay dadka ururka dibada ka ahi u arkaan:

-----  
-----  
-----  
-----

Waa maxay talaabooyinka aad is leedahay waad u baahan tahay inaad qaado si ay dhaqdhaqaaqa lacagtaadu u noqdaan kuwo dadka uga muuqan karto shafafaad? Ay lana xisaabatami karaan taageerayaashaadu?

-----  
-----  
-----  
-----

**DULMAR**

Buugga tilmaamaha ah waxa loo hindisay inuu NGO-yada siiyo wararka assaasiga u ah maareynta lacagaha iyo isku dayo inay ahaadaan kuwo negaada. Hoos waxa ku urursan waxyaalaha aad ka filan karto inaad ka heli doonto qaybaha buugga ee soo socda:

**Cutubka 2aad:**

Xog dhawrka lacagaha iyo warbixinaha u mudan ee NGO-yada iyo ururada bulsho ee aan macaash doonka ahayn, kuwaas oo caddaynaya arrimaha asaaska xog dhawrka lacageed; kontaroolada gudaha, iyo warbixinaha ay tahay NGO/CBO inay si joogto ah u sameeyaan.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

### **Cutubka 3aad:**

Dakhli iyo kharash sanadeedka miisaaniyada hawlgalka, kuwaas oo ay ka mid yihiin ilaha dhaqaale ee NGO/CBO sida qandaraasyada, deeqaha, hadiyadaha, qiimaha adeega, ganacsi ama hawlo dakhli dhaliya. Waxa kale oo cutubkan ku soo bandhigaya dejinta miisaaniyada foomam iyo su'aalo ay tahay inay la weydiyo agaasimaha NGO-da iyo guddiga dejisa siyaasada NGO/ CBO.

### **Cutubka 4aad:**

Dhaqdhaqaaqa lacagta kaashka ah Waxa uu cutubkani iftiiminayaa habraacyada asaasiga ee dejinta dhaqdhaqaaqa lacagta kaashka ah ee miisaaniyada, oo asaasi u ah hawlgalyo maalmeedka NGO/CBO.

### **Cutubka 5aad: Maamul lacageedka**

**DULMARID IYO HORDHAC** Qaybtani waxay tilmaamo ka bixisaa xaqiijinta adeegsiga kontaroolada NGO-yada gudaheeda. Waxa kale oo bixin doona warar ku saabsan male-awaalka, ururinta, ku shubidda Baanka wixii dakhli ah, unugyada lagama maarmaanka u ah dhisidda aasaas adag khayraadka sii-jiritaanimada. Waxa kale oo ka mid ah wararka iibsashada, maareynta hawlaha qolka kaydka.iyo siyaabo kale oo qiimaha loo kontoroolo.

### **Cutubka 6aad: Kormeeridda lacagaha**

Waxay sharax ka bixinaysaa adeegsiga iyo baahidda loo qabo hantidhawrka gudaha iyo dibadda iyo isku xidhka qaabka maareynta lacagaha, taas oo ay raacasan tahay sharaxa lama huraannimada fulinta siyaasadaha qayb kasta.

## **FIIRO**

Buugan tilmaamaha ahi wuxuu adeegsan doonaa saddex nooc oo ah NGO/CBO si uu kuu tusaaleeyo aragtiyaha maareynta lacagaha, istaraatiijooyinka iyo tijaabooyinka uu buugani koobayo. Saddexdu waxay kala yihiin:

- a) Ururo caafimaad,
- b) Kuwa maareeya hanti ama guryo
- c) Iskaashatooyin bixiya agab beereed.

In kasta oo aanay hawlahani wada koobi karin NGO/CBO oo tiro ahaan lagu matali karo midabada jeegaan roobeed oo ka hawl gala aduunka oo dhan, waa inay bixiyaan qaab sal u ah fahamka aragtiyaha, istaraatiijooyinka iyo hababka laga doodi doono.

## **DOORASHOYINKA ISAABINTA**

Xudunta maareynta lacaguhu waa hab xisaabeedka. NGO/CBOs waxay dooran karaan inay iyagu ka hawlgalaan xisaabinta iyo diiwaangelinta ama ay mu-asad xisaabin qandaraas ku siiyaan. Cid kasta oo samaysa xisaabinta, waxa jira xisaabo ay tahay in si joogta loo diyaariyo la isuna dheel tiro, habracyo gaar ah oo ay tahay in la qabto; iyo warbixino la curiyo, kuwaas oo dhamaan ay tahay in si joogta ah loo qabto. Waxaynu doodan qotada dheer ku bilaabeynaa mabaadida maareynta lacagaha NGO/CBO iyo layliyo qaybta 2aad oo aynu eegi doono habab xisaabeedka.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **QODOBADA FURAYAASHA AH**

- NGO/CBO waxay leeyihiin muuqaalo, cabbiro iyo sababo badan oo ay u jiraan. Iyadoo uu kala duwanaashahaasi jiro, sidaas oo kalena ay maareynta lacagtu lagama maarmaan tahay, maareyn lacageed oo wax-ku-ool ahi ay tahay shuruud hadii la doonayo inuu barnaamijka NGO/CBOs uu sii jiro
- Sii jiritaanimadu waa lama huraan haddii aanad qorshaysan inaad hawsha ku guul daraysatid
- Sii jiritaanimadu waxa shardi u ah arrimo ay ka mid yihiin:
  - Qaabab iyo habraacyada lacageed,
  - Awood guud oo maareyn,
  - Awoodda loo leeyahay in barnaamijyada la qorsheeyo, adeegana loo gudbiyo dadka deegaanka ee doonaya una baahan.
- Waxyaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah tayada hababka iyo istiraatiijiyada waxaa ka mid ah:
- Shafaafada, xilqaadka la xisaabtan, wax-ku-oolnimada. Kuwani waa inay ka mid ahaadaan hawlgalkaaga maalin kasta.
- Xudunta hababka lacagtu waa Xisaabinta. Habraac kasta oo aad u raacadu fulinta hawsha, ha ahaato mid ururka gudhiisa ah ama qandaraas, waxa jira xisaabaad gaar ah, habraacyo iyo warbixino lagama maarmaan u ah wax-ku-oolka iyo rumaysiga maareynta lacagaha.

## **QORAALO**

Aasaaska kharashka waa kharashyada kuwa lagama maarmaanka u ah hawlgalada salka ee NGO/CBO. Tusaale waxa ah mushaarada, dhismaha xafiiska, isticmaalada, and iyo alaabta.



**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

# RIKOODHADA IYO WARBIXINAHA CUTUBKA LACAGAHA

C  
U  
T  
U  
B  
K  
A


2



## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

Xisaabintu waa xirfada lagu gorfeeyo, xogdhawro, ururiyo, qiimeeyo, laguna tarjumo hawlgallada lacageed ee NGO/CBO heerkooda iyo baahinta natiijooyinka. Muraadka saldhigga u ah xisaabinta aan macaash doonka ahayni waa inay soo bandhigto siyaabaha NGO/CBO ku heshay lacagaha ama khayrad kale, iyo siyaabaha ay u isticmaashay si ay u gaadho ahdaafta ururka.



Dood kasta oo ku saabsan mabadi'ida xisaabtanka waxa lagala kulmaa dhibaato, taas oo abuuri karta murug ku salaysan haddba meeshaad aduunka ka joogto iyo cidda aad kala doodeysid. Aaraada soo socota ee ku saabsan xafidida xogta lacagaha iyo ka warbixinta xaaladaada lacageed waxay inta badan ku salaysan yihiin wax la yidhaahdo xisaabinta maalka. Halbeegga ay NGO-yada Maraykanka ilaa muddo dhoweyd isticmaalayeen, dalal kalena laga yaabo inay weli isticmaalayaan, ayaa ahayd in loo yeedhiyo sida ay u xafidaya xogaha lacageed, iyo warbixinaha xaaladda lacageed. Marka aynnu og nahay kala duwanaashaha dhinaca shuruudaha xisaabtanka ee dalalka kala duwan, waxaad u baahan tahay inaad xog ogaal u noqoto sharciyada iyo habraacyada xukuma dabecadaha lacagaha NGO-yada iyo ururada bulshada. Xisaabinta maalgelinta waxa loo isticmaalayaa jaantus tilmaama habka ay NGO/CBO uu buugani ka hadlayo ay u xafidaan rikoodhadooda lacageed, sabatoo ah NGO/CBO yar yar way u fududdahay inay qaataan oo kaga hawl galaan gudahooda. Waxay u sii kala baxaan qaarkood dhakhliyo iyo kharashyo inta badan ku salaysan heerar iyo xadi. Hubi sharcigu waxa uu tilmaamayo ka hor intaanad ku dhaqan gelin maalka laguugu deeqay ama habkii kale ee xisaabtan ah.

Waxa kale oo jirta fariin waqtigan loo baahan yahay in maskaxda lagu hayo. Waa iyadoo la arko in cutubkan waxyaalaha uu sharxayo intooda badan aad taqaan. Haddii ay sidaas tahay waa arrin wanaagsan, taas micnaheedu waa in xisaabtanka ururkaagu uu hagaagsan yahay. Hase yeeshee, waxaanu doonaynaa in aanu gaadhsiino NGO-yada iyo ururada bulshada ee laga yaabo inay la blegdemayaan siday u dhisan lahaayeen hab xisaabeed sahlan oo la xidhiidha habka xafididda xogta iyo diiwaangelinta lacagaha oo iyaga u shaqayn kara, isla mar ahaantaasna kobcin kara sii- jiritaanimada ururka.

### **RIKOODHADA ASAASIGA EE XISAABAADKA NGO/CBO YADA**

#### **RIKOODHADA IYO WARBIXINHA LACAGAHA**

Xisaabinta maalku way ka duwan tahay tan ganacsiga. Muraadka laga leeyahay xisaabtanka maalku waa xakamaynta lacagta. A. Maalku “fund” aanxisaabtan gaar oo sooc ah loona hindisay inay daboosho sharci gaara ama shuruudo xisaabtan. Maal (Fund) kastaa wuxuu dakhli ka helaa ilo kala duwan, kuna hawl gasha sida ganacsi isku filan oo leh qaab xisaabeed gaar ah iyo warbixino xisaabeed. Kharashyada ka baxa maalgelinaha waa inay daboolaan dakhliyada soo gala. A. NGO/CBO ama urur bulsho waxaa u banaan inay yeelato maalgelin kaliya, ama dhowr iyadoo tixgelinysa nooca dakhliga ay hesho. Maal galinaha soo socdaa waa kuwa ay NGO-yada ama ururada bulsho ee yar yari ay badi isticmaalaan ama aanay isticmaalin.

*Maalgelinta socota ee aan xadidnayn:* -Maalgelintan waxa loo adeegsadaa in lagu xisaabiyo ilaha dhaqaale een xadidneyn, ee ay guddida siyaasad dejinta ururku siday ula muuqato u isticmaali karto. Hase ahaatee kharashyadu waa inay la jaan qaadaan dastuurka iyo xeer hoosaadyada ururka, ayse ka reeban yihiin xisaabaadka aan xadidneyn ee lagu maalgeliyo dhul, daaro ama qalab. Maalgelinta noocan ahi waxay la mid tahay maalgelinta guud sababtoo ah waxay koobtaa ilaha dakhli oo dhan iyo kharashyada aan xadidneyn sabab kasta ha ahaatee.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

*Maalgelinta Socota Ee Xadidan:* Maalgelintan waxa loo adeegsadaa xisaabinta ilaha dakhli ee xadidan kuwaas oo ah kuwa isticmaalkoodu joogto yahay ama yaal, hase ahaatee loo isticmaali keliya hawlgalyo ay asteeyeen maalgeliyayaashu ama deeq bixiyayaashu.

*Maalgelinta Dhul, Daaro Ama Qalab:* Maalgelintan waxa loo adeegsadaa xisaabinta:

- Dhaqaalaha aan xadidneyn een loo isticmaalin in lagu iibsado ama lagu bedesho dhul, daaro ama qalabka loo adeegsado hawlqabadka ururka.
- Dhul, daaro iyo qalab loo isticmaalayo hawlgelinta ururka.
- Deymaha ama haftooyin loo adeegsado hawlgalada ururka.
- Maalgashi dhul, daaro iyo qalab ama wershado.

NGO-yada iyo ururada bulsho ee waaweyni waxay u baahan yihiin maalgelino ay ka mid yihiin noocyadan:

Deeq Siin Ah

Maalgelintan waxa loo adeegsada xisaabinta la xidhiidha hadiyad ama dhaxal lagu aqbalay shuruudaha deeq bixiyaha kuwaas oo ah :- (a) Maalgelinta asalka ahi inay waligeed ama muddo ama dhacdo cayiman inteedii ahaato. (b) Dakhliga ka soo baxa maalgelinta oo keliya ayaa loo isticmaali karaa muurado guud ama uu cayimay deeqbixiyuhu.

*Yabooho Maalgelineed:-* Maalgelintan waxaa loo isticmalaa xisaabtanka lacageed ee laga yaboohay hayadaha bixiyey.

### **QAA-IMADDA XISAABAADKA**

Maalgelin (Fund) kastaa waxay leedahay xisaabtan ay ka mid yihiin lacag kaash ah, hantida kaydsan, xisaabaadka la filayo inay soo hoydaan, qiimaha adeegsadhaha dakhliga, kharashka telifoonka. Urur kasta waa inuu dakhliyadaa iyo kharashdhyada u leeyahay xisaabaad tusaya siduu urur kasta u isticmaalay dhaqaalahaas.

Taxanaha xisaabaadkaas oo dhan ayaa la yidhaahdaa “Qaa-imada Xisaabaadka.” Waxaa loo adeegsadaa in la ogaado:

- Waa intee lacagta uu ururku haystaa (Hanti).
- Waa intee lacagta lagu leeyahay ururka (Deyn).
- Waa intee faraqa u dheexeeya lacagta uu ururku haysto iyo inta lagu leeyahay (Hadhaaga).
- Lacag intee le’eg ayaa soo gasha (dakhli).
- Lacag intee le’eg ayaa la isticmaalay (Kharash).

Laba warbixin xisaabeed ayaa loo adeegsadaa inay muujiyaan wararka si uu agaasimuhu ama cidii kala ee danaynaysa inay dabagal ku samayso eyna si joogto ah u ogaadaan xaalada lacageed ee ururka oo joogto ah. Warbixinta koowaad waa warbixinta dakhliga iyo kharashka. Ta labaad waa xaashida hadhaaga ama warbixinta heer xaalada lacageed. Ururrada macaash doonka ahi waxay isticmaalaan war bixinta faaiidada iyo khasaaraha. Wax bixinahan waxa tusaalahooda aad ka heli doontaa qaybaha danbe.

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

## XAGEE XISAABAADKA LAGU XAFIDAA?

Xisaabaadka waxa lagu xafidaa buug xisaabeed madhan ama hab xisaabeedka computerka loo adeegsado. Way adag tahay in xisaabaadka lagu xog uruuriyo gacanta, iyadoo la isku dayayo in la sameeyo warbixinaha ay u baahan yihiin dadka dibada ka ah ururrka. Intay suurtagal tahay isku day inaad adeegsato hab xisaabeedka computerka. Taasi waxay ku siinaysaa dhamaan joornaalada soo socda, isla markaana si otomaatik ah ayey u diwaangalisaa dhaqdhaqaaqa lacagta ay ka mid yihiin bixinta mushahaarka, biyaha, laydhka, iyo tilifoonka.

Hab xisaabeedka computerka intaa waxa u dheer, war bixinaha lacagta iyo maareynta oo uu u suureeyaa hab barnaamij oo aad ku geli karto taabashada mawska.

Diiwaanada xisaabaadka haddii aanay ku keydsanayn computer-ka waa in la helaa joornaaladan (buugaagtan) oo lagu diiwaan geliyaa.

## FIIRO

Wey fududahay inaad xogta xisaabaadka ku keydso computerka yar ee la yidhaahdo lap top, adigoo adeegsanaya hab xisaabeedka ganacsiga aan ahayn xisaabtanka maalka sida Quickbooks ama Peachtree. Waxaa laga yaabaa inay dalkaaga ka jiraan hab xisaabeedyo aad ugu haboon N GO-yada iyo ururada bulshadu inay isticmaalaan.

*Joornaalka Guud:* Joornaalka guud waa ka ugu fudud dhinacyada diiwaangalinta xogta. Waxa baddiba la isticmaalaa marka aysan jirin joornaal gaar ah (sida joornaalka bixinta kaashka ama joornaalka lacag qabashadu) aanay jirin ee la doonayo in lagu xafido dhaqdhaqaaqa lacagta. Joornaalka guud wuxuu leeyahay laba khanadood oo qumaati: oo ay mid tahay “deyn” ta kalena “heyn.”

## JOORNAALKA LACAG BIXINTA

Waxa joornaalkan loo isticmaalaa xafidida lacagta cadaanka ah sida xisaabaha in la bixiyo ay tahay, badeecadaha la soo iibsado iyo kharashka hawlgalka ururka. Badiba joornaalka lacag bixinta wuxuu lee yahay khaanada gaar u ah taariikhda, lambarka jeegga, sharax, xisaabaha soo gala ururka, xisaabaha deynta ah, xisaabaad in la bixiyo ay tahay, deyn wax lagu soo iibsaday iyo kuwa kale.

Taariikhda	Lamb.jeega	Sharax	Xisaabta soo gashay	Xisaabta la daynshay	Xisaabta daynta loo bixinayo	Deynta soo iibsashada	Waxakale
------------	------------	--------	---------------------	----------------------	------------------------------	-----------------------	----------

*Jaantuska Iaad:* Joornaalka bixinta lacagta kaashka ah

## JOORNAALKA QABASHADA KAASHKA

Joornaalkan waxa lagu xafidaa dhaqdhaqaaqa lacageed ee kaash ahaan loo qabto, kuwaas oo ka mid yihiin:

- a) Lacagta kaashka ah ee ka soo hoyata iibinta alaabo;
- b) Rasiidhada dulsaarka; iyo saamiga dakhliga;
- c) Lacagta laga ururiyo macaamiisha; iyo
- d) Lacagta ka soo hoyata iibka hantida ma guurta ah.

Sidii joornaalkii hore; joornaalka rasiidhadu wuxuu lee yahay khaanado u gaar ah taariikhda, faahfaahinta, deynta kaashka ah, lacagta laga dhimay iibka, deymo kale, dakhliga, xisaabaha soo hoyan kara, iyo kuwa kale.

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

Taariikhda	Lambarka hubinta	Deyn caddaanah	Lacagta laga dhimay	Lacagta soo hoyatay	Lacagta soo hoyan karta	Deymo kale	Waxakale
------------	------------------	----------------	---------------------	---------------------	-------------------------	------------	----------

*Jaantuska 2aad: joornaalka rasiidhada kaashka ah*

### XISAABAHA DHAKHLIGA

Xisaabaha dakhliga waxa lagu raad guraa ilaha dakhliga urur. Adigoo agaasime ah, waxa lama huraan kuu ah inaad ogaato xaddigga lacagta ka soo hoyatay adeegyada uu ururku qabtay iyadoo la barbar dhigayo wixii tabarugaad uu ururku ku soo hooyey hawl galada lacag ururinta ama qandaraasyo ururku u ka helay Dawladda Hoose. Xulo xisaabaha dakhli ee waxtar u leh ururkaaga. Xisaabaha dakhligu waxay ka muuqdaan warbixinaha xisaabaha dakhliga iyo kharashka sida ku cad bogga soo socda.

Ka feker faahfaahinta uu u baahan yahay maareeyaha barnaamijku intay le'eg tahay si uu u ogaado meelaha dakhligu ka yimi. Waxa kale oo aad ka fekertaa waxyaalaha loo baahan doono in warbixin kasta lagu muujiyo ee ay tahay in lagu daro warbixinaha loo dirayo hayadaha deeqaha bixiyey.

### Tusaale: Xisaabaadka dakhliga NGO caafimaadka ka shaqaysaa

- Fiiga shaybaadhka
- Fiiga daaweynta
- Barista iyo fiiga
- Tabarugaadka
- Deeq Dawladda dhexe
- Siismo gaar ahaaneed
- Qandaraasyo
- Lacagta ka soo baxday iibka agab waxbarasho
- Adeeyo lagu yaboohayo
- Deeq iyo siin aan shuruudo ku xidhnayn
- Dakhli aan shuruudo lahayn oo hadiyad ah
- Dakhli maal gelineed

*Jaantuska 3aad: Tusaale xisaabaha dakhlig*

### KHARASHYADA

Xisaabaha kharashku waxay raadiyaan kharashka uu ururku galayo. Ha ka waaban inaad kharashka ururkaaga u kala jejbiso xisaabo dhawr ah, ama qaybaha aad is leedahay waa loo baahan yahay si loo ogaado lacagta ururka

Ka baxaysa. Kala jebibintan faahfaahsani waxay fududaysaa qorshaha iyo miisaaniyad dejinta mustaqbalka.

Hadhaagga xisaabaha dakhliga iyo kharashku waxay ururaan hal sano. Bilawga sanad maaliyadeedka, warbixinaha xisaabaha waxay tusaan in xisaabaha iyo kharashku ay eber isugu dheeli tiran yihiin lagana bilaabayo sanadka cusub meel madhan.

Tani waxay siisa agaasiimaha fursad uu is-barbardhigo lacagta ururku helay; waxa ku baxay shey kasta sannadkan iyo lacagta shey kasta ku baxday sanadkii la soo dhaafay. Xisaabaha dakhliga iyo kharashka waxaa loo adeegsadaa isbarbar dhigga noocan ah.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

**TUSAALE XISAABAHA KHARASH**

Mushahar.	Telefoonka
Caafimaadka shaqaalaha iyo hawl gabka.	Boostad
Cashuurta mushaharka.	Kirada xafiiska.
Fiiga xeeldheeranimada.	Kirada qalabka
dhakhtarnima	
Kharashka adeegga qandaraasyada .	Shirarka.
Xayeysiis.	Daabacaad/soo saaridda.
Komiishanka Banka.	Abaal marinaha iyo deeqaha.
Dulsaarka deymaha.	Kharashyada lama filaanka ah.
Agab xafiiska	Kharashka qiimadhaca.
Agab caafimaadka.	

*Jaantuska 4 - Xisaabaha kharashka*

**WARBIXINADA DAKHLIYADA IYO KHARASHYADA**

Warbixinta dakhliyada iyo kharashyada waxay noqon kartaa bile iyo sanadeed ilaa wakhti lambaro ay ka dul muuqdaan sanadka. Waxay u ekaan kartaa sidan:

**WARBIXINTA DHAKHLIYADA IYO KHARASHYADA**

Ururkasta Warbixinta dhakhliyada iyo kharashyada ee ku eg June 30, 2000		
KAALMO IYO DAKHLI	June 1-30, 2000	Jan 1-June 30, 2000
Deeq foundation bixiyey	5000	30,000
Deeq dawladda dhexe	0	12,400
Fiigga adeegyada	0	22,000
Isugeyn Kaalmo iyo dakhli	5,000	64,400
<b>KHARASHYADA</b>		
Mushahar	1,500	43,500
Agab xafiis	1,000	2,985
Agabka barnaamij	0	8,350
Biyo, laydh iwm	600	5,400
Isugeynta kharashyada	3,100	60,235
<b>DAKHLIYADA IYO KHARASHYADA KALE</b>	0	0
Galida kharash ka badan dhakhli soo xeroooda	1,900	4,165

*Jaantuska: 5 warbixinaha dakhliyada iyo kharashyada*

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

Maareeyayaal badani waxay rumaysan yihiin in warbixin xisaabeedka ugu faaiido badani ay tahay ta ku siisa bisha socota oo barbar dhigta mid sannad maanta laga joogo, isla mar ahaantaansa barbar dhigta warbino xisaabeedkii sannadihii ka sii horeeyey. Hoos waxa ku muujisan tusaale warbixinta aynnu ka hadlayno.

Ururkasta Warbixin dakhliyada iyo kharashyada oo ku eg June 30, 2000				
	June 1-30 2000	June 1-30 1999	Jan 1- June 30 2000	Jan 1-June 30 1999
<b>Dakhliyada iyo Taageerada</b>				
Deeq uu bixiyey Foundation "X"	5,000	6,850	30,000	25,450
Tabaruc dawlad Dhexe ah	0	0	12,400	11,000
lacagta laga helo adeegyo la qabtay	0	0	22,000	20,000
<b>Isugeynta dakhliga Kharashyada</b>	5,000	6,850	64,400	56,450
Shaqaalaha				
Agabks xafiiska	1,500	1,450	43,500	40,000
Daabicida	1,000	575	2,985	2,885
Agab barnaamij	0	750	0	750
Boosta	0	250	8,350	9,200
Laydh & biyo	0	225	0	350
	600	580	5,400	5,000
<b>Isugeynta kharash</b>				
Dakhli kale	3,100	3,830	60,235	58,185
Dakhligu dheer yahay Kharashka				

*Jaantuska 6: Warbixinaha dakhliyada iyo kharashyada*

**Dib-u-eegid**

Waxaad fursad u heshay inaad aragto qaababka asaasiga ee xisaabaadka. Shaki kuma jiro inaad ka fekeraysay kuwa uu ururkaagu hadda isticmaalo oo aad barbar dhigaysay kuwan adigoo fekeraya. Adigoo ka shidaal qaadanaya wixii aad akhriday hoos ku qor beddeladda aad isleedahay ku samee habraaca xisaabaadkaaga ee aad u aragto inay kor u qaadi karaan sii-jiritaanimada ururka. Waxa kale oo aad sheegtaa siday isbedeladaasi ururka u caawin karaan.

-----

-----

-----

-----

-----

-----

-----

-----

-----

-----



# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

### **Xaashidda hadhaagga Xisaabaadka**

Xisaabaadka dakhliga iyo kharashku waxay iftiimiyaan ilaha urur uu dakhliga ka helo, kharashka uu galo iyo ujeedada kharash kasta loo galay. Marka kharashka ama dakhliga xaashidda hadhaaga lagu diiwaan geliyo, ayuu xisaabiyuhu dakhligaa ama kharashkaa u tusmeeyaa qadarka lacagtaas, xisaab ama xisaabo ha ahaadan dakhli ama kharashe.

Tussale ahaan, xisaabiyuhu ma ha oo kaliya inuu lacagtaas diiwaan geliyo inay ka baxday xisaabaadka dakhliga iyo kharashka, ee waa inuu hubiyaa waxay lacagtaasi ku baxday. Sida kor ku sharaxan xaashida hadhaagga xisaabaadku waxay caddeysaa waxa uu ururku leeyahay iyo waxa lagu leeyahay; taas micnaheeddu maaha wey is goosanayaan sanadka dhamaadkiisa. Waxay sawir ka bixisaa xaaladda lacageed ee ururka waqti kasta oo la joogo. Xisaabaadka xaashidda hadhaagu waxay u qaybsamaan saddex: Hanti, Deyn, Hadhaaga 'fund'

Xaashidda Hadhaaga Hantida - Deymaha = Hadhaagga 'Fund'ka	
HANTI	Lacagta caddanka ah; hantida ma guurtada ah; qalabka iyo alaabada uu ururku leeyahay
DEYMO	Deynta ururka lagu leeyahay inta ay le'eg tahay
HADHAA	Intee lacag, hanti ama qalab uu ururku leeyahay oo aan waxba lagaga lahayn

### **Xisaabaha Hantida**

Xisaabaha waxay sawir ka bixiyaan waxyaalaha uu ururku leeyahay eeg tusaalahan hoos ku sharaxan:

Hantida ururka ee waqtigan (oo ah waxa uu isticmaali karo ama uu kal danbe heli karo)

- Lacagta caddaanka ah ee uu ururku haysto
- Lacagta xisaabaha socda ama kaydka ah
- Lacag uu ururku adeeg ku qabtay ama alaab uu iibiyey oo kaga maqan deyn
- Lacag uu ururku deymiyey ururo kale ama dad

### **Dhul, Daaro, Qalab**

- Kuraas, miisas, kabadho iwm.
- Qalab (mashiino, komboyuutar iwm.)
- Hanti maguurto ah sida daaro ama dhul
- Agab xafiis oo aan la isticmaalin.

### **Xisaabaadka deymaha**

Deymaha hadda jira (ee lagu bixin doono sanad)

- Xisaabaadka la bixin ay tahay
- Credit kaadhka

Deymaha muddada dheer (ee la bixin doono dhawr sano kadib)

- Deyn ururka lagaga leeyahay qalab, gaadiid ama dhul
- Deyn ururka kaga haday qalab, gaadiid ama dhul uu iibsaday

### **Xisaabaadka hadhaagga 'fund'ka**

Mar hadduu hadhaaga fund-ku yahay mid aan wax lagu lahayn, waxa loo sii kala qaybin karaa dhawr xisaabood sida:

- Mid aan qoondaysnayn

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

- Mid aan qoondaysnayn oo loo dhigay muraad gaar
- Mid qoondaysan

### Jaantuskani wuxuu ku siinayaa qeeximo iyo war ku saabsan xaashida hadhaagga xisaabaha

TUSAALE XISAABEED	
Nooyada Xisaabta	Ujeedada loo adeegsado
Xisaabta baanka:	Waxay muujiyaan dhadhaqaaqa ka-saarridda, kaydinta, iyo xisaabaadka suuqa lacagaha.
Xisaabaha soo hoyanaya:	waxay muujisaa xidhiidhka isweydaarsiga Lacagta ee u dhaxeeya ururka iyo macaamiisha; oo ay la socdaan invoice-yadii, foojaradii lacag Bixintu, lacagaha la soo celiyo, iyo cadaymaha Deymaha maqan.
Hantida ururka ee waqtigan:	Waxay muujiyaan hantidda ururka ee qarka u Saaran in lacag caddan ah loo rogo ama sanadka gudahiisa la isticmaalo, dhigaalka badbaadada hantida ururku haysto, rasiidho lacagaha soo hoyan kara, Qiimo dhaca hantida ururka.
Hantida ma guurtada ah:	Waxa loo adeegsadaa cadaymaha mudada fog ee Soo hoyan kara, oo qiimo dhici kara ee ururku leeyahay oo aan lacag caddaan ah ahayn ama aan lagu talo jirin in sanad gudahiisa la lacagaynayn sida kuraasta, miisaska, qalabka , dhul ama daaro.
<b>Deymaha ururka lagu leeyahay:</b> Xisaabaadka la bixin karo: Kaadhyada amaahda oo muujinaya: Deymaha waqtigoodii taagan yahay: Oo ay mid yihiin kuwa la bixin doono sanadkan gudahiisa, sida cashuurta Badeecada iibsantay, cashuurta foojarka lacag bixinta, mushaharka kordhay ama dib loo dhigay iyo deymaha muddada dhow.	Biilasha hadhaa ka ah deymaha ururku qabo. Amaahda kaadhka ee ururka lagu leeyahay
Deymaha muddada dheer: muddo sanad ka badan.	Ay ka mid yihiin hafto deyn ah ooy tahay in lagu bixiyo
Qiimaha 'fundka: Hadhaagga "Fund"-ka: miisaniyadeed oo sharciyan loo ah in la isticmaalo,	oo qayb ka mid ah sooc looga dhigay madaxa qoondeeyey in aanu ka mid noqon lacagta u diyaarka
Qayb fundkan qoodeysan: ku meel gaadh ah oo	ah oo sooc looga dhigay in lagu maalgeliyo qorshayaal mustaqbalka ah.
Hadhaagga fund-ka aan qoondaysnayn: dheer tahay deymanka lagu	oo ah farqiga ay hantida waqtigan ururku leeyahay leeyahay.

*Jantuska 7: Tusaale hadhaaga warqada xisaabaadka*

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

### **TUSAALE XAASHIDDA HADHAAGGA**

Xaashidda Hadhaaggu waxay muujisa hadhaagga xisaab kasta oo ka mid tahay: Hantidda; Deymaha; iyo hadhaagga 'fundka'. Xaashidda hadhaagga waxay magacan kula baxday iyadoo ah wadarta hantida ay le'eg tahay wadarta deymaha oo loo geeyey qiimaha hantida ururka; ama hadhaagga wadaraaha.

Hoos waxaannu kuugu soo bandhignay tusaale Xaashidda Hadhaagga ka bilaabmata isla maalinta warbixinta Dakhliyada, kharashyada iyo isbeddellada aad kor ku soo akhriday. Waxay ku tustaa hantida uu ururku leeyahay ee uu haysto iyo waxa lagu leeyahay.

Tani waa xaashi hadhaa oo ku kooban 'Fund-ka' aan qoondaysnayn. Waxay muujinaysaa hantidda ururka oo dhan (lacag, Hanti ma-guurto ah iwm) ee ay NGO/CBO leedahay iyo deymaha lagu leeyahay. Waxay tilmaanta hadhaagga 'fund-ka' sanadka bilawgiisa, kaas oo ka mid yihiin wixii lagu daray ama laga jaray hawlgalada sanadka socda. Natijada hawlgalada sanadka ayaa ah waxay dakhliyadu dheer yihiin dakhliyadu iyo kharashyada warbixintooda ku eg 30ka bisha Sebtembar, 2000. Eeg kan ka ku xiga ee tusaya sida ay warbixinta dakhliyada, kharashyada iyo hadhaagga fund-ku u galaan xaashida hadhaagga.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

<b>Xaashidda Hadhaagga 'Fund-Ka' Aan Qoondaysnayn Ee Urur Kastaa Adeegsan Karo</b>		
	Sept. 30, 2000	Sept. 30, 1999
<b>Hantidda</b>		
<b>Hantidda socota:</b>		
Lacagta caddaanka ah	6,250	5,000
Qoraalada & xisaabaha		
Soo hoyandoona	0	2,000
Xogdhawrka hantida	1,500	1,000
Isugeynta hantida	7,750	8,000
<b>Hantidda maguurtada ah:</b>		
<b>Dhul</b>	25,000	2,500
Daaro laga jaray qiimo-dhaca	58,000	60,000
Makiinado, qalab laga jaray qiimo dhaca	23,000	2,000
Isugeynta hantida, dhulka & qalab	106,000	10,5000
Isugeyn hantidda guud	113,750	113,000
<b>Deymaha iyo hantida</b>		
<b>Deymaha:</b>		
Xisaabaha la bixin doono	1,850	1,500
Credit kaadhyada	750	3,250
Deymaha mushaharka	1,400	1,200
Isugeynta Deymaha taagan	4,000	5,950
Deymaha muddada dheer:		
Deynta baabuur weyne	8,000	12,000
<b>ISUGEYNTA DAYMAHA</b>	12,000	17,950
Hadhaagga 'fund-ka'		
Hadhaagga fundka aan qoondaysnayn bilawga sanadka	85,800	85,000
Inta uu dakhligu dheer yahay	1,190	(1,735)
Ama ka yar yahay kharashka Wadarta		
hadhaagga fundka aan qoondaysnayn	86,990	83,265
Tabarucaad dhul ooy bixisay Dawladda hoose	14,760	11,785
Wadarta hadhaaga guud ee fund-ka	101,750	95,050
<b>WADARTA DAYMAHA IYO FUND KA HADHAAGA AH</b>	113,750	113,000

*Jaantuska 8: Xaashida hadhaaga fundka aan qoondaysnayn*

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

Urur Xaashida Hadhaaga Aan Xayirnayn September 30, 2000	Urur Warbixinta Dakhliyada, Kharshyada, & Isbeddelyada Hadhaaga Fundka September 30, 2000			
<b>Hantidda</b>		<b>Qoondaysnayn</b>	<b>Qoondaysan</b>	<b>Wadar</b>
Hantida Hadda				
Lacagta Caddaanka ah	6,250	Dakhliyada		
Qoraalada, Deymaha Soo Hoyanaya	0	Fiiga Kiliniga	100	0
Waxa Makhaasiinka Yaal	1,500	Tabarucaad	1,200	0
<b>Wadarta Hantidda Hadda Ee Ururka.</b>	<b>7,750</b>	Fii Waxbarasho	50	100
		Tabruc D/Dhexe	400	350
<b>Dhul Iyo Qalab</b>		Qandaraasyada	75	20
Dhul	25,000	Adeegyo Tabaruc	60	0
Daaro Laga Jaray Qiimo Dhaca	58,000	Iibka Qalabka		
Mishiino Laga Jaray Qiimi Dhaca	23,000	Waxbarashada	800	0
Wadarta Hantida Maguurtada ah, Dhulka		Isugeynta Dakhliyada		
Iyo Qalabka	106,000	& Taageerada	3,585	470
Hantidda	113,750			4,055
		Kharshyada		
<b>Deymaha iyo hantida</b>		Agab Caafimaadka	500	40
Daymaha		Adeegyada Qandaraaska	600	350
Daymaha hada		Gunnada Xeeldeheraha	100	0
Xisaabaadka La Bixinayo	1,850	Telefoonka, Faxka Gude		
Credits Cards	750	& Dibad	50	0
Mushahrka Deynta ah	1,400	Agab Xafiiska	40	0
Wadarta Deymaha Hadda	4,000	Boostada Iyo Noolka	70	20
		Kirada Qalabka Caafimaadka	80	0
<b>Deymaha Mudada Dheer</b>		Daabicidda & Soo Saarridda	0	60
Deynta Ka Hadhay Baabuur Weyn	8,000	Kirada Xafiiska	90	0
Wadarta daymaha	12,000	Biyaha & Laydhka	40	0
		Boostada & Noolka	60	0
<b>Hadhaaga Fundka</b>		Xayeysiiska	5	0
Hadhaaga Fundka Aan Qoondaysnayn		Mushaharka	760	0
Sanadka Bilawgiisa	85,800	Abaal Marinta	0	30
Dakhliyadu Inta ay dheer				
Yihiin Kharashka	1,190	Wadarta Kharashyada	2395	400
Isugeynta Fundka Aan Qoondaysnayn	86,900	Dakhliyadu Inta ay dheer		
Tabaruc Dhul ay Dawladda hoose bixisay	14,760	Yihiin Kharashka	1,190	70
Wadarta Hadhaagga Fundka Aan	101,750	Hadhaaga Fundka Aan		
<b>Isugeynta Deymaha &amp; Hadhaaga Fundka</b>	<b>113,750</b>	Qoondaysnayn Sanadka		
		<b>Bilawgiisa</b>	<b>85,800</b>	

**FIIRO**

Mar haddii xaashiddan hadhaaggu ay tahay tii fundka aan qoondaysnayn, Inta uu dakhliyadu dheer yihiin kharashyada oo keliya (1,190) oo ah fundka aan qoondaysnayn ayaa lagu wareejinayaa xaashidda hadhaagga.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

**Tusaale Xaashiyaha hadhaagga ee Urur Samafal Caafimaad oo leh dhawr Fund.**

Tabaruc Caafimaad iyo Adeega Daryeelka Xaashiyaha Hadhaaga December 31, 2001 and 2002					
Hantidda	20x1	20x2	Deymaha & Hadhaaga fundka	20x1	20x2
Fundka aan qoodaysnayn.					
Lacag kaashka ah	2,207	2,530	Xisaabaha la bixindoono	148	139
Maalgelinaha	3,802	3,195	Deeqaha Baadhista.	596	616
Ballan qaadayada	475	363	Tabarucaad loogu Mustaqbalka	245	219
Qiimaha qalabka waxbarasho	70	61	Isugeynta deynta & dakhliyada dibloodhigay	989	974
Dulsaarka ururey, kharash Soo					
Hoyanaaya & kharash La qadimay	286	186			
			Hadhaayada fundka		
			Ay u qoondaysay gudida Maamulku:		
			Maalgelin moddo dheer	2,800	2,300
			libsiga qalab cusub	100	0
			Muaraad cilmi baadhis	1,152	1,748
			Aan qoondaysnayn oo taal	1,799	1,313
			Wadarta hadhaagga fundka	5,851	5,361
Isugeyn	6,842	6,335	Isugeyn	6,842	6,335
<b>Qoondaysan:</b>					
Lacag caddan ah	3	5	Hadhaagga fundka:		
Maalgelin	71	72	Waxb, xirfadaysan	84	0
Deeqo la filayo	58	46	Deeqo baadhiseed	48	123
Isugeyn	132	123	Isugeun	132	123
<b>Fund Dhul, Daaro &amp; Qalab</b>					
Lacag caddan ah	3	2	Hafto deyn 8% la bixinayo	32	36
Maalgelino	177	145			
Ballanqaadyo	32	25	Hadhaa Fund		
Qiimo dhac dulsaaro & qalab oo dhan 296 & 262	516	513	Kharash la galay	484	477
			Aan la isticmaalin	212	172
			Wadar fund hadhay	696	649
Isugeyn	728	685	Isugeyn	728	685
<b>Fund siismo ah:</b>					
Lacag caddaana	4	10	Hadhaagga fundka	1,948	2,017
Maalgelino	1,944	2,007			
Isugeyn	1,948	2,017	Isugeyn	1,948	2,017

**WARBIXIN LACAGEED**

Laba kooxood ayaa badiba isticmaala warbixino lacageedyada, kooxi waa mid ururka gudihisa ah ta kalena waa ururka dibadiisa. Hababka xisaabaadka iyo habraacayada aynnu hore uga soo doodeyney wax loo hindisay inay kaa caawiyaan joogtaynta isku filnaanshaha oo kaliya ama waa inay isla markaas si cad xaaladda lacageed ee ururka xili kasta oo la joogoba uu dadka gaadhsiiyaa. Taasi waa cusur muhiim u ah qancinta dadka kale in hawl galada NGO/CBO aad ku maamuleysaa si xirfadyaqaanimo, xilkasnimo

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

leh; iyo xilqaad la xisaabtan. Qoraalka soo socdaa waa eegmo kooban oo la xidhiidha fursadaha kala duwan ee kuu diyaar ah inaad u adeegsato warbixinta xisaabintan wax-ku-oolnimo iyo waxqabad leh; adigoo raacaya hababka xisaabtanka iyo habraacyadooda.

### **Adeegsadyaasha Warbixinaha Ururka Gudhiisa.**

Xubno ka mid ah shaqaalaha NGO/CBO-gaaga ee u xil saran qorshaynta, abaabulka, hawl-gelinta, qiimaynta barnaamijyo iyo hawlo gaar ah, ayaa ah inay la socdaan habraacyada xisaab tanka, kuwaas oo lagu tababaray inay u adeegsadaan warbixinaha xisaabtanka agab hawl-gal.

### **Adeegsadyaasha Ururka Dibadiisa.**

**NGO/CBO** waxay ka jiraan aduunyo doonaysa in si qotodheer loogu fiirsado ururadaas. Waxaa jira dad gaar ah, ganacsiyo iyo kooxo gaar u daneeya dhaqdhaqaaqa lacageed iyo waxaad urur ahaan qabato iyo cidda aad caawiso, kuwaas wax ka mid noqon kara hay'adaha deeqda bixiya deyn bixiyayaasha (baananka iwm).

Maalgelinlayaasha, kuwa agabka qaybiya, qandraas-walayaasha iyo ku kale. Markay guushaada wax qabad guuleysatoba, waxaa sii kordha dadka iyo ururada ay tahay inaad la xisaabtan xilqaad leh la yeelato. Kuwa danaynaya warbixinaha xisaabtanka waxay doonaan inay arkaan xaashidda hadhaagga iyo warbixinta dakhliga, kharashka iyo isbeddeladda hadhaaga fund-ka. Warbixinaha lacagaha ee ay diyaariyeen NGO/CBO ee buuxiyeey hal beegyada xisaabinta qaran ama deeqo, waxa ay ku siiyaan faham laga mideysan yahay oo saldhig u noqon kara isbarbar dhigga NGO/CBO kale ama hayadda kale. Tani waxay sawir cad ka bixisaa xaaladda lacageed ee NGO/CBO. Markaad cidda ay khuseyso aad siiso warbixino aan is burinayn oo Muddaysan; ayey NGO/CBO hore u marin kartaa xidhiidh kalsooni leh oo waara oo ay la yeelato adeegsadyaasha warbixinaha, Waxa suurtagal ah inay taasi lama huraan u noqoto inay NGO/CBO ka hesho maalgelin dheeraad ah Hayadaha deeqaha bixiya, Dawladda Dhexe ama ururo kale.

### **Warbixinaha in la fuliyo ay sharci tahay**

Warbixinaha in la fuliyo ay sharci tahay waxay khuseyaan warbixino gaara oo hore loo go'aamiyey in loo qoro hayadda maalgelin bixinaysa ama Dawladda Dhexe. Warbixinaha noocan ah waxa loo adeegsadaa in loo caddeeyo hayadda kormeereysa hawlaha in lacagtii la bixiyey loo isticmaaley si waafaqsan heshiisyadii la kala qortay. Markaad dejinayso qaamada xisaabaadka 'fund', waxa lagama maarmaan ah inaad dib u eegto heshiis kasta si aad u ogaato warbixinaha ay tahay in la fuliyo.

## **XOGDHAWRKA LACAGAHA, WARBIXINAHHA IYO MIISAANIYAD SANADEEDKA**

Warbixinaha Dakhliga iyo Kharashyada iyo Xaashida Hadhaaga ayaa laga gartaa dakhligu inta uu le'eg yahay iyo kharashyada lagu bixiyey. Haddana aan u leexano habraaca qorshaynta, kaasoo ah diyaarinta mala awaalka dakhliyada iyo kharashyada ee miisaaniyadda sanad maaliyadeedka soo socda.

### **Dib-u-eegid**

Waxaynu tilmaanay shan sababood waxay muhiim u yihiin inuu urur lahaado Xogdhawr lacageed: Warbixino u socda ururka gudhiisa iyo dibadiisa, Fulinta heshiisyada uu ururku hayado kale la galay. Qorshe horusocod ah iyo Diyaarinta miisaaniyadda

Ku qiimee ururkaagga adeegsigga xogdhawrada lacagta si uu u gaadho afarta himilo ee kor ku qoran

## DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

adigoo adeegsanaya: A= Waa heer sare

B= Waa wanaagsan tahay, C= waa Meel dhexaad, D= Waa liitaa

Markaad qiimaynta dhameyso, qor hal wax oo aad dhibcaha qiimaynta himilo kasta kor ugu qaadi kartid.

- Shaqaalahayga iyo anigu waxaanu kari karnaa inaanu maalin kasta gaadhno go'aan hawlgal oo ku salaysan xaaladda lacageed ee hadda ka jirta ururka, kuna cad hab xisaabeedka iyo xeerarka. Qiimee hadalkan (...)

-----  
-----  
-----  
-----  
-----  
-----

- Shaqaalahayga iyo anigu waxaanu awoodnaa inaanu si wax-ku-ool ah u adeegsano warbixinahayaga lacageed oo aanu ururkayaga uga dhaadhicino aduunyada oo aanu u beritami karno qandaraasyada; helno deeqo iyo tabarucad; kor-u-qaadno sumcada ururkayaga, oo aanu gaadhno himilooyin kale oo qiimo leh. Qiimee (...)

-----  
-----  
-----  
-----  
-----  
-----

- Shaqaalahayga iyo anigu waxaanu awood karnaa inaanu si ay raali ku yihiin uga soo baxno shuruudaha aanu la galay hayado iyo ururo kale siiba marka laga hadlayo mudadda diyaarinta iyo wararka lacageed. Qiimee (...)

-----  
-----  
-----  
-----  
-----  
-----

- Xogdhawrayadii hore iyo kuwa hadda socdaa waa lama huraan marka la hindisayo qorshayaasha muddada dheer iyo marka la diyaarinayo miisaaniyad sanadeedka. Qiimee(...)

-----  
-----  
-----  
-----  
-----  
-----



# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

### QODOBADA FURAYAASHA AH

- Xisaabtanku waa farsamada lagu gorfeeyo, xogdhawro, ururiyo, qiimeeyo ee lagaga tarjumo hawlaha lacageed ee NGO/CBO iyo heerarkooda; laguna gudbiyo natiijooyinkooda.
- Waxa jira doorashooyin badan oo xisaabtan oo ay kala dooran karaan NGO/CBO. Helidda xisaabtanka uu ururkaagu ku hawl geli karo ee waafaqsan dhamaan heshiisyada ay idinku xidheen hayad ama qof ururka dibada ka ahi, isla markaasna gudbin kara war iyo xoggo sugan oo ah kuwa go'aano tayo leh lagu qaadan karo, kuwaas oo fure u ah maareynta lacagta.
- NGO/CBO yar yar ee leh awood xadidan oo ay ku maareyn karaan dhaqdhaqaaqa lacagaha hab xisaabeedka "fund-ka" ayaa u doorbidan
- Sida ay qaai-madaada xisaabtan u faahfaahsan tahay ayey awoodaada go'aan qaadasho ee hufan ee dhinaca maareyntaada lacageed ay wax-ku ool noqon kartaa.
- Warbixino wax ku ool ah ayaa shaqaalaha ka dhiga xog ogaal, aduunyada dibadda ururka ka jirtana dareensiiya sida xaaladda lacageed ee ururku ay u tahay mid caafimaad qabta, hantidhawrka deeq bixiyayaashana mabsuud ka dhigta, isla markaasna hawlahaaga miisaaniyad dejin iyo qorshayneed ka dhigta kuwo wanaagooda la xaasiddo.

Kahor intaynaan gelin baadigoobka barnaamijyada kala duwan iyo habraacyada maareynta loo hindisay hababka xisaabtanku inay taageeraan, waxaannu doonaynaa inaan mar labaad idin xasuusino in halbeegyada xisaabtanka iyo socodyada qaarkood ay dalalku ku kala duwanaadaan, inkastoo aannu ku kalsoon nahay in kuligiin aad dareensan tihiin, waxa la idinka filayo dhinaca saxdda ah ee hawlgaladda lacageed.

### QORAALO


1. Xisaabaadku waa dariiqa xisaabaayiyaashu ku kaydiyaan kor u kaca iyo hoos u dhaca iyo hadhaaga shay sida kaashka, inventory ama kharash Telefoon. Kor u kacaasi iyo hoos u dhacyadaasi waxa loogu yeedhi karaa \*Debit iyo \*Credit. Hadhaayada midkastaana waxa uu ka kooban yahay ledgers ama diiwaanada xisaabta lagu kaydiyo.
2. Faraqa kaliya ee u dhaxeeya warbixinta dakhliyada iyo kharashyada iyo warbixinta dakhliyada, kharashyada iyo isbedelada ku dhaca hadhaaga fundka waa wararka hadhaaga fundka ee lagu darayey.



**MIISAANIYAD LACAGEEDKA CUTUBKA  
HAWLGALKA SANADKA: ISWAAFAJINTA  
DHAKHLIGA IYO KHARASHKA**

**C  
U  
T  
U  
B  
K  
A**

**3**



# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

Qalabka lacageed ee kaalinta labaad ee mareeynta ururkaaga waa miisaaniyadda hawlgalka sanadeed. Haddii aad yar seexatay intii qaybta labaad aan wadnay, aan ku xasuusino in hab xisaabeedku yahay aasaaska aad ku dhisto maareynta lacagta barnaamijkaaga. Taasi waxay kuu suuro galisaa inay hawlo balaadhan oo ah maaraynta lacagta; aad qabato inta aanad dhexgalin habsocodka miisaaniyadda, waxa haboon in qof walba la xasuusiyo in miisaaniyadda NGO/CBO ay yihiin qorshayaal lacageed ee aanay ahayn documenti laga cabsado. Aduunyadan aan hubitaanka lahayn ee ay NGO/CBO ka hawlgalaan, miisaaniyaddu waa qalab lagama maarmaan u ah socodka ururrka hase ahaatee qariidada uu marayo labadali karo inta aanu bilaabmin sanad miisaaniyaddeedku. Miisaaniyadu waa taladaada u haboon ee waxa aad dakhli haysato ama aad fili karto intaad ku dhex jirto goobada miisaaniyadda iyo sidaan u qorshayso una qoondayso dakhligaas si aad u gaadho yoolka ururkaaga. Waxa kaloo jira siyaabo dhowra oo loo diyaariyo miisaaniyad; madaxa miisaaniyad, hawlqabadka miisaaniyada; miisaaniyadaha mashruuca: miisaaniyada ku salaysan eber iyo kuwa kale oo badan. Waxaanu ku talo galeynaa inaan doodan ka dhigo mid fudud intii suuragala, oo aynu ka hadalo qaabka madax miisaaniyadeed ee ilaa xad ku salaysan hab xisaabeedka fundka. Inagoo og kala duwanaanshaha dadka daneeya NGO/CBO hab xisaadeedka fundku waa habraaca u waxtar badan, in kasta oo aanu ahayn ka u haboon marka laga eego maareynta guud ahaan.

Si aad faham uga hesho habraaca miisaaniyada, waxaannu kuu soo jeedinay qaabkan lixda talaabo ka kooban inaad ka fekerto. Mar haddii bulshada NGO/CBO ay ku kala duwan balaadhka iyo daabacaadda waxa laga yaabaa inay talaabooyinkani u baahdaan in la soo koobo ama dib loo habeeyo si ay u daboolaan baahiyaha iyo xaaladaha ururkaaga taasi waxaynu guudyeeli doonaa markaynu eegayno lixda talaabo.

**Talaabada 1:** Isku dubarid habraaca

**Talaabada 2:** Tilmaan ilaha dakhliga oo diyaari qiyaaso.

**Talaabada 3:** Diyaarin codsiyada barmaamishka.

**Talaabada 4:** Aqaasimaha ayaa naqtiima qiyaasaha dakhliga & codsiyada.

**Talaabada 5:** Guddida siyaasada ayaa naqtiinta hawl galka la soo jeediyey.

**Talaabada 6:** Ansixinta miisaaniyadda iyo dabagalka.

**MIISAANIYAD  
LACAGEEDKA  
HAWLGALKA  
SANADKA:  
ISWAFAJINTA  
DHAKHLIGA IYO  
KHARASHKA**

### **FIIRO**

Talaabooyinku waxay ku salaysan yihiin awoodo laga yaabo inay ka baxsan yihiin waayo aragnimada NGO/CBO yar yar ee madani ah. **TUSAALE** ahaan waxay taalaabooyinkani ku salaysan yihiin shaqaale loo igman karo hawlaha qorshaha maaliyadeed; qof keliyana ha ahaadee iyo guddi siyaasadeed oo si rasmi ah go'aan uga gaadhi karta qorshayaasha miisaaniyadaa. Haddii aad tahay urur qof keliya ah, oo aad ku hawlgasho adigoo ka faaiidayasan guddida siyaasada ama guddi awood xunkun leh, waxa aad adeegsan kartaa si aad hawlahaan u fuliso xeeldheere saaxiibkaa ah oo ka shaqeeya ururka la mid ah.

Waxa laga yaabaa, jaleecada hore, in habraacu aanu tilmaameynaa uu yahay ka NGO/CBO weyn oo keliya. Maaha sidaas. Xitaa haddii uu shaqaalaha ururku yahay qof keliya (oo adiga ah) waxa loo baahan yahay in la qiyaaso dakhliyada iyo kharashyada, si loo ogaado in ururkaagu uu xag maaliyadeed sii jiro karo. Si kale haddii aynu u dhigno hawlgalka lacageed ee ah maalinba maalin gaadhsii ma aha doorasho meel mar ah haddii doonayso inaad noolaato. Haddii aanad adeegsan foomamka tusaalaha ee lagu siiyey, sharaxa foomamka la socda ayaa waxtar weyn u ah ururada yaryar ee heysta waqti aad u yar oo ay miisaaniyadda ku diyarinayaan.

Waxaanu si aad ah kuugu dhiirigelineynaa inaad computer habraacan u adeegsato intii ay suurtagal tahay. Foomamka miisaaniyada iyo qiyaasaha waxa lagu samayn karaa Microsoft Office (Word & Excel) oo aduunka oo dhan laga helo.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **TALAABADDA 1: ISKU DUBARID HABRAACA**

Deji shax taariikheed oo tusineysa taariikh u gaar talaabooyinka soo socda. Bilow waqti kugu filan ka hor intaan sannad maaliyadeeddu bilaabmin, si aad u heshid waqti ku haboon qiyaasid iyo naqtiinba. Ururi documentiga oo dhan ee aad ugu baahan doonto diyaarinta miisaaniyada, shaqaalaha ururkani ku baraaruji habraaca.

## **TALAABADDA 2:-TILMAAMIDA DAKHLIYADA IYO ILAALINTA QIYAASAHA**

Dhibaataada u weyn ee kala kulantaa ururada miisaaniyada, intooda badani waxay kaga timaadaa qaybta dakhliyada. Waa habraac laba talaabo ah:- Tilmaamidda ilaha iyo qiyaasidda waxa aad ilahaas mid kasta ka fili karto inaad ka hesho haddii aad la mid tahay ururada kale, waxa suuragal ah inaad baadi goob joogto ah ugu jirto si aad maalgelin ugu hesho inuu ururka aannuu degin.annagoo taa ka dulayna waxaynu ilo maalgelin oo kala duwan ee laga yaabo inay yihiin kuwo aad qancin karto. Markaynu dhameyno doodaas ayeynu eegi doonaa siyaabaha loo qiyaaso qadarka dakhliga ay tahay inaad ku shaqayso wareegga soo socda ee miisaaniyadda.

## **YABOOHAHAAMA URURINTA LACAGTA**

Lacag ururintu waxay u baahan tahay xirfado iyo waayo-aragnimo bulshada kaga dhaadhiciso aaraadaada iyo ururkaaga ama aad ku soo jiidato, iyo hindisidda siyaabaha cusub oo aad ku kasbato taageeraha dadweynaha xagga hawlaha ururka. Mar haddaynu ognahay in dhaqan kastaa leeyahay siyaabo u gaar ah oo lagu ururiyo maalgelinta mashruucyada bulshada iyo ururada, wey adagtahay inaynu tilmaano waxyaalo gaar ah oo sida ugu fiican u shaqayn kara degaankaaga. Waxaannu doorbidnay hawlo gaar ahaaneed oo aad ku ururin karto lacagta; sida abaabulka xafladdo dhaqameed ama olole albaab ilaa albaab ah, kuwaas waxa ka mid ah fikrado istaraatiijo ku saabsan sidaad u abaabuli lahayd saldhig dakhli oo aad hawlaha ku fuliso:

- Inaad yeelato awoodd aad ku bacdhibi lahayd taageeradda aad u baahan tahay si wax qancis ah. Maxaa ka dhigay risaaladda ururkaaga mid ka duwan ururada ee ka baadi goobaya yabooh ilo la mid ah kuwaaga?
- Tax kuwa sida ugu badan uga faaidaydan doona barnaamijyadda ururkaaga, iyo ay kula tahay inay taageeri doonaan hawlgalada aad ugu adeegayso kooxahaas. Sida muuqata taxo wuxuu leeyahay laba ujeedo oo is huwan: Kuwa aad u adeegi doonto. Iyo Kuwa jecel inay kugu caawiyaan inaad u adeegto kooxahaas.
- Raadi taageerayaal kala duwan, xagga badnimada, tabarucaadka iyo noocyadda dadka tabarucaadka bixinaya. Waxaad doonaysaa inaad hore umariso saldhig bixiyaal rumaysan mabda' aaga oo ku siin karo taageero waqti dheer. Bixiyaha tabarucaad ee hal mar waa muhiim, waxaadse u baahan tahay sanad walba inaad la xidhiidhid si ay tabarucaadka u bixiyaan. NGO/CBO inta badan ma haystaan wakhtigaa.
- Doono hogaamiyayaal bulsho, oo harmuuda oo noqda mabda' aaga. Taasina waa halka ay "Board-ka", agaasimayaasha ama wixii kale ee aad ugu yeedhaba ay faa'iido aan laqiyaasikarin ururkaaga.
- Aqoonso meesha uu barnaamijka ama ururka xoog ku leeyahay, kana faa'iidayso markaad tabarucaad bulshada kadoonayso, matalan risaalada ururkaaga ma tahay mid wax soo jeedinaysa? Makaa go'aan inaad hirgeliso baahiyaha iyo isbedelada loo doonaya. Maku caan baxday inaad tahay qof hal-abuur leh, aqoon ganacsi leh oo ka hawl yaqaansan kuwo kale, oo liishaamaya bulshada u liita, ama tayo kale oo kasta oo NGO/CBO uu kaga muuqdo ama kaga mudan yahay kuwo kale?
- Aqoonso in ururinta tabarucaadka ay lacag ururka ku joogto, taas micneheedu waxa loo baahan yahay in la qorsheeyo waqtiga shaqaalaha iyo hantida kale ee ururka ee lagu fulinayo hawlaha tabarucaadka ururinta.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- Ugu danbeyn “Fundka”, uga fakir hab aan lacag ahayn. Dakhliga waa aaladda wax lagu qabto. Waqtiga iyo hibo mutadawacnimo iyo yaboohda qalab, badeecada ama waxyaale kale ayaa ka qiimo badan tabarucaadka lacagta caaddaan ah. Hadaba markaad daba socoto tabarucaad bulsho, si baahsan u feker.

### **FIIGAADEEGYADA**

Kuwa ka faaiidaysta ama macaamiisha u ah barnaamijka, in lacag qaado ayaa ah mid dakhli dhalin caam ah. Hase ahaatee ogow in doodo jiraan labada dhinac ee arintan, kuwa u dooda in lacag laga qaado ka faa’iidaystayaashu waxay ku sababeeyaan in :-

- Ay dadku jeclaystaan alaabada, hadii laga doono inay lacag bixiyaan,
- Dadka ka faa’iidaysanayaa barmaamishyada waa in ay laqaybsadaan kharashka hirgalinta ee barmaamishka.
- In yaroo lasaaraa waxay taageertaa xeerarka kordhinta adeegyada la fidiyay, iyo iyadoo suuragalin karta kobcinta barmaamishyada. Kuwa ka soo horjeeda in faa’iidaystayaasha lacag laga qaado, waxay ku andacoodaan in:-
- Kuwa u baahan ee ka faa’iidaystaan barmaamishyada NGO/CBO waa kuwa aan badiba haysa lacag ayadeegyada iska bixiyaan.
- Adeegyada ay NGO/CBO ay bixisaa waa adeegyada marka horeba badhtilmaameedku yahay kuwa baahan, waa in markaas lagu bixiyaa lacag la’aan.

NGO/CBO ah nooca daryeelka caafimaadka ayaa matalan, saari kara lacag ay ka mid tahay diiwaangelinta, la-talinta, daawada, adeegga shay-baadhka, iyo qiimaha sariirta maalintiiba haddii adeeg la siiyo bukaan jiifka. Waxa kale oo ay NGO/CBO lee yihiin qorshayaal qadimaad lacageed oo ay lacag yar ka qaadaan booqashada iyo daawadda.

Ururada leh qorshayaal caymis, dadka aan xubnaha ka ahayn waxay ka qaadaan adeega iyo daawadda lacag u dhiganta ta uu cusbitaallada gaar ahi ka qaadaan. Adeegyada ka-hortagga ah inta badan waxa lagu bixiyaa lacag la’aan. Marka daawada iyo adeegyada kaaba macaash lagu iibiyo, waxay NGO/CBO ku hawlan caafimaadka ay ka dhaliyaan lacag ay ku kaabaan Daryeelka caafimaad ee ka-hortagga ah iyo adeegyada kale ee loogu talo galay bukaan jiifka dhaqaale ahaan liidata.

### ***Eray digniin ah oo la xidhiidha qorshayaayasha qadimidda lacagta***

Badiba ilaha dakhligani maaha kuwo ku guulaysta dakhli ururinta, waxa iyana jirta fiiga xubinimadu inta badan inay ku soo hoyato nisbad ahaan mid aad u yar marka la barbar dhigo wadarta dakhliga guud. Haddii fiiga xubinimo lagu saleeyo miisaan daadegsan oo dhinaca karaanka wax bixineed ah, xubnaha isku qoraa intooda badani waxay noqdaan kuwo dhaqaalahoodu liito. Sabab kale oo la wada og yahay ee guul gaadhis la’ aanta barnaamiyadan waa iyagoo intooda badani aanay lahayn muddo la sugo intaanay xubin noqon, sidaas darteed waxa dhacda in dadku ku soo biiraan marka ay bukaan oo kaliya.

### **DEEQAHA**

Deeqahu waa abaalmarin lacageed oo deeq-bixiyaashu hibeeyaan si ay u taageerto mashruuc ama barnaamij lagu soo weydiistay soo-jeedin ama arji. Saddexda ilood ee deeqaha ugu mudani waa dawladda, ururo loo asaasay muraad gaar ah, iyo shirkadaha waaweyn.

**DEEQAHA DAWLADDA:-** Waxa ka mid noqon kara heerarka kala duwan ee dawladda sida dawladda dhexe ee dal, magaalo ama heer kale oo u dhexe ee dawladda. Deeqaha dawladdu waa kuwa lagu bixiyo hab tartan. Ururka doonaya deeq waa inuu deeq bixiyaha dawladda usoo gudbiyaa soo-jedin ama codsi. Taa kadib waxaa caado ah in la qiimeeyo soo-jeedinta lana go’amiyo ansixinta “Fundka” oo lagu salaynayo

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

hab qiimayn hore loo go'aamiyey. Sharci ayaa badiba qeexa muraadka guud ee deeqaha dawladda, Dawladda deeq bixiyaha ahina waxay doorbidaan inay deeqaha siiso mashaariicda liishaamaya waxyaalaha iyaga ay la tahay inay yihiin baahiyo. Soo jeedinaha ay doonayaan inta badan waa kuwa qoraalkooda aad u dheer yahay isla markaasna adag yahay ayna tahay inay waafaqaan taariikh loo cayimay soo gudbintooda. Arrinta la yaabka ah ee fursadaha deeqi waa waqtiga uu qoraalka soo jeedintu u baahan yahay iyo taranka argagax leh ee inta badan ka jira dawladda ama ururka deeq bixiyayaasha ah.

Dawladdaha deegaanka iyo kuwa qaran waa ilo maalgelin oo muhiim u ah NGO/CBOs badan oo ka jira dalalka soo koraya. Taageerada dawladdu waxay noqon kartaa tabarucaad alaabo; ka dhaafid cashuur ilaa noocyo badan oo taageero lacageed oo toos ah waxaan caadi ahayn in NGO/CBO ay hesho isla mar qudha taageero dawladdeed oo kala duwan.

**DEEQ BIXIYAYAASHA MURAADKA GAARKAAH Seesaska (Foundations).** Ururadani waxay ku hawlan yihiin deeqaha. Ururadani waxa in badan bartilmaameed u ah arrimaha iyo baahiyaha soo if-baxaya. Foundations: kuwani inta badan shuruud ka ma dhigaan ama ma doonaan soo jeedino qoraal ah, isla markaas ma laha shaqaale badan oo bixiya caawimada ama dabagal ku sameeya codsiyada ama su'aala codsadaha. Ugu dambayn waxa adag sida war looga helo foundations-ka iyo mashaariicda ay diyaar u yihiin inay taageeraan. Waxa jira shan nooc oo foundations kala duwan ah:-

*FOUNDATION*” leh muraad guud oo heer qaran ama heer caalami ah:-

“Foundation”-nadani taariikhiyan waa kuwo leh heer wax qabad oo cayiman iyo siyaabo ay lacag deeq u bixiyaan. Badiba waxay haystaan lacago badan oo ay bixiyaan. Waxay leeyihiin dano faro badan, gaar ahaan waa kuwo daneeya mashaariic leh rajo sare saamayn ballaadhana reebi kara. Waxa kale oo ay maalgeliyaan mashaariicda aragtidda leh hal abuur.

*FOUNDATION-NADA* leh muraad gaar ah ee heer Qaran ama heer caalami ah:-

Kuwani waa kuwo maalgelin soo-jirayn ah siin jiray mashaariicda adeegyo gaara sida kaabayaasha, deegaanka, caafimaadka, dadka gaboobay, iwm.

*FOUNDATION-NADA Qoys:-* Wuxuu kani leeyahay guddi hogaamineed oo ka kooban xubnaha Qoys maal qabeen ah oo caawiya dadka saboolka ah ama baahan; gaar ahaan siiya caawimo lacageed. Habka ay wax u bixiyaan waxay ku salaysan tahay waxa ay xiisaynayaan qoysku. Qoysku kala mudnaanta waxyaalaha ay daneeyaan waxay isla beddeli karaan xilli. Xidhiidh lala leeyahay xubin qoyska ka mid ah ama saaxiibkood ayaa faa'iido gaar ahaaneed leh markaad deeq ka doonayso “Foundation” noocaa ah.

*FOUNDATION-KA Shirkadaha:-* Inkastoo ay shirkaduhu karaan oo ay bixiyaan deeqo, shirkadaha qaarkood ayaa deeqdooda mariya “Foundation” maamula oo dejiya hawlhooda bixinta deeqaha. Habkani wuxuu yareeyaa u-nuglaata shirkaduhu u nuglaan karaan khasaaraha iyo macaash sanadeedka.”Foundationada”shirkaduhu waxay badiba siiyaan deeqahooda ama gobollo ay ku leeyihiin warshado ama dano gaara. Sidaa darteed waxay bartilmaameed ka dhigtaan mashaariicda shaqaalaha shirkada ama dhaqaalaha magaalo ay warshado ku lee yihiin saamaynta togan ee ay ku yeelan karaan bulshooyinka.

*“FOUNDATION” Beeleed:* “Foundatoin-nadani”waxa inta badan abuurta muwaadiniin daneynysa danta guud ee bulshada, Foundationadaasi waxay u jiraan inay daboolaan baahiyaha bulsho gaara. Inta badan waxay maal galiyaan mashaariicda si hal abuurimo leh u dabooli karta baahiyaha bulsho gaara ee markaa taagan. NGO/CBOs ka shaqeeya bulsooyinka aan lahayn “Foundation” beeleed ayaa suura gelin kara inay abuurmaan “Foundation” beeleed waxtar u noqon karaa marka la abuurayo, haddii la marti qaado hogaamiyayaasha maal qabeenka ah, iyo hogaamiyayaasha ganacsi inay isku waafaqaan ka doodida aragtida.



## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

Raadi inaad hesho qof soo saara buug koobaya “foundationnada” ka jira dalkaaga ama mandaqadaada. Waa ri’yo guud oo inta badan ay daabacadu dalad NGO kaasoo noqon kara ilo war iyo dhiiri gelin. Hadii aanu jirin, isku day inaad abuurto, ka dibna aad iibiso adigoo ka dhigaya hawgal uu ururkiinu qabto sanad kasta.

**Urur Shirkadeed:-** Waa shirkad ka kooban shirkaddo isku tegay oo biiro lacageed inta badan ku maalgeliya mashaariic ay u arkaan in ay yihiin maal gashi danahooda hadba aminta la joogo ama mustaqbalka. Matalan shirkadaha waaweyni waxay deeqo siiyaan mashaariicda wax ka taraysa tayada nololaha. sida far-shaxanka, hay’adaha caafimaadka, dugsiyada iyo jaamacadaha. Markay sidaas sameeyaan, waxay kobciyaan baaqa beesha ee ku saabsan degaanka oo ah goob xiisa leh oo lagu noolado.

Taasoo dhiirigelisa shagaalaha cusub ee shirkado qoranayaan iyo kuwii hore oo ay shirkadu tababaro siiso si ay ugu nagaadaan shaqada. Shikadaha gaarka ah iyaguna waxay siiyaan lacag mashaariicda mabda’ ku dhisan, kuwaas oo beesha u muujiya in shirkadu ka qayb qaadatay wanaajinta tayada nololaha. Sidaa awgeed, mashaariicda hal-ku-dhigga u ah beesha ee sumcada shirkadna dhisaysa, ayaa shirkaduhu daneeyaan inay maalgaliyaan.

### **QANDARAASYADA DAWLADDA**

Mararka qarkood ayay NGO/CBO la wareegaan hawl ay wakhtigan faraha ku hayso dawladdu ama ay dawladdu isku dubarido barmaamij aanay doonayn inay iyadu si toosa uga hawl gasho. xaaladan oo kale, dawladdu waxay siisaa lacag NGO/CBO si uu ururkaasi adeega u bixiyo. Tusaale ahaan, dalalka qaarkood, cusbitaalo ay NGO/CBO maamusho ayay dawladda u aqoonsataa inay noqdaan cusbitaalo degmo oo xil qaaday inay fuliyaan adeegyada cusbitaalka degmada oo dhan NGO/CBO ay dawladdu siiso deeqo kab ah ama taageero kale. Adeegyada kala duwan ee ay dawladdu ogolaan kartaa inay qandaraas NGO/CBO ku siiso ayaa dalba dal kaga duwan yahay, gobolbna gobol ay isku dal yihiin, ay u kala duwan yihiin.

### **LACAGTA SIINTAAH (Endowment)**

Waa qadar lacag ah oo maalgashi dakhli dhalin ah. Waa noocyo kala duwan siintu:- Middi waa lacag ururka ku xidha inuu dulsaar isticmaalo, hase ahaatee aanu taabanayn rasamaalka. Kuwana waxay ogol yihiin in raasamaalka la isticmaalo iyadoo shuruudo lagu xidhiyo, caadiyana noqon karta tiro boqoley ah oo aan la dhaafi karin sanad walba ama waqti go’aan dabadii. Lacagta siinta ahi way u dabaraan kartaa, xaladaas oo NGO/CBO ay u isticmaali karto dakhliga kordhay muraad gaara sida qabasho adeeg ama aan dabranayn. Hadda oo ay dawladda iyo deeq bixiyayaasha maalgelinta NGO/CBO ay soo yaraanayaan ayaa dhisidda “(endowment) ay noqdeen dakhliga joogtada ah oo ay doorbidaan NGO/CBO iyo deeq bixiyayaashu kaleba. Ilaha “lacagta siinta ahi” waa “foundation” dawlaga ah, mucaawinooyinka hay’adda Dowladda iyo qofka gaarka ahi.

### **HAWLAHA DAKHLI DHALINTA**

Inkastoo ay yaboohu, tabaruaadku, ururinta lacagta, qiima isticmaalka, iyo xubinimada lacagta ahi, ay yihiin ilaha ugu weyn ee kheyraadka beesha maalgelisa NGO/CBO, ayaa ururadaas qaarkood ku kabaan dakhligooda hawlgalo dakhli dhaliya. Tusaale ahaan, NGO/CBO ayaa mararka qaarkood dakhli ka dhaliya markay bixiyaan aqoon farsamo, tababar iyo adeeg cilmi baadhis oo ay u qabtaan NGO/CBOs kale ama loo-shaqeeye gaara. Inay NGO ama CBO hawlgal ganacsi ku dhaqaaqdo waxay tahay war- wanaagsan, iyo wax-xun. Marka hore warka xun:- waxay wiiqi kartaa xaaladaada cashuureed, waxay ka cadhaysiisaa deeq bixiyahaagga, oo markaas noqota mid wax soo jiida kadibna ka fogaato risaaladaadii ahayd inaad u

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

adeegto kooxaha tabaalaysan waxa kaloo laga yaaba inaad u baahato inaad hindisto habraaca xisaabtan oo gaara, si aad u hubiso in lacagta si gaar ah loo maareeyo.

Mar hadaad ku foogan tahay hawlo ganacsi si aad u taageerto hawlaha NGO aan macaash doon ahayn, waxaad u baahan tahay inaad samayso xeer aad macaashka ku wareejiso oo shafaaf ah.

Warka wanaagsanina waa:-

Abuuridda urur ganacsi oo gaar ah; waxay siisaa xoriyad ilaa xad ah habka uu ururku ku hawl galo oo siisa fursado lagu maal geliyo isku-dayada kale. Metalan, waxa laga yaabaa inaad doonto inaad macaashyada u isticmaasho dhisida barnaamij deymo yaryar ururada bulshada.

### **DIB-U-EEGID**

Sidaas kor ku soo aragtay, waxa jira ilo dakhli dhelina oo ay ka faa'adaysan karto NGO/CBO. Inta aynaan hore u dhaqaaqin, il-bidhiqsi ka fakir, adigoo eegeya istraatijiyada ururkaagu uu u dhalin karo dakhli iyo siyaabo kale oo ah taageero toos ah oo kordhisa sii-jiritaanimada ururka. Halka hoose ee banaan ku qor meelaha u mudan ee dakhli iyo boqolkiiba inta mid waliba ka le'eg yahay miisaaniyadaada hawlgal ee hadda.

-----

-----

-----

-----

-----

Haddana, naqtiin aaraadda badan ee kor ku xusan, qor khayraadka filashada leh ee aanad hadda dabo socon, kadibna isku dubbarrid qorshe aad ku kordhin karto filashada saldhigga maalgelin ku salaysan fakir cusub.

-----

-----

-----

-----

-----

### **ODORASKA (Qiyaasta) DAKHLIYADA**

Qaybta kale ee arrini kaaga iman kartaa waa inaad odorosto (Qiyaas) dakhli intee le'eg baa ka iman doona? Xakee? sanad maaliyadeedka soo socda. Xigmada ugu wanaagsan ee aad ku dhamaystiri kartid hawshan waa waayo-aragnimada aad ka heshay maalgelinta ururkaagu sanadihii aan soo dhaafnay, inta ay le'eg yihiin dakhliyada aad ka heshay il walba shan sanadood ayaa noqon kara bilawga odoroska dakhliyada. Adigoo adeegsanaya xogta shan sanadood (haddii la hayo) ayaa kaa siin karta war cad siduu dakhligu ahaa sanado dhawr ah, iyagoo ku tusaya isbedelo xiliyeedka iyo kuwa aan caadiga hayn. Waxay ku siisaa sawir cad koritaanka caadiga ah ee ilaha dakhli ay ahaayeen sanadahaas. Mar haddii aad faraha ku dhigto xogta, su'aashu waa "maxaa inaan sameeyo ay tahay si aan u helo odoros sugan oo ku saabsan dakhliga miisaaniyadda sanadka". Jawaabtu ma fududda. Awoodda suggidda odoroska dakhliga waxay ku xidhan tahay waayo-aragnimo, inkastoo xataa dhawr sanadood waayo-aragnimadooda laga yaabo inaan odorsku



## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

noqon mid dhamaystiran oo lagu tiirsan karo.

Waa in laga eegaa taariikhda xogtu siyaabaha ay isu beddeshay, tixgeli isbedeladda barnaamijka, tusayaasha dhaqaalaha, talada dadka, kadibna go'aanso lambarka intii suuragal ugu dhow dakhliga meel kasta laga filayo ee miisaaniyadda sanadka soo socda.

Taariikhdu sida ay isu beddesho oo lagu kaabo aqoonta barnaamijyada NGO/CBO bixiso, ayaa badiba ah dakhliga ugu dhaw ee sax ah. Hase ahaatee, odoraska dakhliyaddu ma aha mid dhamaantiisba ay ujeedo koobi karto ee inteeda badani waxay ku tiirsan tahay male malayn. Waxa markaas imanaysa su'aasha ah haddii aanay suuragal ahayn in la gaadho odoraska dakhliyada sannadka soo socda oo sugan, miyaanu ururku halis u ahayn inuu golo kharash ka badan dakhliga? Suurtagalnimada arrintaasi, nasiib darro waa mid NGO/CBO cudur ku noqotay. Taasi waa ta keentay in bil kasta la kormeero oo lala socdo dakhliyada dhabta ah ee la ururiyey oo la barbar dhigo dakhliyada la filayey, iyo kharashaadka dhabta ah oo la bar bar dhigo dakhliyada dhabta ah ee la ururiyey. Arrintaasi ayaa ah mid aad u muhiim ah. Inagoo ka duulayna xaqaa'iqga noloshu ee NGO/CBO intooda badan, waxa lama huraan ah in la noqdo muxaafid marka aynu odoroseyno dakhliyada.

Markaad ku hawlan tahay odoroska dakhliyada, waa inaad ahaato xume-fishe. Haddii xogta aad heshay ee isbed bedelka dakhliyadu ay noqoto laba tiro mid kood, qaado tirada yar. Tan kale, haddii ay sannad maaliyadeedka gudihisa ay muuqato in dakhliyadii la filayey ay ka yaraanayaan tii miisaaniyadda, waa in agaasimuhu uu dib-u-habayn ku sameeya

### **HORDHAC WARQADA SHAQADA EE ODOROSKA DAKHLIGA FOOM (A)**

Warqada shaqada odoroska (qiyaasta) dakhliga ee kala ah Foom A, B, iyo C, waa kal kaaliyayaal loo adeegsado qiyaasida dakhliyada. War baa lagu siiyey iyadoo laysku dayaayo in lagugu xiiso gelinayo sidaad u bilaabi lahayd isticmaalka foomka laba bilood ka hor dhamaadka sanadka maaliyada. Qaybta hoose ee foomku waxay tustaa taariikh iyo xog wadareed ku saabsan afartii sanadood ee aynu soo dhaafnay oo ay weheliso korodh boqolkiiba.

Qaybta hoose ee foomku waxay tustaa lacagta bishii la ururiyey. Lacagta bil walba ururtay intay boqolkiiba ka tahay wadarta ilaha dakhliga ayaa tusaale u ah lacagta la fili karo. Waxa muhiim ah waqtiga uu dakhli soo hoyanayo, si aad u hubiso in ay lacagi taalo marka aad u baahan tahay. NGO/CBO si xooggan ugu tiirsan dakhli aan soo hoyanayn ka hor badhtamaha sanadka maaliyaddu waxay ku khasban tahay in waqtigaas la sugto iibsashada alaabada waaweyn sida qalabka. NGO/CBO dakhligedu uu si joogto ah u soo hoydo sanadka oo dhan uma baahana inay iibsasho alaab waaweyn sugto, waayo? Sanadka oo dhan ayey iibsan kartaa. Hoos waxa ku yaal sharaxa ereyada ku muujisan foomka:

**Ilo Dakhli:** waa erey tusmeeya dakhliga uu foomkani war ka bixinayo.

**Tirsi xisaabeed:** Waa hab tiro oo ka mida tirsi xisaabeed aduunku isla qaatay.

**Sanad maaliyadeed:** Khaanadani waxay tustaa taariikhdiisii afar sano oo tegay, qiyaasta dakhliga sanadka socda, iyo male-awaalid miisaaniyad sanaddeed.

**Lacagta soo hoyatay intay le'eg tahay:** waxay tustaa lacagta soo hoyatay sanad wal oo kor ku xusan inta qadarkeedu yahay, waxa kale oo ay tustaa qiyaasta sanadka socda iyo male-awaalka miisaaniyada sanadkan.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**% Isbeddelka ku dhacay sanad maaliyadeedkii ina dhaafay:** Waa khaanada loo xisaabinta boqolkiiba inta korodhay sanad ilaa sanad.

Waxa loo xisaabiyaa sida soo socota:

$$15,000 - 10,000 / 10,000 = 50.00\%$$

$$18,754 - 15,000 / 15000 = 25.03\%$$

$$24,000 - 18,754 / 18,754 = 27.97\%$$

**Isbeddelada, Isbeddelka boqoleed ee la hagaajiyey, isbeddelka la hagaajiyey iyo sharax:** khaanadan waxa la isticmaalaa hadii uu jiro korodh ama hoos u dhac ku yimaada ilaha dakhliga. Waa muhiim in xaaladahaas la diiwaangesho si loogu adeegsado sharax ahaan iyo odoroska mustaqbalka.

Qaybta hoose ee foomku wuxuu meel siiyaa rasiidhada bileyda afarta sanadood ee u danbeeyey iyadoo ay weheliso qiyaasida iyo miisaaniyada ku talo galka ah ee sanadka socda. Rasiidhada bilaha waxa la buuxiyaa iyadoo ku salaysan taariikhda rikoodhada. Tusaale ahaan, boqoleyda waxa lagu xisaabiyaa sida soo socota iyadoo la adeegsanayo sanad maaliyadeedka

98-99 bilaha July, August, iyo Septembar:

Dakhli bileedka / Wadarta dakhliga sanadka

$$1,440 / 24,000 = 6.00\%$$

$$1,670 / 24,000 = 6.96\%$$

$$1,200 / 24,000 = 5.00\%$$

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

**Foom A: Warqada Odoroska Dakhliga**

**Isha Dakhliga: Fiiga Rugta Caafimaad**

Tirsiga Xisaabta: 313

Sanad maaliyada	Lacata la qabtay SH	Isbeddel % ku S.M tegay	Isbedeladda	Isbeddelka% Ee la hagaajiyey	Sharaxa
95-96	\$10,000	N/A			
96-97	15,000 18,754 24,000	50% 25.03% 27.97%	Haa, korodhka Qiimaha adeega oo kordhay 25% kana kacay \$5 Oo gaadhay \$6.25 booqasho	25%	Korodhka % waxa loo Xisaabayaa si ka duwan marka Qiimaha adeegisgu isbedelo. 1995-96, \$ 10,000 ayaa la uririyey oo ku salaysan qiime \$5. 1996-97 qiimaha adeesigu wuxuu kordhay 25% oo uu gaadhay \$6.25 adeegsadihiiba. Tirada macaamiishu wey isbed bedashaa min sanad ilaa sanad.
97-98	18,754	25.03%			
98-99	24,000	27.97%			
99-00					
00-01					

Sanad	July	Aug	Sept	Oct	Nov	Dec	Jan	Feb	March	April	May	June	TOTAL
SK95-96	600	700	500	700	700	700	1,000	1,500	1,100	900	800	800	10,000
% ee wadarta	6%	7%	5%	7%	7%	7%	10%	15%	11%	9%	8%	8%	100%
SK96-97	950	1,000	750	1,050	1,000	1,10	1,500	2,250	1,650	1,350	1,225	1,175	15,00
% ee wadarta	6.33%	6.67%	5%	7%	7%	7%	10%	15%	11%	9%	8%	8%	100%
SK96-97- 97-98	1,125	1,310	940	1,305	1,315	1,885	2,813	2,063	1,688	1,505	1,480	18,754	18,754
% ee wadarta	6%	6.99%	5.01%	6.96%	7.01%	7.07%	10.05%	15%	11%	9%	8.02%	7.89%	100%
SK98-99	1,440	1,670	1,200	1,680	1,690	1,670	2,400	3,600	2,640	2,160	1,940	1,910	24,000
% ee wadarta	6%	6.96%	5%	7%	7.04%	6.96%	10%	15%	11%	9%	8.08%	7.96%	100%
SK99-00	1,872	2,184	1,560	2,140	2,194	2,104	3,120	4,680	3,432	2,808	?	?	26,094

Tusaalaha soo socda waxaynu ku qiyaasi doonaa 2 bilood ee u danbeeyey sanad maaliyadeedka 99-00

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**TUSAALAYAAL SIDA LOO ADEEGSADO XOGTA KOR KU TAAL SI LOO**  
**QIYAASI LAHAA DAKHLIYADA MUSTAQBALKA (FOOM B)- DOORASHADA**  
**1aad**

- A. Boqoleyda (%) korodhka wadar sanadeedka ee dakhliyada la ururiyey bishii May ee 4tii sanadood ee tagey:  
FY 95-96 = 8.00%                      FY 96-97 = 8.17%  
FY 97-98 = 8.02%                      FY 98-99 = 8.08%  
Si joogto ah, ayaa 8% wadarta dakhli loo uruiyey bishii May.  
FY 95-96 = 8.00%                      FY 96-97 = 8.17%  
FY 97-98 = 8.02%                      FY 98-99 = 8.08%  
Si joogto ah, ayaa 8% wadarta dakhli loo uruiyey bishii May.
- B. Eeg korodka boqolkiiba ee wadarta dakhliyada 3dii sanadood ee u danbeeyey:  
  
96-97 = 50% (.5) Ama 25% (.25) marka la habeeyey  
97-98 = 25.03% (.2503)  
98-99 = 27.97% (.2797)  
si joogto ah ayey dakhliyada ugu korodhey 25% 3dii sanadood ee u danbeeyey. Korodhka 98-99 ayaa in yar ka sareeyey kuwa kale.
- C. Lacag intee le'eg bay 25% iyo 27% oo ah korodhka ka sareeye korodhkii 98-99 noqonayaan?  
\$ 24,000 x 125% = 30,000  
\$ 24,000 x 127% = 30,480
- D. Waa intay 8% oo 30,000 iyo 30,480?  
\$ 30,000 x 8% (.08) = 2,400  
\$ 30,480 x 8% (.08) = 2,743
- E. Dakhli intee le'eg baa sanadka 99-00 ilaa hadda la ururiyey?  
1872+1670+1560+2140+2194+2104+3120+4680+3432+2808=\$26,094.  
  
Dakhli intee le'eg ayaa la ururiyey ilaa April 30, 1999?  
1440+1670+1200+1680+1690+1670+2400+3600+2160= \$20,150.
- F. \$20,150 boqolkiiba intay ka tahay wadarta 24,000?  
20,150 / 24,000 = 83.95% ama 84%  
  
Haddii wadarta dakliga la filayo in la helo sanadka maaliyada ee 99-00 uu yahay 30,000 ama 30,480; ma la odhan karaa 84% ayaa dakhligii soo hoyday?

**XUSUUSO**

FY 99-00      20,150 / 24,000 = 84%  
26,094 / 30,000 = 87%  
26,094 / 30,480 = 88%

Mar haddii labada nisbadoodba ay ka sareeyaan 84%, waxa muuqata in dakhliyadu ay bartilmaameedkii haystaan, iyadoo sanadkii maaliyada ee 98-99 la ururiyey ugu yaraan ku kordheen 25% tii la ururiyey 98-99 ee dhamayd 24,000. Mar haddii uu korodhku ka sii wanaagsan yahay taas, qiyaasta 30,480 ayaa la adeegsan karaa.

- G. Sidaa darteed waxa la adeegsan karaa qiyaasta May, lambarkeeda weyn ee talaada 'D' oo ah \$2,743.
- H. Habraacaas xisaabineed mid la mida ayaa lagu celin karaa Bisha June ama waxa

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

la isugeyn karaan 26,094 + 2,743 oo aad ka goyso qiyaasta ah 30,480. Taasi waxay qiyaasta bisha June ka dhigaysaa 1,643.

**FIIRSO:** xisaabin kasta dabadeed waa kuu faa' iido inay natiijooyinka ku sawirto 'Graph' si aad u aragto muuqaal saxa ah.

Mararka qaarkood ayaanay xisaabinuhu jawaab sagan ku siinin, waa faa' iido inaad eegto sawirka inta aanad gaadhin go' aanka kama dambays ah. Kolka aad 'graphka' eegeyso, tixgeli arrimaha soo socda:

- Ma jiraan korodh iyo hoos u dhacyo xidhiidhsani?
- Hadaad eegto "graphka", maxaad filaysaa bilaha May iyo June inay sameeyaan?
- Labada mid koodna ma ku dhaw yahay qiyaasidaadii, markaad 'graphka' eegto?
- Hadday jawaabtu tahay Maya. waxaad habayn ku samayn kartaa tirooyinka bilaha aad u isticmaasho helidda qiyaasta sanadka 99-00.

**FOOM B: WARQADA QIYAASIDA DAKHLI MUDADA SANADKA SOCDA KA HADHAY-DOORASHADA 1AAD**

**Isha dakhliga:**

**Fiiga Rug Caafimaad**

**Tirsiga xisaabta: 313**

Sanad xisaabeedka 95-96	Qadarka soo hooyday \$10,000	Isbedelka %ku kordhay kal hore N/A	Isbeddelada	Isbedelada la hagaajiyey %	Faahfaahin								
96-97	15000	50%	Ha qiimaha adeegu wuu ka kordhay \$5 booqasho Wuxuna gaadhay \$6.25 booqashadii	25%	Korodhka % waxa lagu xisaabiyaa si ka duwan marka uu dhaco isbedel qiimaha ka faaiidaysiga adeegu. Sanadkii 95-96 waxa la ururiyey \$ 10,000 iyadoo ku salaysan qiima ah \$5 qofkiiba. Sanadkii 96-97 qiimaha adeegu waxa uu kordhay 25% isagoo gaadhay \$6.25 qofkiiba. Tirada macaamiishu ma degana oo sanad walba wey isbedbedeshaa.								
97-98	18,754	25.03%											
98-99	24,000	27.97%											
99-00													
00-01													
97-98	18,754	25.03%											
98-99	24,000	27.97%											
99-00													
00-01													
Sanad	July	August	Sept.	Oct.	Nov.	Dec.	Jan.	Feb.	Mar.	Apr	May	June	TOTAL
95-96	600	700	500	700	700	700	1000	1500	1100	900	800	800	10,000
%wadarta	7%	5%	7%	7%	7%	7%	10%	15%	11%	9%	8%	8%	100%
96-97	950	1,000	750	1050	1000	1100	1,500	2250	1650	1350	1225	1175	15,000
% wadar	6.33%	6.67%	5%	7%	7.33%	6.67%	10%	15%	11%	9%	8.17%	7.89%	100%
97-98	1,125	1,310	940	1,305	1,315	1,325	1,885	2,813	2,603	1,688	1,505	1400	18,754
%wadar	6%	6.99%	5.01%	6.96%	7.01%	7.07%	10.05%	15%	11%	9%	8.02%	7.89%	100%
SK 99-00	300	350	275	285	415	290	350	350	275	400	320	360	3,970
Celcells	167	220	268	338	355	267	450	317	258	433	315	363	3,752
%wadarta	4.44%	5.86%	7.15%	9.02%	9.46%	7.11%	11.995	8.44%	6.89%	11.55%	8.40%	9.68%	100.00%
<b>Dakhliyada iibka ah ee miisaaniyada wadanka</b>													
SK 97-98	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	7,000	84,000
SK 98-99	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	90,000
SK 99-00	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	8,000	96,000
Celcells	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	90,000
%wadarta	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	8.33%	100.00%

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **QIIMAHA RAASAMAALKA HANTIDA LAGU BEDDELAYO**

Adigoo isticmaalaya miisaaniyadda hawlgalka, tilmaan alaabooyinka gaarka ah ee la iibsano doono sida miisas or gaadhi “pick-up” ah. Ka codso qofka mas’uuliyadda soo iibinta qalabka waaweyn leh, inuu diyaariyo jadwal bileedka lacag bixinta Kaashka lagu soo iibsashooyika waaweyn. Si uu xoogoodu u kordho midee jadowalka iyo kuwa kale si ay u noqdaan jadowalka guud ee bixinta kaashka miisaaniyadda. Maareeyayaashaada xusuusi inay kuu soo gaadhsiiyaan wixii isbeddel ah ee ku dhaca jadowalka u qorshaysan bixinta.

## **ABUURIDDA KAASHKA MIISAANIYADA**

Waxaynu hore uga doodnay sida loo qiyaaso dakhliyada iyo kharashyada. Tusaalaha soo socdaana wuxuu isu qaa’imad keliya isugu keenayaa wixii oo qodobo ahaa.

- Dakhliyada waxa lagu tilmaamaa oo loo odorosaa dakhli walba meesha uu ka yimaado ee gaarka ah.
- Kharashyada waxa lagu tilmaansadaa oo lagu odorosaa koobidda Nooca kharashka.
- Kaashka hadhaagga ah ka wareegay Decembertii kal hore waa \$22630.  
Bisha January kaashkeeda hadhaagga ah waxa loo xisaabiyaa sida soo socota:
- Talaabada 1: soosaar wadarta qiyaasta dakhliyada bisha January ee dhan \$ 11,497.
- Talaabada 2: ka gooy qiyaasta kharashyada, bixinaha kaashka oo dhan \$13,200 si aad u hesho tirada taban ee ah \$ 1703.
- Talaabada 3: U gee hadhaagii sanadka bilawgiisa ee ka soo wareegay December kal hore oo ahaa \$ 22630 si aad u hesho wadarta hadhaaga kaashka u danbeeyey oo ah \$ 20,927. Xaddigani waa hadhaaga u danbeeyey ee bisha January, taas oo noqota hadhaaga bilawga u ah bisha February. Inta ay dakhliyadu dheer yihin kharashyada ee bisha February oo ah \$ 1,907 ayaa loo geeyaa \$ 20,927 si aad u hesho hadhaaga u danbeeyey ee bisha March oo ah \$ 22,834. Tanna waxa hadhaaga bilawga ah ee bisha April; sidaas si la mida sanadkoo dhan. Hadhaga u danbeeyey oo ah \$ 25,740 ayaa loo wareejiya bisha January ee sanadka soo socda.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

<b>Miisaaniyada Kaashka oo dhamaystiran</b>													
	<b>Jan.</b>	<b>Feb.</b>	<b>March.</b>	<b>April.</b>	<b>May.</b>	<b>June.</b>	<b>July.</b>	<b>Aug.</b>	<b>Sept.</b>	<b>Oct.</b>	<b>Nov.</b>	<b>Dec.</b>	<b>TOTAL</b>
QabashoDeeqo	1,000	4,667	23,033	1,500	3,003	9,208	875	2,500	8,517	5,833	8,237	43	68,416
Ajuurada isticmalka	1,267	1,280	1,300	1,378	1,276	1,367	1,287	1,265	1,467	1,150	1,567	1,200	15,803
Kirada Hantida	1,563	1,440	1,208	1,352	1,505	1,495	1,675	1,702	1,728	1,652	1,690	1,530	18,540
Dakhliyada kale	167	220	268	338	355	267	450	317	258	433	315	363	3,752
Dakhliyada saamiyada ah	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	7,500	90,000
Wadarta	11,497	15,107	33,310	12,069	13,639	19,836	11,787	13,283	19,470	16,568	19,308	10,637	196,510
Qeybinta lacagta													
Adeega Shaqaalaha	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	4,715	56,580
Liiska Mushaararka	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	1,885	22,620
Alaabada	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	6,600	79,200
Adeegyada	0	0	0	10,000	0	0	0	20,000	5,000	0	0	0	35,000
Raasamaalka hantida laga bedelayo													
Wadar	13,200	13,200	13,200	23,200	13,200	13,200	13,200	33,200	18,200	13,200	13,200	13,200	193,400
Lacagta oo go'an	(1,703)	1,907	20,110	(11,131)	439	6,636	(1,413)	(19,917)	1,270	3,368	6,108	(2,562)	
Qeybinaha													
Hadhaaga kaashka bilow ah	22,630												
Hadhaaga kaashka ee dhamaadka	20,927	22,834	42,944	31,812	23,251	38,888	37,474	17,558	18,825	22,195	28,304	25,740	

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **HAWLGELINTA KAASHKA MIISAANIYADA**

Odoroska kaashka miisaaniyaddu wuxuu digniin kaa sii dhinaashaha kashka. Hadhaaga Kaashka u danbeeyaa haddii noqdo mid taban bisha ay doonto ha ahaatee, taasi waa digniin inaad qorshayso amaahaha muddada gaaban ama aad dhinto kharashyada. NGO/CBO waa inay ku dedaalaan inay haystaan saldhig lacageed ee kharshyada hawlgalka bil (mushahar, biyaha & laydhka, iyo kharashyada kale ee lagama maarmaanka u ah hawlgalka) ugu yaraan hadhaaga kaashka u danbeeya.

## **CUSBOONAYSIINTA KAASHKA MIISAANIYADA**

Kadib marka la dhamaystiro kaashka miisaaniyada, waxaad ku cusboonaysiinaysaa natiijoyinka dhabta ah ee bil walba. Cusboonaysiintu waxay hagaajisaa sugnaanta odoroska sanadka dhammadkiisa waxayna saldhig u tahay natiijoyinka odoorska dhabta ee sanadaha soo socda. Cusboonaysiinta kaashka miisaaniyadu iyaddo ay la socdaan natiijoyinka dhabta ahi waxa lama huraan u tahay suggidda xaaladda lacageed ee NGO/CBO. Faraqa ugu yar ee ku yimaada qiyaasaha iyo rasiidhada ama bixinuhu waa inaad u qaadataa digniin inaad u baahan tahay inaad naqtiinto odorosyada kaashka miisaaniyada. Kala taganaanta odorosyada iyo dhabtu waxa suuragal ah inay ka yimaadeen dhacdooyin lama filaan ah. Kuwaas waxa ka mid noqon karaa isbeddlo: dhaqaale, habka qaybinta dakhliyad ay wadaagaan dawlada iyo NGO/CBO, habraacyada maamul, hanti mar qudha la iibiyo, ama xaaladu deg deg ah oo kordhiya doonidda adeegyada. Dhacdooyinkaas oo kale waxay saamayn ku yeeshaan waqtiga iyo xaddiga rasiidhada iyo bixinaha. Si kastooy tahay, dib-u-habayn ku samee odorosyada kaashka si aad u tixgeliso dhacdooyinka. Kala-taganaantaasi waxa suuragal ah inay kaaga digayaan inaad kharashyada dhinto si ay kuugu suuragal suuragasho inaad lacagta maal gelin ku shubato xisaabta keydka ah. Haddi kala taganaantu ay joogto noqoto, waxa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad qiimeyso dariiqadaada odoros. Gebgebada sanadaha, dib u eeg kaashka miisaaniyada, barbar dhig natiijoyinka odoros, qoraal ku sug sababaha kalataganaanta keenay. Warkani waxa loo adeegsan karaa inuu hagaajiyo dariiqoyinka iyo habsocodyada odoroska kal danbe. Kaashka miisaaniyada kal danbe.

### **Dib-u-eegid**

Haddii waqtigan xaadirka ah aadan ururkiina u samaynayn Dhaqdhaqaaqa kaashka miisaaniyada, ka feker waqtiyada nolosha ururkiina ee miisaaniyadda noocan ahi ay waxtar yeelan lahayd, oo xataa ka badbaadin lahayd dhibaatooyin laxaad leh.

### **QODOBO FURE AH**

- Dhaqdhaqaaq kaashka miisaaniyad wuxuu kaa badbaadin karaa cidhiidhi maaliyadeed markaad fulinayso miisaaniyadaada hawlgal.
- Haddii aanad haddaba isticmaalayn agabkan fudud ee dhaqdhaqaaqa kaashka, isticmaal.


**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## MAAMULKA LACAGTA

C  
U  
T  
U  
B  
K  
A

5



# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

Cutubkan waxa ku jira fikrado badan oo wanaagsan oo ku saabsan sida aad u maamuli lahayd maaliyadaada, hase ahaatee dhamaantood ma wada noqon karaa kuwo aad wada danayso. Haddaba waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad isha marisid kadibna liishaanka saarto kuwa aad si weyn u danaynayso.

Waxa ka mida ah doodaha soo socda:


### **Qiimaynta liiska hubinta ee habraaca ururinta dakhliyada:**

- Ma jiraan siyaasadu iyo habraacyo qoran oo loo adeegsado diyaarinta liisaska biilasha?
- Biilasha ma loo diyaariyaa si dhakhso ah?  
Habka biilinta hadda la adeegsadaa ma yahay mid wax ku ool ah?
- Imisa cisho ayaa u dhaxaysa marka biilasha la diyaariyo ilaa boosta lagu dirayo? Siday ugu dhigantaa sanadihii hore?
- Hab biilinta jirtaa si wax ku ool ah ma u diyaarin kartaa tirada macaamiisha lagu talagalay saddexda sano ee soo socda?
- Ma jiraan ku talagalay badbaadineed oo lagu hubiyo in macaamiisha oo dhan biilasha loo diro?
- Ma jiraan siyaasado iyo habraacyo qoran  
Oo loo raaco aqbalaadda bixinaha macmiilka mafrashka korkiisa?
- Ma jiraan siyaasado iyo habraacyo qoran oo lagu diyaariyo bixinaha boota ku yimaada?
- Rasiidhaha maalintii la qabtu iyagoo dhan oon daahid lahayn Baanka ma lagu shubaa?
- Ma jiraan siyaasado iyo habraacyo qoran codsiyada 'ka tirtirida' ama 'ka saamixidda' xisaabaha macaamiisha?
- Ma jiraan siyaado iyo habraacyo qoran oo loo adeegsado celinta lacago?

### **Jaantus 16 – Liisaska hubinta ee ururinta dakhliyada**

Ururinta dakhliyada iyo habraacyada loo baahan yahay haddii bixino joogta ahi ay ku soo eg yihiin NGO/CBO dhinaca adeegyada; kontorooladda gudaha oo inta badan danaynaya in shaqaalahaagu daacad noqdaan markay u Janjeedhaan inanay noqon sababto daacad sababtay doonto ha ahaatee; kaydka hantida; fikrado wax iibsi; si aad u maamulayso hawlgalada makhaasiinka haddii ay NGO leedahay; fikrado muhiimu ah xakamaynta kharashyadaada; ama si kale haddii loo dhigo; soo jeedimo ku saabsan sidii ururkaagu dhinaca gudaha uga nagaan lahaa.

## **URURRINTA DAKHLIGA**



Mar haddii uu ururkiinu bilaabo inuu fuliyo miisaaniyada cusub, agaasimuhu waa inuu dabogalaa dakhliyada si uu u hubiyo inay waafaqsan yihiin qiyaasaha iyo kaashka miisaaniyadda. Waxa soo socda soo jeedimo ku saabsan kobcinta ururinta dakhliyada.

Dhawrka qaybood ee soo socdaa waxay ku salaysan yihiin fikrado laga yaabo inaanay ku haboonayn siyaabaha uu ururkiinu u hawlgalo. Matalan waxa laga yaabaa inaan ururkiinu macaamiisha siin rasiidho. Haddii aanad siin iska dhaaf dooda soo socota ee siinta biilasha adeeg-yada.

Has ahaatee ha dhaafin cutubka intahadhay adoon hubin inay baahiyaha maamulka lacageed ee ururkiina ku haboon tahay.

## **BIXINTA BIILASHA**

NGO/CBO badan ayaa si toosa dadweynaha u siiya adeegyo daryeel caafimaad ama xanaano caruureed ama maareynta guriga. Badidooduna qiimaha adeegga qayb ayey ka qaadaan ka-faaiidaystayaasha. Habka siinta biilasha waa inay la mid noqotaa ta meheradaha ganacsi ee adeegyada si dhakhso ah la isaga bixiyo. Si loo dhiiri geliyo bixinta qiimaha adeegyada socda, deji siyaasad biilasha boosta loogu diro waqti xadidan (bil walba); iyada oo ay weheliyaan digniino la siinayo kuwa la daahay bixinta, ganaaxa la

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

daahida, iyo suuragalnimada ka gooynta adeega. Mar haddii la dejiyey habka biilasha, si joogto ah ugu dedaal inaad sii hagaajiso habsocodyadaa. Ka feker tabo biilashu u noqodaan kuwo kobciya hawl qabanimada iyo wax-ku-oolnimada xilka biilal bixinta.

### HABRAACAYADA AQBALAADDA BIXINTA BIILASHA

**Macaamiil badani waxay door bidi doonaan inay qof ahaan biilasha ku bixiyaan xafiiskiina.**

- Habraacyada waa inay ka mid noqoto: shaabad saarista qaybta rasiidhka oo bixiyaha la siinayo, si ay u muuqato in biilka la bixiyey, labada qaar ee rasiidhkana lagu cadeeyo waxa lagu bixiyey sida jeeg, kaash ama “kaadhka amaahda,” ama hababkaas oo isku jira.
- Haddii jeeg lagu bixiyeyey, tirsiga xisaabta waa in lagu qoraa dhabar jeegga ama meel kale oo ka mida.
- Haddii aannu bixiyuhu haysan qaarkiisii rasiidhka, waa in la qoraa rasiidh hore loo lambariyey oo noqol leh, dabadeed bixiyaha la siiyaa noqolka asalka ah ka kalena uu xafiisku meelaystaa.
- Lacag kasta oo la bixiyo, waa in biil ama rasiidh uu kaga hadhaa xafiiska kaasoo ay tahay inuu si walba u waafaqsan yahay lacagta la bixiyey nala mid yahay tirsiga xisaabta iyo magaca bixiyaha.
- Dhamaadka hawlaha maalin kasta, waa in la hayaa xidhmooyin biilal ama/ iyo rasiidho ah oo isugeynta lacagta ku taal ay la mid tahay ganacsiga maalintaas ayna ku sargo’ an tahay lacagta lagu shubay Baanka.

Hadday dadku doonaan inay biilashooda ku bixiyaan jeegag ayna kuugu soo diraan boosta, badiba laba dariiqo ayaa la adeegsadaa:

#### **MAAMULAKA LACAGTA**

Shaqaale ayaa loo u xilsaaraa inay furaan boosta oo ay hab socodka ku bixinta boost dhamaystiraan, ama qandaraas ayaa Baank la gelaa inuu kaa caawiyo rasiidhada bixinaha. Doorashada hore, waa in la dejiyaa habraacyo qoraal ah oo ay shaqaaluhu

u adeegsadaan habsocodyada boosta.

- Shaqaaluhu waa inay si degan u furaan buqshada, ayna hubiyaan inay waxa ku jira oo dhan ka saaraan si aanay qoraalo ugu ilaawin.
- Inta badan waxa boqshadahaas ku jira biilka la bixinayo noqolkiisii iyo jeeg ay lacagta la bixinayo ku taal.
- Shaqaaluhu markay ka saaraan biilasha iyo jeegaga, waxay u baahan yihiin inay labada si weyn u hubiyaan si ay u arkaan in jeegu si haboon u taariikhaysan una saxeehan yahay, in lacagta ku taalaa la mid tahay ta biilka, iyo inaanu biilku ahayn mid mudaddii dhaafa ah.
- Bixin kastoo aan waafaqsanayn shuruudahaa, waa in gaar loo dhigaa oo si gaar ah looga hawlgalaa.
- Waa in xogta lagu kaydiyaa “tape-ka” kalkulayta ee wadarta jeegaga iyo biilasha oo dhan.
- Markay labadaasi is le’ekaadaan, jeegaga ayaa loo diyaariyaa in xisaabta Baanka lagu shubo, iyadoo lagu sharciyeynayo shaabadda dhigaalka ee NGO/CBO.

Wax alaale wixi jeegag iyo kaash ahba ee mafrashka xafiiska lagu qabtay waa in lagu daraa dhigaalka Baanka.

- Jeegaga iyo kaashba xafiiska ururinta dakhliyada laguma hayn karo maalin wax ka badan si loo yareeyo fursadaha in tuugo ku dhici karto.

### **HABRAACYADA LACAGAHALA BIXIYO LAGU GELIYO XISAABAHA**

- Shaqaaluhu waa in ay maalin kasta lacagta ay qabtaan geliyaan xisaabaha macaamiisha.
- Haddii faylal computer ay kaydsan yihiin, lacagta waxa loo gelin karaa hab kooxeed; “software’ -ka cumputerka ayaa isugeyn kara wadaraha la bixiyey si loo hubiyo inay isla waafaqaan wadarta biilasha la bixiyey iyo lacagaha la qabtay.
- Haddii bixinaha la geliyo ledgerada gacanta lagu qoro, shariidka “calculator” waa in la diyaariyaa kadib marka la diiwaan geliyo, si loo hubiyo in wadaruhu is waafqsan yihiin.



# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

### **BUUGAAGTA QABASHADA LACAGAHA EE MAAREYNTA GURYAHA IYO HANTIDA EE NGO/CBOs.**

#### **Tusaale maareynta guryaha**

Qof kasta oo ka mida macaamiish waxa la siiyaa buug “coupon” oo sanad (12 bilood) lacagta lagu bixinayo. Wuxuu ka kooban yahay 12 rasiidh ama tikidh oo hore loogu daabacay magaca macmiilku, lambarka xisaabta, bixinta mudadeedu joogto iyo inta lagu leeyahay. Bil walba macmiilku waxa uu buugga ka gooyayaa “coupon” ama rasiidhkii bishaas oo dirayaa ama uu geynayaa xafiiska NGO-ga isagoo bixinaya qadarka bishaas. Tan waa wax qabad ama **qorshe leh/**

### **TABAHA DAKHLI DHIGIDDA BAANKA**

Markaad naqtiinto xawliga biilal diridda ururintana kordhiso, waa inaad isla markaasna kordhisaa xawaaraha ku shubista Baanka. Waa kuwan fikrado sidaad habraacyada Baanka u dhigi lahayd iyadoo wax qabad leh:

- Rasiidhada maalin kasta Baanka ku shub iyagoo isu dhan.
- Kaashka oo dhan ku dedaal inaad tirada xisaabaha ugu yar ugu shub lahayd.
- Kaashka badan ee aad qabato markkiiba Baanka ku shub Habka electronic haddii uu jiro ku xawil lacagaha.

#### **Kala xaddaynta xilalka kaashka**

- Furidda waraaqaha boosta iyo tixidda jeegaga
- Ka shaqynta rasiidhada lacagaha
- Diyaarinta dhigaalada lacagaha
- Hawlgelinta rajistarka rasiidhada kaashka
- Hawlgelinta rikoodhada xisaabaha soo hoyanaya
- Curinta xawilaadaha ‘fundka’ ee electronic.
- Ansixinta xawilaadaha ‘fundka’ ee

Electronga.

- Ansixinta bixinta xidhmooyinka foojarada.
- Diyaarinta jeegaga
- Saxeexida jeegaga
- Is waafajinta xisaabaha Baanka
- Awood bixinta tirtiro xisaabaha

Aan la ururin karaynin.

- Kontaroolidda habsami u socodka iyo sugnaanta rasiidhada xogta ee lagu diyaariyey habka electronic.

#### ***Jaantuska 17- kala takooridda xilalka kaashka***

Marka tabahan ururinta la adeegso, maareyaha lacagtu wuxuu gaadhi karaa ujeedada u mudan ujeedooyinka maareynta kaashka: In kaashka sida ugu dhakhsaha badan Baanka loogu shubo.

### **KONTAROOOLADA GUDAHA**

Kontaroolada guduhu waxay qayb Muhiim ah ka yihiin habsocodka Maareynta lacagaha. Waxay ku awoodsiiyaan badbaadino ku Saabsan qaab dhismeedyada, habraacyada, iyo habraacyada. Si ay u yareeyaan

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

khasaare ku yimaada hantida. Hantida NGO/CBO waxay u baahan Tahay in laga nabad geliyo ma aha tuuga , musuq, iyo wax is weydaarin uun ee waxa laga nabad geliyaa go' aan aan haboonayn ama liita. Ujeedooyinka kontaroolada Gudaha u mudani waa:

- Inuu maareynta siiyo xog sugan oo aminteedii joogta.
- Inay badbaadiyaan hantida iyo rikoodhada.
- Ay dhisaan xisaabtan xilqaadleh, waqtigiisana uu sugan yahay oo leh dabogal haboon
- Inuu kobciyo hawlgaalnimada wax-ku-oolka ah, yareeyo isbarbar cararka' iyo inay radeebto adeegsashada xun ee khayraadka.
- Inay hubiso wax kala iibsiyadu ay diiwaangashan yihiin si loo diyaariy warbixino lacageed oo sugan oo waafajisan mabaadiida xisaabinta ee laysla ogol yahay.

### QIIMAYNTA KONTAROOOLADA GUDAHA

NGO/CBO badan ayaa gala dhibaatooyin dhaqaale oo ay sabab u tahay. Jirid la' aanta qalabka kontaroolada gudaha ama habsami u fulin la' aanta markuu qalabkaasi jiro. Markay ka hortagayadaasi jiraan waa kuwan fikrado haga fulintooda:

- Ta hore, ujeedada kontaroolada guduhu waa in ay damaanad qaadaan
- In ujeedooyinka kor ku xusan la gaadhi karo. Waxa la arkaa inaanay Suuragal ahayn in la damaanad qaado gaadhista ujeedooyinkan oo dhan. Qiimaha taas lagu samayn karaa waa mid aan loo badheedhi Karin.
- Ta labaada, qiimayaasha kontaroolada guduhu waa in aanay ka badnaan Faaiidooyinka laga dheefayo. Tani waxay u baahan tahay la isu dheelitiro qiimaha kontaroolka iyo faa'iidada laga dheefay. Waxa door bidan inaanay kontaroolada noqon higsada hawlgaalka.
- Tan sadexaad, kontaroolada guduhu waa inay jiritaanka ururka ka mid yihiin oo ay hawlqabad kasta ka mid yihiin. Qalabka kontaroolada guduhu waa intaas uun- qalab. Waxay na'if gashaa oo ay micne iyo haboonaan yeeshaan marka lala xidhiidhiyo habka shaqaalaha. si loo damaanad qaado hab kontarool gudaha oo wanaagsan, maareeyayaashu waa in ay qortaan waxqabad ay la socoto hufnaani, oo ay tababaraan si ay u fahmaan xilkooda iyo masuuladhood, oo ay ka takooraan xilalka qaarkood sida arrimaha lacagta.

### KALA TAKOORIDDA XILAL

Inta xilalka la kala takoori karaa waxay ku xidhan tahay haynta shaqaale ku haboon inay fuliyaan xilalka.



Hab kontaroolo gude oo wax qabad le wuxuu ku shaqeeyaa iyadoo “ in aan qofna lagu kalifin inuu ku shaqeeyo xaalad uu fulin ama qarín karo qalad ama wax isdhaafin ilaa ay kuwa kale helaan iyagoo xilalkooda iyo shaqadooda caadiga ku guda jira.” Inta badan, hawlo gaara waa in astaan loo yeela oo loo kala saaraa saddex nooc oo hawlo kala duwan ah:

- Amar gooynta dhaqdhaqaaqa lacagta,
- Ku kaydinta dhaqdhaqaaqyada rikoodhyada lacagta, iyo
- Joogtaynta badbaadada hantiyaha

Qof qudhihi masuul kama noqon karo dhamaan saddexda hawlood. Tusaale ahaan, haddii soo iibinta iyo rikoodh gelinta alaabada aan la kala saarin, kontaroolku ma celin karo rikoodh gelinta shay aan amar goyn lahayn ama rikoodh gelin la' aanta shay amar goyn leh. Sidoo kale, haddii xilka rikoodh gelinta rasiidhada kaashka iyo xilka haynta kaashka la kala saarin, qarinta tuugada ayaa kobci karta.

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

Kala takoorida xilalka waa qayb muhiima kartaroolka guddaha, mararka qaarkood tani macnaheedu waa jajabinta waajibaadka qaybo yar yar, iyo lug ku lahaansho laba qof halka wakhtigii hore hal qof uu qaban karilahaa sid aad u dhibyar. Sikastaba aha ahaatee, khataraha soo jireenka ah ee la xidhiidha kaashka, waxaa ka wanaagsan inay ahaato tayo la'aan iyo kala saarida habka qabashada kaashka ee ilaalinta diiwaanada kaas oo kadibna u baahan khiyaamo ka dhaxaysa shaqaalaha si ay u qariyaan tuugada ama ku takrifalidyo ay sameeyaan.

### DIB U EEGID

Cidina ma jecla inay tuhmaan in ururkooda ay ku jiraan dad aan la aamin karayni. Iyada oo ay sidaa tahay, ayaa lahayaa maragyo badan in NGO/CBO soo jiitaan qaybtooda dadka noocaas ah. Maxaad qabatay si aad u damaanad qaado inaan ururkiina aanay ka faa'iidaysan shaqaale baahan ama huguroonaya? In kasta oo ay liiska hubinta ee soo socdaa ay faaiido yihiin haddii ururkiinu uu ku hawlan yahay kaash aad u badan, waxa jira siyaabo kale oo uu ururkiina xag dhaqaale u dhaawici karo qof idinka mid ihi. Intaanad hore u socon, hal daqiiqo qaado oo ka feker ururkiinu meelaha uu u nogul yahay. Ma jiraan taalabooyin ama falgallo aad qaadi kartaan oo yarayn kara u dihinata tuugo ama hawlo waxyeelo le oo uu ku kaco qof shaqaalaha ka mida ahi? Hadday kuwaasi jiraan tax waxyaalaha aad u baahnaan doonto inaad ku dhaqaaqdo hirgelintooda.

-----

-----

-----

-----

-----

Hadduu ururkiinu haysto saddex qof in ka badan oo ku hawlan kaash aad u badan ama ku hawlan qabashada lacagaha ay macaamiishu bixiso, waxaad u baahan tiihin inaad dhameysaan liisaska hubinta kontaroolka gudaha, kadibna go'aamisaan talaabooyinka haboon ee la qaadi karo si loogu beddelo calaamadaha "maya" "haa." Xaaladan oo kale, agaasimaha NGO/CBO waa inuu muddo ka dibna naqtiimaa kontaroolada gudaha ee dhinca dhaqdhaqaaqa lacagaha isagoo adeegsanaya labada liis hubineed ee soo socda: Liiska hubinta kontaroolka gudaha ee rasiidhada kaashka ah, iyo liiska hubinta kontaroolka gudaha ee bixinta kaashka. Calaamadda "haa" waxay tilmaantaa kontaroolo guduhu inay wanaagsan yihiin. Calaamadda "maya" waxay kuu soo jeedisaa in habraacyada iyo fulintiisa wax ka bedesho.

Liiska Hubinta kontaroolada ee rasiidhada kaashka ah



- Haa Maya
- Agaasimaha NGO/CBO ayaa awood u leh xisaabaha Baanka.
- Qofka diyaariya dhigaalka kaashku ma furi karo boosta
- Qofka boosta furaa ma argi karo ledgerka xisaabaha soo hoyanaya.
- Haqaalaha boosta fura ayaa si faahfaahsan u tixi kara rasiidhada.
- Qof madax banaan ayaa isbarbar dhiga rasiidhada boosta iyo rikoodhada lacag-hayaha.
- Dhamaan rasiidhada kaashka sidooda ayaa Baanka loogu shubaa.
- Dhamaan rasiidhada kaashka ah waxa la geliyaa joornaalka oo lagu habeeyaa habka xisaabinta marka ay soo hoydaan.
- Rasiidhada qubanaha si madaxbanaani baa loo kontaroolaa.
- Qof ka duwan ka diyaariya dhigaalka Baanka baa gacantiisa lacagaha ku keeya Baanka.
- Qofka lacagaha Baanka dhigaa fasax umalaha ledgerka xisaabta soo hoyan karta.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- Noqolka tikidka dhigaalka ee uu baanku shaabadeeyey waxa lagu celiyaa qof aan ahayn kii diyaariyey dhigaalka.
- Noqolka tikidhada dhigaalka waxa la barbar dhigaa rasiidhada kaash buugga
- Dhamaan shaqaalaha ku hawlan kaashka wacdi ayey qaadaan.
- Jeegaga waqti hore ku taariikhaysan waa markiiba warkooda la gudbiyaa.
- Jeegaga waqti hore ku taariikhaysan waxa lagu kaydiyaa meel aamin ah.
- Jeegaga Baanku soo celiyo waxa loo dhiibaa qof aan ahayn kii dhigaalka Baanka diyaariyey.
- Wixii rahmaad ah badbaadinteeda waxa dhex u haya qof madaxbanaa oo saddexaad
- Fasaxyada shaqaalaha kaashka ku hawlan inay qaataan waa khasab.
- Hab lamaaneeya kaashka iyo kontaroolka maalgashiga ayaa dhisan.
- Waxa shaqaalaha ku hawlan kaash sharciya ku ah deebaaji .

Waxa suuragal ah in qodobada qaarood aan lagu isticmaalin dalalka aan u adeegsan jeegaga inay ku bixiyaan qiimaha alaabada iyo adeegyada.

Liiska Hubinta Kontaroolka Gudaha ee Bixinta Kaashka

Haa May

Jeegaga oo dhan horaa meesha la daabacay u lambarisay/

Jeegaga xumaada ama qaldama waa la googooyaa, kaydiyaa oo fayl la geliyaa si aan dib loo isticmaalin

Siyaasad baa ku lida jeegaga ay ku qora yihiin waxala siin karaa “kaash,” “qofka sita,” ama “lacag”

Jeegaga aan la isticmaalin si haboon ayaa loo kontaroolaa.

Dadka saxeexa jeegaga ama amra in fardi la siiyo lacag waa kuwa aan ka mid ahayn:

Shaqaalaha Haya ‘petty’ kaashka

Ansixiya bixinaha

Diiwaan geliya rasiidhada kaashka

Dhamaan dadka saxeexa jeegaga ama amra bixinaaha waxa asteeya siyaasadda ururka

Baananku wey diidaan ay ku qoran yihiin “sii NGO/CBO.”

Saxeexidda jeeg madhan ama amraya in qof loo sii hore mariyo waa mumnuuc

Dhamaan jeegaga iyo amarada lagu bixiyaa waxay lee yihiin la-saxeexe

Dhamaan invoice-yada iyo dhokumantiga xaqiijiya waxa lagu shaabadeeyaa “la bixiyey.”

- Diyaarinta jeegagga ama amarada bixinta iyo ansixinta invoice-yada wey kala soocan yihiin.
- Dhamaan xisaabaha Baanka bil kasta waa la iswaafajiyaa
- Warbixinaha rasiidhada kaashka waxa la diyaariyaa bil kasta
- Dhamaan warqadda caddaynta ee Baanka iyo amaradda bixintawaa inay ku hooydaan qofka diyaarinaya is waafajinta.

**Xilalka qofka diyaarinaya iswaafajinta xisaabaha Baanka waxa ka reeban hawlaha soo socda:**

- Saxeexa jeegaga ama amarada bixinta
- Rikoodh gelinta dhaqdhaqaaqa lacagaha
- Inuu ku hawlanaado kaash

Qofka iswaafajiyaa xisaabaha Baanka waxa kale ee uu qabtaa hawlahaan:

- Xisaabaha dhamaan jeegagga iyo amarada bixinta.
- Hubiyaa saxeexyada
- Hubiyaa cadeymaha
- Hubiyaa magaca qaataha
- Hubiyaa taariikhaha lacagaha xisaab ku jirta ku wareejinteeda xisaab kale waa in markiiba rekoodh la galiyaa.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- Jeegaga ama amarada bixinaha ay muddo dheeri ka soo wareegtay, waa dabagal iyokontarool lagu sameeyaa.
- Jooji digniinaha bixinaha mudada dheer ka soo wareegtay ama amarada bixinta oo si haboon loo kontaroolo.
- Fasaxyadu waa qasab.
- Dhamaan shaqaalaha kaash ku hawlani waa inay heshiis deebaaji wata.

Qodobadan dhamaantood lagama adeegsado dalalka aan badiba jeegag ku bixin qiimaha alaabta iyo adeegyada.

### **ALAABADA & AGABKA YAALA**

Badbaadintu waxay leedahay mudnaanteeda xagga kontaroolka gudaha Marka ay NGO/CBO ku hawlan tahay alaabada iyo agabka. Tuugada shaqaaluhu ee alaabada la isticmaali ama iibsami karta ee soo gashaa waxay u baahan tahay qufulo iyo furayaal, kontaynaro aamina ama goob taar lagu wareejiyey. Waxa soo socoda talaabooyin la qaadi karo si loo hubiyo in alaabada iyo agabka aan la xadin, siiba kuwa si fudud loo iibin karo:

- Kayd-hayuhu waa inuu tiriyaa alaabada soo gasha makhaasiinka, oo uu diyaariyaaliiska alaabta lagu wareejiyey, isagoo tilmaamaya tirsiyada iyo tirada uu qabtay.
- Haddii alaabtu tahay mid lagu isticmaalayo NGO/CBO gudaheeda, Barnaamijka ay u socotaa waa inuu noqolo warbixinta alaabada uu helay iyagoo leh tirsi susuna u diraya xafiiska kontaroolka alaabada iyo agabka, iyo xisaabaha la bixin doono. Labaduba waa inay sugaan susunka tirada ayna dabagalaan warbixin kastoo maqan.
- Haddii alaabada qaarkood, sida abuurka ama bacriminta ay iibiso iskaashato beereed, qofka iibsanaya waa inuu saxeexaa noqolka alaab gudoomaha oo caddeynaya inay gudoontay alaabada liiskeedu ku yaal “invoice-ka.”
- Ugu yaraan sanadkii mar, waa in muddo dabadeedba la fuliiaa kontaroolidda alaabada iyo agabka oo lays waafajiyaa inta dhab ahaan taala ee la taaban karo iyo inta ku taal rikoodhada. Farqa labad u dhexeeyaa waa loo qaadan karaa inay sababtay tuuganimo ama habka rikoodhada oo liita.

### **KONTAROOLLADA GUDAHA EE SHARCIYEED AMA AKHLAAQEED**

Talaabooyinka kontaroolka guduhu waa si dhab ah u jiraa si loo Hubiyo:

- Gacmo isweydaarinta iyo laaluushka la siiyo wakiilada soo iibinta, maareeyayaasha, iyo kuwa kale ee go'aamiyayaasha ah, ayna bixiyaan kuwa alaabo ama adeeg laga iibsadaa.
- Is-afagarad lala galo kuwa alaabada iibiya, oo aan waafaqsanayn habraacayada caamka ee iibsashada.

### **HABRAACAYADA KONTAROOOLKA XISAABAHA**

**Waxa soo socda liiska habraacyada kontaroolka xisaabaha oo ay daruuri tahay inay jiraan:**

- Kala iibsi kastaa inuu rikoodhka ku jiro; si looga hortago inay iibsiyo dhabahi ay ka maqan yihiin rikoodhada ururka.
- Kala iibsiyada rikoodhka ku jiraa oo dhami inay dhab yihiin: si looga hortago in waxyaalo la maleegay ama aan jirin la geliyo rikoodhada Ururka sida laba jeer gelinta shay rikoodhka
- Kala iibsiyada rikoodhka ku jira oo dhami inay si haboon u qiimaysan yihiin: si loo hubiyo in qiimaha lacagta shay kasta ay tahay mid saxa.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- Dhamaan kala iibsiyada rikoodhka ku jira in isla markii la soo iibiyey la geliyey rikoodhka si loo hubiyo in mid kastaa ku jirto waqti xisaabeed sax ah rikoodhada ururka
- Dhamaan kala iibsiyada rikoodhka ku jiraa inay kala socan yihiin si loo hubiyo in mid walba lagu qiyaaday ledger-ka guud ee saxa ah, iyo markay haboon tahay ledger kaabe ah la geliyey.
- Dhamaan kala iibsiyada in si saxa loo soo koobay si loo hubiyo kharashyada iyo dakhliyada buugaagta asliga ah ee lagu qayiday ay wadartoodu si sax ugu ururtay rikoodhada ururka
- Dhamaan kala iibsiyaddu inay si sax u qayidan yihiin: siloo hubiyo in warka dokumentiga ku yaal si saxa loo geliyey buuggaagta gelinta ee asalka ah, iyo ledgerada kaaba iyo wadaraha isbiirsaday ee buugagta asalka si saxa loogu wareejiyey ledgerada guud iyo kuwa kaaba.

### **Liisyada hubinta-habraacyada kontaroolada xisaabinta**

- Diiwaangashan tahay
- Dhabta tahay
- Si haboon loo qiimeeyey
- Waqtgeedii dhacda
- Sir ah
- Qaaimadaysan Jaantuska 20- habraacyada kontaroolada xisaabinta

## **BADBAADINTA RIKOODHADA XISAABINTA NAFTOODA**

Arrin kale oo tixgelin mudani waa badbaadinta rikoodhada xisaabinta-Dab, xatooyo, inay qoyaan, baabi'in, maleegid, si xun u isticmaalka, iyo qadar xag Alle kaga yimaada iyo gacan bani-aaadmi. Si tan loo gaadho kontaroolada gudaha ee soo socda waa inuu ururku Lee yahay:

- Shaqaale haboon ayaa ka mauul ah rikoodhada kor ku tilmaaman.
- Ikoodhadu wey ka badbaadsan yihiin waxyeelo naf ahaaneed (sida khasando aan gubanayn ama kabadho bir ah).
- Gaadhista meesha ay rikoodhadu yaaliin ku xididan shaqaale idman.
- Habmarinta xogta electoroonka ah eefaylasha iyo barnaamijyada wax soosaar wey ka badbaadsan yihiin inuu gacanta u galo qof aan loo idmin.
- Hab marinta xogta electronka ee kaabta faylasha waxay ku xiraysan yihiin meel cid aan u idmanayni geli Karin.
- Caymis ayaa daboolka khasaaraha ledgerada guud iyo kuwa kaababa, buugaagta qabashada ee asalka iyo joornaalada ka soo gaadha dab, xatooyo, ama waxyeelo aan loo kasin.
- Rikoodhadu waxay kaydsan yihiin muddo haboon.

## **SOO IIBSASHADA**

Tixgelin ka mid ah kuwa ugu mudan ee urur kasta waa dhibaataada helidda alaabada, qalabka iyo agabka kale. Waxaynu og nahay in iibsiyadu ku kacaan kharashyada ururka saddex meelood hal meel, iibsashada haboon iyo habraacyada maareynta alaabadu waxay lagama maarmaan u yihiin sumcada maaliyadeed ee ururka iyo maareyayaashiisa. Iibsashada waxa lagu qeexaa “Inaad iibsato wax tayadiisa hagaagsan tahay; tiro hagaasan, sicir hagaagsan, aad ka iibsato meesha u hagaagsan, waqtiga hagaagsan. Ereyga furaha ahi waa ‘hagaagsan.’”



# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

### Ahdaafta soo iibsiga.

- Tayo haboon
- Tirada haboon
- Qiimaha haboon
- Goobta iibsiga oo haboon
- Waqti haboon Jaantuska 21. Ahdaafta soo iibsiga.

- Tayada hagaagsani, matalan, badidaba ma aha ta u tayo wanaagsan mana ah ta u jaban. Tayada hagaagsani waa ta buuxisa baahiyaha dururiga u ah shay gaara oo qiimihiisa guudna ugu jaban yahay.
- Tirada shay ee u hagaagsani waa ta kuu
- Damaanad qaada inaad hesho agabka iyo alaabada aad u baahan tahay, qiimaheeduna yahay mid macquul ah. Hadii tirada dalabku ay aad u yar tahay badiba qiimaha midhku waa qaali, waxaad u baahan tahay waqti aad u badan in aad ku qaadato shaqooyin qoris badan leh oo aad taas ku gaadhi karto, iyo khatarta inay alaabtu kaa dhamaato. Markay dalabyadu aad u badan tahay, qiimaha guud alaabtu wuu sareeyaa, makhaasiinkuna wuxuu u baahdaa in la kordhiyo, taas oo kordhin karta qiimaha alaabada, ayna dhici karto in ay in badan makhaasiinka ku duugowdu.
- Haddii aad doonayso inaad go'aamiso tirada saxda ah, tixgelinwaa inaad siisaa sicir jebinta ay soo bandhigaan ganacsatada qaarkood markaad dalab balaadhan doonayso, iyo isbeddelka sicirada suuqa. Matalan, markay qiimayaasha shay ay kor u socdaan, waa inaad dalbataa tiro badan; markay siciradu hoos u socdaan waa inaad tiro yar ayaa caqli gal ah.
- Qiimaha saxda ah ee iibsigu waa mid xaq ah isla markaasna maan gal u ah iibiyaha iyo iibsadaha. Soo bandhig lagu tartamo ayaa dhiiri gelin inay ganacsatadu tartanto taas oo lagu heli karo macaamil dan u ah ururkiina. Marka tartan jiro codsiyo qiima sheeg oo aan toos ahayn ayaa loo adeegsan alaabtiro yar oo qiimaheedu uu hooseeyo. Jawabaha codsiyada aan rasmiga ahayn, waxa lagu soo qori karaa warqado ay ku qoran yihiin calaamada ganacsade ama foomaamka sida caadiga ah laga helo madbacadaha.
- Galal moor gareysan (sealed envelopes) waa in lagu soo ridaa iibsiyada aad qaaliga u ah, iyadoo inta badan u sharcigu sidaas tilmaamayo ama hayadaha dalabka doonaya.

Waa meeshii ku haboonayd in la xusuusiyo mid kastoo indinka mida mudnaanta ay leedahay haysashada Tilmaame qoran oo faahfaahiya siyaasadaha iyo habraacyada hawlaha maaliyadeed oo ay ka mid yihiin qandarasyada ama qiima sheegyada iibsiyada waaweyne, hawlgelinta makhaasiinada, kontaroolka kaashka loo baahan karo (petty cash) i.w.m.

Ha maleyn in shaqaaluhu yaqaan waxa ay qabanayaan mid kasta oo arrimahaas ka mid ah. Tilmaamaha habraacyada ayaa nolosha kuu fududayn kara markay shaqaaluhu yaraadaan.

- ❑ Ka iibsashada meesha hagaagsan micnaheedu waa doorashada ganacsadaha ssurtagelin kara isku dhafka ugu sareya ee: Tayada ugu hagaagsan, tiro hagaagsan, qiimaha ugu hagaagsan, waqtiga ugu haboon. Dib-u-dhaca keenidda alaabta, waqti ku lumay cilad ka timi hawlgelinta qalabka, adeeg aan haboonayn kuligood waxay sababi karaan qiime hawl gal oo sareeya badina waxay leeyihiin ahmiyad la mida ta go'aaminta qiimaha ugu hoseeya uguna hagaagsan oo la mida ah qiimihii iibsiga asalka ahaa. Arrimahan waxay tusayaan in warar gaara looga baahan yahay ganacsatada ka hor intaan lagu darin liiska ka-qayb-galayaasha ururka. Shuruudaha caynkaas ahi waxay ururka awoodsiyaan kalsooni uu go'aan kaga gaadho awoodda ganacsadaha inuu hawl geli karo. Marka la ogaado in ganacsaduhu uu ku liito inuu buuxiyo shuruudaha, waa inaan lagu darin liiska ka-qayb-galayaasha ilaa uu toosiyo dhaliishaa.
- ❑ Ugu danbeyn, tixgeli waqtiga hagaagsan. Waxa ka jirta saaxda maareynta fikrad ilaa xad cusub oo lo yaqaan *waqtiga naftiisii* oo loo adeegsado muraadada alaabada iyo soosaarka. Si kale hadii loo dhigo, xaddiga alaabadu yey dhaafin inta ugu yar iyadoo ku salaysan markaad u baahan tahay. Waqtiga u hagaagsan waxa kale oo loo adeegsan karaa in la iibsada marka uu qiimuhu hooseeyo sababo dhawr awgeed.

## DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

- ❑ Hawsha iibsi waa inay ka soocnaataa hawsha xisaabinta si aan loo dhiiri gelin in lala heshiiyo ganacsatada. Warqada dalabku waxay rikoodh joogto ah u noqotaa kala iibsi kasta oo badeecad la iibsanayo ma adeeg la fidiyey oo qiimihiisa la bixinayo.

TUSAALE CODSI QANDARAAS (QIIMA)				
In laga iibiyo NGO/CBO weelka qashinka ee tilmaamihiisu hoos ku cad yihiin. Qiima sheegyada waxa lagu qabanayaa xafiiska wakiilka ugu dambeyn 2:00 galbnimo; July 23, 2001. NGO/CBO-du wey diidi karata mid amaka badan soo bandhigyada qiimaha ay ku keenayaan				
Shayga 1.	Tirada 100	Tilmaanta Caagga qashin oo cabirkiisu yahay 3ft x 3ft oo ku fadhiya taariyo, daboolna leh. Waana inuu si kasta u waafaqaa muunada taal qolka 301 ee xarunta NGO/CBO, 102 Dwyer Avenue Waa in lagu keenaa---cisho kadib helidda dalabka iibsiiga, FOB Xarunta dhexee NGO 102 Dwyer Avenue	Qiimahaahalka	Isugeynta
Keenidda				
Shuruudaha	Dhimid--%-cisho			
Xusuus: Iibiyuhu waa inuu keenaa muunad shayga uu iibinayo Dhamaan ama Waxaba-shay Liita	SHIRKADA..... CINWAANKA..... LAMB..... TEL..... QORE..... TAARIKHDA.....			

### DIYAARINTA ARRIMAHA SOOCA U AH QANDARAAS

Iibsi oo dhama wuxuu ku salaysan yahay halbeeg caam ah ama arrimo ka sooca kuwa kale. “Halbeeg caamka ahi” waa cabbir tayo ama, nooc qiime, Muunad, ama tusaale is barbar dhig; “arimaha qandaraas sooca u ahi” waa tilmaamidda dharkiisa, baladhkiisa iyo joogiisa; noocyada alaabta wax qabadkiisa, iyo hawshiisa. Marka uu iibsi hal meel ku urursan yahay, noocyada, qiyaasaha, derejooyinka soosaarka ee uu adeegsado barnaamij waa la yarayn karaa ilaa inta u yar ee loo baahan yahay. Iyadoo la raacayo habraacaas fududeynta, halbeegyada iyo arrimaha sooca ah ee tilmaama soo saar waa la hindisi karaa. Habraaca fududeyntu waa in lagu bilaabaa alaabta si weyn oo caam ah loo isticmaalo loomana baahna inay ka mid yihiin alaabta tiro yar ee ay isticmaalaan hal ama laba barnaamij.

- ❑ Xeerka ugu horeeya diyaarinta arrimaha shay kuwa kala ka sooca waa inay tilmaamiddu badeecaddu ahaato mid si fudud oo kooban.
- ❑ Arrimaha shay sooc ka dhiga waxa ka mid ah in la tilmaamo sida la damacsan yahay in loo isticmaalo iyo sidoo kale hawlgalkiisa, alaabada, ama shuruudaha waxqabadkiisa.
- ❑ Kaydso arrimah shay sooc ka dhiga sida gaadiidka ama qaybo qalab kale oo si weyne loo isticmaalo, oo ilaa xad balaadhan si ay u koobto ugu yaraan saddex qandaraas.
- ❑ Dhiiri geli isticmaalka kuwa magacyada soosaar caam ah le halkaad Magic shay qudha u gaar ah ka



## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

isticmaali lahayd.

- ❑ Faylka iibsiyada koobi hayso, mid u dir ganacsade kasta oo rajo le, midna sii barnaamijka codsanaya badeecada, midna sii barnaamijka xisaabinta.
- ❑ Marka la gudoomo bandhigyada qandaraaska, waa in la qiimeeyaa si loo go'aamiyo ka ugu qiima yar una wanaagsan ama bandhiga ugu hagaagsan ee la siiyaa.

### **QANDARAAS FURAN**

Alaabada qaarkeed sida alaabta xafiiska, naaftada, iwm, ma ah mid daruuri ah in codsiyo qandaraas loo dalbado waqti kasta oo loo baahdo. Hadaba, alaabta waxa lagu iibsanaa karaa “qandaraas furan,” halka codsiyada qandaraas ay suurtagal noqon karto in sanadkii hal mar la bixiyo, alaabadana la iibsanaa karo marka loo baahdo sanadkoo dhan lana buuxiyo shuruudaha qandaraaska.

### **IIBSIYADA YARYAR**

Sicirka iibsiyada yaryare waa inay xidhiidh caqli gal ah la yeeshaan Qiimaha shayga la iibsanaa. iibsiyo yaryar oo si xidhiidhsan loo gala si muuqata ayey sicirada u kordhiyaan, sidaas darteed waa in la dejiyaa habraacyo lagu kontaroolo laguna yareeyo dalabyada noocaas ah.

### **ISWEYDAARSI BADEECADO**

Isweydaarsi badeecado waa marka uu urur ku bedesho badeecado iyo adeegyo, badeecado iyo alaabooyin urur kale leeyahay. Lacag la isma weydaarsan. Isku bedeshada badeecooyin sidaas ahi waxtar bay u leeyihiin NGO/CBO-yada yar yar.

### **DEEQO (biiro)**

Deequhu siyaabo dhawra ayay ku yimaadaan: dhakhliyo, alaabooyin, qalab, ama hanti. Ganacsiyada gaarka ahi badiba waxay ku deeqaan Alaabo, qalab, ama hanti aanay dib ugu baahnayn. Siinta dakhliyo marar dhif ah ayey bixiyaan, laakin inta badan siintu wey u xadidan tahay arrimo gaara. Wey haboon tahay inaad dadka kale ogeysiiso baahiyahaaga Si haddii ay fursado deeqo lagu bixinayaa soo baxaan, oo ah qalab ama alaabo aanay shirkada gaarka ahi u baahnayn loo ogaado baahidaada.

### **IIBSIYADA IS KAASHIGA AH**

Xoojinta habraacyada iibsiyada natiijadeedu waa korodh dhigaal oo wada gaadha unugyada ku hawlan oo dhan. Laba siyood ayaa loo galaa iibsiyada iskaashiga ah. Markaad adeegsanayso ka hore, laba urur ama ka badan ayaa isku dara codsiyadooda, dabeedna dalabyadooda si midaysan ama gaar gaara uga qaata ka ugu wanaagsan. Tan labaad, ururada ugu waaweyn ee is kaashanaya, ayaa baahiyaha ururada kuwooda ku dara, kadibna noqda dalbadaha iyo wakiilka kooxda. Ganacsadaha ku guuleystay alaabada iyadoo midaysan iyo gaar gaara ayuu ama u keen kara ururka wakiilka u ah ururada oo dhan ama urur walba gaarkiisa ayuu ugu geyn karaa. Xaalada danbe, awooda ka ururinta lacagaha ururada kale waxa le ururka u weyne, oo kadibna siiya shirkada ganacsatada ah.

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

## MAAREYNTA BADEECADAHA IYO QALABKA (Hawlgalada Makhaasiinka)

Alaabada keydsan oo dhami waa inay tasmaysan tahay. Makhaasiinada aad u waaweyn waa in loo hindisaa habka kooxaynta alaabada iyada oo le tirsigeeda sirta ah ee mid walba tilmaanta u ah.

- ❑ Lambarka alaab kastoo kooxaysani waa inuu ku bilaabmaa saddex ama afar lambar kuwaas oo sheega heerka badeecad kasta.
- ❑ Waxa ku xigga saddex lambar, oo sheega nooca gaarka ah ee badeecada, waxa ku xigga laba lambar oo sheega inta uu le'eg yahay, midabka iwm. Lambarka alaabta looma isticmaali karo inuu sheego meesha uu ku jiro shaygu ama goobta uu yaal, maadaama kuwan isbedel ku dhici karo.
- ❑ Laba lambar oo dheeraad ah ayaa loogu dari karaa heerka alaabtu inuu yahay “muhiim” ama “asaasi” si ay kaaga kaalmeeyaan maareynta alaabada. Kontratoolka codsiga iyo dedejinta iibsiga heerar door bidani waxay ku salaysan yihiin labadan lambar.
- ❑ Haddi la doono laba lambar oo kale ayaa lagu dari karaa si loo ogaado goobta ay makhaasiinka ka taal.

Waa in badeecad kasta loo hayaa kaadhka rikoodhka. Kaadhkani waa inuu tusaa keenida, bixinta, iyo hadhaaga. Waxa la keeno waa in la diiwaan geshaa iyadoo la raacayo badeecadaha soo hoyday: alaabta ka baxda qolka kaydka waa in lagu diiwaangeliyaa codsi saxeexan, hadhaaguna intaa in le'eg ayuu sii yaraadaa.

Taariikhda	Lambarka	Deyn	Lacagta laga	Lacagta soo	Lacagta soo	Deymo	Waxakale
	hubinta	caddaanah	dhimay	hoyatay	hoyan karta	kale	

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

### **Tusaha 23: tusaale kaadhka xaddiga alaabada**

Kaadhku waa inuu leeyahay meel uu ku tuso xaddiga u yar iyo ka ugu badan ee shay kasta oo ay tahay in la kaydiyo. Marka inta taala ay gaadhayso inta ugu yar, kayd hayuhu waa inuu u diraa codsi wakiilka iibsiyada si beddelkood loo keno intaanu shaygu dhamaanin. Kaadhku rikoodhka waa inuu bixiyaa ilmaan dhamaystiran oo shay kasta, meesha uu qolka kaydka ka yaal, tixraaca ganacsadaha keenay, taariikhda, meesha lacagtiisa laga bixiyey ama amaah, sicirka midkasta.

Tirin dhamaystiran oo alaabta qolalka kaydka taal oo dhan waa inla sameeyaa ugu yaraan hal mar sanadkii. Kala taganaanta tirooyinka rikoodhka ku jira iyo tirsiga gacantu waa in baadhis lagu sameeyaa. Waa in markaas dib u hagaajin lagu sameeyaa kaadhka rikoodhka, si ay buugaagtu u tusto tirooyinka dhabta ah ee gacanta lagu hayo.

### **DAARAH KAYDKA**

Watigan aynu joogno waxa la door bidaa qolalka kaydka ee tiradoodu yar tahay hase ahaate mugga weyn. Sicirka dhulka iyo qiimaha dhismaha oo si laxaad leh u sii kordhaya ayaa tan ka dhigay mid dhaqaalayn ah, halka aad qolal kayd ka dhisan lahayd dhawr goobood oo kal durugsan.

Guud ahaan waxa la soo jeedinayaa:

- ❑ Ku gudoon, ku hubi, ku diiwaangeli, ku bixi xarun kayd oo dhexe.
- ❑ Adeegso hab ay alaabada oo dhami ku kaydsan tahay goob xidhan oo kontaroolan.
- ❑ Kaydi qalabka, alaabada, iyo agabka daruuriga ah ama ka lagu iibsan karo jumlad qiimaheeduna aad u hooseeyo.

### **HAKINTA QIIMAHA IYADOO LOO ADEEGSANAYA SIYAABO KALA DUWAN**

Hakinta qiimaha waxa kale loo isticmaalaa ereyada “kontaroolka qiimaha” ama “kor u qaadidda wax soosaarka.” Waa si habaysan oo socota oo lagu doonayo si loo yareeyo qiimaha adeeg bixinta oo halkooda lagu hayo ama la kordhiyo tayada adeegyada. Muraadka kowaad ee laga leeyahay “hakinta qiimaha” waa in la joogteeyo ama meel la mida ama ka sii sareeysa heerka adeegyada weliba bixisa kuwo si weyn uga jaban intii ay suuragal tahay. Si loo hakiyo qiimaha, waa inuu jiraa hab loo kormeero laguna kontaroolo kharashyada oo la awoodo in garto qiimaha dhabta ah ee adeeg gaara oo la bixiyaa ku kaco. Meelaha ururkiina u baahan dib u eegid si qiimayaasha loo hakiyo.

- Meesha dhibaato ka sheegay qof shaqaale ahi ama ka-faaiidayste adeeg.
- Meesha ay shaqaaluhu qabtaan hawl susuna oo soo noqnoda ama meesha hawl qudha laga qabto taas oo laga yaabo inay lagu qabto meel wax ka badan ururka dhexdiisa.
- Meesha technology-ga cusubi uu suurtagelin karo in si ka dhakhsa badan oo ka hawl qabadsan loo qaban karo ama loo bixin karo adeeg.
- Meesha shaqadii is dul fuushan tahay oo ay hakad gashay ama unuga ka shqeeyaa uu had iyo jeer dhaafo waqtiga loo cayimay inay shaqadu ku dhamaato.
- Adeega u balaadhan ama hawlaha barnaamij ee ururka ay ka fusho.
- Beddelda uu urur kale uu fuliyey ee la mida kuwa aad samayn karto.

### **QIIMO HELIDDA SI LOO GOOYO QIIMAHA ADEEGA**

Helidda qiimuhu waa farsamo aan ahayn rasmi oo jaban laguna go’ aamiyo qiimaha. Ma jiraan xisaabo la geli karo oo sheegi kara rikoodhada qiimaha ee xudunta u ah qiime gaar aha. Helidda qiimuhu waxay adeegsataa wararka kharashka oo ay habaysaa si ay u soo dheegato xogta qiimaha. Qiimayaasha waxa

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

loo roгаа kharashyo iyadoo loo cayimay mudada alaabada la isticmaalay. Habsocdka helidda qiimuhu waa ka fudud yahay waana ka hawl yar yahay qiimaha xisaabinta. Xirfado gaar ahaaneed iyo aqoon computer ma aha daruuri. Qiimo heliddu ma aha habsocod jooqto ah. Waxa la adeegsadaa marka loo baahan yahay. Adeegsi laxaadle waxa laga sameeyaa qiyaasaha iyo noocaynta (sampling) kuwaas oo ka dhiga wax ka hubitiin yar xsaabitan. Culays waxa la saaraa qiimaha tooska ah. Dariiqooyin toobiye ayaa loo adeegsadaa go'aaminta qiimayaasha kor socdka ah.

### **Tusalayaal rikoodhada waxtar u leh helidda qiimaha waxa ka mid ah:**

Warbixinaha lacaged iyo miisaaniyadeed, rajistarada mushaharka iyo waraaqaha xaadirinta, amarada shaqada, warbixinaha shaqada, warbixinaha Icticmaalka qalabka, amarada dalabka, invoice-yadacodsiyada makhaasiinada, iyo diiwaanka hantida ma guurtada ah. Hab xisaabineed Miisaaniyad oo leh noocyada kharashyada oo faahfaahsan ayaa ah isha war kharash oo ilaa xad suggan. Hoos waxa ku taxan tilmaan talaabooyinka Hawlgelinta hab socodka helidda qiimaha:

- Sheeg wadarta kharashyada hawlgalka ee barnaamijka hadda socoda ee qiimahooda la ururinayaa.
- Ka gooy kharashyada qalabka iyo kharashyo kale sida alaabada, caymiska la hor mariyey, kordhinta mushaarada waxtaraya sanad maaliyadeed kale.
- Ku dar kharashyada sanad maaliyadeedyo kale oo waxtar u leh waqtiga lagu jiro sida alaabooyinka la soo iibsaday sanado kale, hase yeeshee la isticmaalay waqtigan aan jooqno.
- Ku dar qiimo dhaca hantida ma guurtada ah ee loo adeegsaday gudbinta adeegyada. Qiimo dhaco wuxuu u aqoonsadaa qiimaha wershed ama qalab kharash hawlgal muddo xisaabinta la filayo inay hantidu waxtar keenayso. Dariiqada laynka toosan ee lagu soo saaro hoos u dhaca (qiimihii asalka ahaa oo laga jaray qiimihii xaraashka) waa ta ugu fudud looguna isticmaal badan yahay marka la qiyaasayo faaiidada shayga la isticmaalay.
- Ku dar kharashyada 'fund' kale oo u faaiideyey adeegga sida 'hawl gabka,' Caymis, dhul, qalab, iyo daaro.
- Isugee kharashyada.
- Qiimayaasha dhan u rog qiimaha midka

### **Qaaciidada helitaanka qiimaha ee go'aansiga qiimaha macmiilkasta ee barnaamij**

Talaabada 1: Ka bilow wadarta barnaamijyada ee kharashka lagu shaqaynayo ee diiwaanada xisaabta.

Tal.2: Ka jar kharashyada alaabta loo soo iibiyay in la isticmaalo sanad kale.

Tal.3: Kudar kharashyada alaabta iyo qalabyada sanadkale gudhiisa loo soo iibiyay l aakiin la isticmaalay wakhtigan.

Tal.4: Kudar qiimo dhaca ku yimi hantida lagu istimaalay barnaamijyadan.

Tal.5: Kudar kharashyada kale ee fund kale oo laga faa'iiday barnaamiyada.

Tal.6: Tani waxay la mid tahay wadarta kharashyada ee barnaamijka.

Tal.7: Kudar kharashyada fundka kale uu faa'iideyey<sup>5</sup>

Tal.8: Waxay la mid tahay wadarta qiimaha oodhan ee barnaamijkaTusale ahaan soo saarista adeega barnaamijkan.

Tal.9: U qaybi wadarta qiimayaasha oo dhan tirade macaamiisha ka shaqaysay barnaamijka dhexdiisa.

Tal.10: Hada waxaad haysataa wadarta qiimaha ee uu macmiilkastaa u soosaaray barnaamijka ama adeega.

*Jaantuska 24 – Qaaciidada helitaanka qiimayaasha ee go'aaminta qiimaha macmiilkasta ee barnaamijka.*

Habka helidda qiimaha ee kor ku sharaxani waa tusaale dariiqo keliya. Waa inaad habsocod si fiican isugu dabariddaa taas oo ku dhan jiritaanka iyo adeegsiga wararka iyo heerka la doonayo. Matalan, waxa la arkaa inaad go'aansato in kharashyada sanadaha kale aadan habayn

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**

## **MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

adigoo ku sababaynaya in qiimaha shaqaaluhu ahaa qaybta ugu badan ee sawir u ah waqtiga la joogo. Alaabada iyo qiimayaal kale oo xiliyo kale lagama yaabo inay tixgelin weyn lee yihiin oo baahiyahaaga waafaqsan. Haddii xisaabinta miisaaniyadaadu ay sawir ka bixinayso xuquuqda, caymiska, daaraha, iyo qalabka, waxa laga yaabaa in aadan u baahan inaad ku darto hoos u dhaca ama aanad waqti iskaga lumen tasmeynta kharashyada ka yimi maalgashiyo Kale mar haddii ay xisaabaha miisaaniyada ku jiraan. Waxa jira waxyaalo kale oo mudan in la tixgeliyo oo ka baxsan xogta taariikheed. Marka qiime cusub la goynayo iyadoo ah markii ugu horeysay ee aanay jirin xog taariikheed, waayo-aranimada ururada kale oo aad xag hawlgal is le'eg tihiin waa in la tixgeliyaa.

### **Dib-u-eegid**

Cutubkani wuxuu soo bandhigay ugu yaraan lix hawlgal oo kala duwan oo ah meelaha ka adkayn karto xaaladaha maaliyadeed ee ururkiina. Waxa ka mida ururinta dakhliga, kontaroolada gudaha, alaabada, iibsashada, hawlaha kaydka, iyo wax la yidhaaho hakinta qiimaha. Qaybaha maamulka maaliyada kala bax mid aad u maleynayso inaad jecshay inaad liishaanka saartid toddobaadka soo socda ama wax taa u dhow, hadaba qor dhawr hawlgal oo aad u fulin kartid si hufan oo wax qabad le oo qayb ka ah hawlgelintiina.

### **Habka maaliyaded ee aan doonayo inaan hore u mariyo**

-----

-----

-----

-----

-----

-----

### **Sababta aan liishaanka u saarayo tan gaar ahaaned ee qayb ka ah hawlgalka NGO/CBO:**

-----

-----

-----

-----

-----

-----

### **Talaabooyinka ii qorshaysan inaan qaado waa:**

-----

-----

-----

-----

-----

-----

### **Habka kor loo qaaday waxa xidhaya (hebel)**

-----

-----

-----

# DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

---

-----  
-----  
-----

**Natiijooyinka aan rajeynayo inaan ku gaadho hawlgaladaasi waa:**

-----  
-----  
-----  
-----  
-----

## QODOBADA FURAYAASHA AH

- Waxa jira doorashooyin badan oo kor loogu qaadi karo siday lacaguhu u badbaadi lahaayeen, habsocdyadu u kobci lahaayeen, Qiimayaashana loo hakin lahaa NGO/CBO gudahooda.
- Habka ururinta dakhligu waxa sal u ah helidda siyaabo biilasha loo gaadhsiyo, kadibna go’ aaminta sida ugu wax ku oolsan ee lacagta looga qaadi lahaa ee lagu badbaadin lahaa mar haddii la ururiyo.
- Kontorolada guduuhu waa muhiim xataa ururada diinta ee halku-dhigood yahay “dadow ha xadina”. Markaynu taas ognahay waa lama huraan in dhamaan NGO/CBO ay yareeyaan shaqaalaha damacaas leh.
- Hase ahaatee kontorooladda guduuhu waxay ururkiina u leeyihiin waxtaro kale:-xog kalsooni leh oo waqtigeedii la helo, wax-ku-oolnimada hawlgalo oo ay kamid yihiin badinta isku-dayada, iyo fududaanta gaadhsiinta xaladaada lacageed dadka kale.
- Kala qaybinta hawlaha iyo xilalka shaqaalaha ku hawshan kaashka ururkiina dhexdiisa waa arin laga yeeshoon kara xagga badbaadinta kuwa masuulka ah dhaqdhaqaaq lacagaha ayaa iyaguna raali ku noqda.
- Hakinta qiimaha iyo helidiisuba waxay u yihiin qalabka maaliyadda ee ururkaaga dhiggi kara mid muddo sii jira.
- Maareynta agabka iyo alaabada ururkiina dhexdiisa waa caajis laakiin muhiima. Haddii si wanaagsan loo sameeyo, waxay baabiin karta damac “Makhaasiinka ka sii amaaho, badbaadi sabada, oo uu hubin dadka hawlaha wada uu agabka iyo alaabadu ay yaaliin markay u baahdaan.
- Soo iibsiga waa meel ay NGO/CBO aanay kaydinayn oo kaliya ee, laakiin kor u qaada waxqabadnimada iyo wax-ku-oolnimada fulinta risaalada ururkiina kuwaas oo ay keenaan helidda tayada wanaagsan iyo tirada saxda ah, meesha ugu hagaagsan, ee ugu sicir hagaagsan waqtiga ugu hagaagsan. Intaas kama hagaagto NGO/CBO gudohooda.
- Soo iibsashada tartanka leh waxa soo raaca diyaarinta soo bandhigada tilmaamaha gaarka u ah qandaraaska;ka feker isweydaarsiga badeecado, deeqaha iyo soo iibsiga iskaashataysan iyo siyaabo kale oo aad ku heli karto badeecadaha iyo adeegyada aad u baahan tahay sicirka ugu hagaagsan.
- Hawlaha qolka keydka si weyn baa loo hagaajin karaa iyadoo la adeegsanayo haynta rikoodhada iyo maareynta dhulka si hal-abuur leh. NGO/CBO badan ayaan gaadhi labadan heer midna.
- Hakinta qiimaha iyo helidda qiimuhu waa laba qalab oo muhiim u ah fududeynta in ururkiinu sii jiro ilaa muddo.

## Qoraalo

1. Qiimaha xisaabtu waa qeyb wayn oo xisaabeed khusaysana bilowga minqiyaaska, iyo kaantaroolka qiimayaasha.
2. Qiimaha Tooska- waa qiime kaas oo si dega dega loo cadayn karo iyo lagu isticmaali karo barnaamij

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---


gaar ah. Tusaale ahaan Mushaar kalkaaliso caafimaad taasoo loo xilsaaray inay ka shaqayso wakhti buuxa barnaamijkaas khaaska ah.

3. Sii bixinta (Kharashyada lasii bixiyey) kani waa kharash la bixiyey ka hor wakhtigiisa . Kirooyinka, Caymiska joogtada ah ayaa inta badan lasii bixiyaa wakhti ka hor, Tusaale ahaan sanadka oo dhan caymisyada joogtada ah ayaa laga yabaa in lasii bixiyo, kharashyadaas lasii bixiyeyn ayaa loo tixgaliyaa inay yihiin hanti iyo in la yareeyo dalacaada bilkasta lagu dalacayo kharashka caymiska joogtada ah.
4. Qiimo Dhaca- Yaraanta qiimaha ee qeyb yar oo ka mida shay, qalabka, mashiinada ama hanti kale oo la mida. Waa hab loo qoondeynaya qiimaha asalka ah ee shay la isticmaalay laftiisa mudo. Isticmaalkaas ayaa ah midka keenaya yaraanta iyo duugaas shay la isticmaalay mudo.
5. Qiimaha kharashyada joogtada ah waxaa kale oo loogu yeedhaa kuwa aan tooska ahayn, kharashyada kuwa aan si ku haboon ama dhaqaale ahaan loogu talo galay barnaamijyo khaasa. lacag-hayaha.

## SIYAASADAHA LACAGTA IYO XILALKA KORMEERKA

C  
U  
T  
U  
B  
K  
A

6





# DHISIDA AWOODDA NGO/CBO

## MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED

Falcelintaada waxay noqon kartaa: “maxaynu uga hadlaynaa baahida loo qabo siyaasad lacageed inagoo tilmaamaha sare gebogebo marayno ee aynu mar hore uga hadli weynay? Jawaabtayada waa qancin laba seeb leh oo difaacaysa inaynu siyaasadaha lacageed waqtigan ka doodno. Waata hore’e waxaannu rumaysan nahay ka doodidda qaybaha kala duwan ee habka maareynta lacag ee mangalaka ah inuu kordhin karo fahamkaaga la xidhiidh inay muhiim yihiin in urur kastaaba yeesho siyaasado cad. Waa ta labaade siyaasaduhu waa masraxa uu hanti dhawrku ka hawlgalo, marka uu u fadhiisto dib-u-eegida wax qabadka iyo la xisaabtanka ururkiina.



### DEJINTA QAAB SIYAASAD LACAGEED

Siyaasadaha lacageed waa odhaahyo ay hindisaan Agaasimaha iyo “Boardka” siyaasadda si ay u cadeeyaan falsafadoodu iyo ujeedoonyinkooda. Si guud haddii loo qeexo siyaasadu waa mawqifyada rasmiga ah ee uu urur u qaato inay ka kaabaan fulinta ahdaaftiisa lacageed.

#### SIYAASADAH LACAGTA IYO XILALKA KORMEERKA

Siyaasaduhu waxay fududeeyaan qaab dhiska maareynta lacagta iyo talo ka bixinta hawlgelinta xaaladaha lacageed ee urur. markay falsafada iyo ujeedoonyinka mareynta lacagta ee urur ay cad yihiin waxa fududaada habsocodka hanti dhawrida.

Siyaasadaha lacageed ee aan rasmiga aheyn, aan qornayn, aan dhamaystirnayn, ee iska hor imanaya, ee aan israacsanayni waxay halis ku yihiin sumcadda urur ee bulshada dhexdiisa. Arrimahaasi waxay ururka ka bixiyaan muuqaal ah inaan maareyntiisu garanayn waxay qabanayso, isla markaasna aanay mudnaanta ay lee yihiin siin fikir dhamaystiran iyo xil qaadka maareynta lacagta. Haddii aanu jirin sawir cad oo ay ku salaysan yihiin go’aanada lacagta ururku, waxa hubaal ah in deeq bixiyayaasha iyo dadka kale ee isticmaala wararka lacagta ururka uu jiho wareer ku dhaco, ka dibna ay lumiyaan kalsoonidii ay ku qabeen kartida maareyntiisa ee ay si waxqabad leh ugu maamuli lahaayeen arrimaha lacagta ururka.

### TUSAALE SIYAASADO XISAABIN

- NGO/URUR BULSHO waa inay dhistaa oo hawlgelisaa Waxqadyo xisaabaneed oo waafaqsan mabaadida guud iyo halbeegyada la isku waafaqay ee xisaabinta ama (generally accepted accounting principles and standards).
- NGO/URUR BULSHO wuxuu si joogto ah u hirgelin doona gorfayn qiimaha adeegyada oo dhan. NGO/URUR BULSHO wuxuu hirgelin doonaa hantidhawrid uu fuliso hayad xisaabineed oo madax banana xisaabinta, iyadoo ra’ayigeeda ka dhiibanaysa warbixino sanadeedka maaliyada oo kadiyaarinaysa warqad faahfaahsan meelaha maareyntu uga baahan tahay hagaajin.
- NGO/CBO waa inay dejisa habka kontaroolada gudaha, oo muddo marka laga joogoba la naqiiimo.

### MIISAANIYAD

- NGO/CBO waa inay sanadkiiba male awaasha dakhliyada iyo kharashyada saddexda iyo shanta sanadood ee soo socda isla markaasna sanad walba cusboonaysiisaa ku talo galadaas.
- Agaasimaha ama qofka loo igmaday waa, ugu yaraan, sanad badhkii fuliyaa Naqtiin iyo gorfayn miisaaniyadeed isla markaasna warkeed u gudbiyaa siyaasad dejiyayaasha.
- NGO/CBO waa inay dejisaa habka kontaroolka gudaha, oo sanad walba ay naqtiintaa.

### MIISAANIYADA

- NGO/CBO waa inay male awaashaa dakhliyada saddex ama shanta sano ee soo socda, sanadkiiba mar ay cusboonaysiisaa.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

- NGO/CBO waa inay hindistaa barnaamij midaynaya halbeegyada waxqabad iyo tusayaasha wax soo saar ee miisaaniyada sanadka.
- Agaasimaha ama qofka oo loo igmaday waa inuu ugu yaraan fuliyaa naqtiin iyo gorfayn miisaniyadeed sanad badhtankiisba, warkeedna u gudbiyaa siyaasad dejiyayaasha.

### **DAKLIYADA**

- NGO/CBO waa inay samaysaa male awaal dakhli gal ah, si cadna U qeexdaa xogta ay ku salaysay male awaaladaa.
- NGO/CBO waa inay dib u eegtaa qiimayaasha adeegga (fee) qaarkood si ay u go'aamiso ila inta ay qiimaha adeegyada oo dhan ay ka dabooli karaan dakhliyadu.

### **MAAREYNTA KAASHKA**

- NGO/CBO waa inay maalgashi joogta ah ku samaysa xx % kaashka iska yaal ee aan dhaqdhaqaaqa lahayn, meeshii uu sharcigu ogol yahay.
- NGO/CBO waa inay dejisaa talooyin xoojinaya badbaadinta iyo lacagta maalgashiga ah 'fundka'

### **SOO IIBASASHADA**

- NGO/CBO waa inay codsataa qiima sheegayaal tartan leh dhamaan alaabada ay soo iibsanayso oo dhan/
- NGO/CBO waa inay dejiso garnaamij ay ku hubiso alaabta la keeno, sida ay isu waafajisan yihiin alaabta la keeno iyo astaamaha lagu dalbaday.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**MILICSI**

Waxaan kuu soo jeedinaynaa in muddo yar hakato oo dib u eeg weedhaha siyaasadda adigoo “x” ku hor dhigaya siyaasadda la mida ama u eg kuwo uu ururkiinu adeegsado. Markaad dib eegtid siyaasadaha kor ku xusanwaxaad kaloo ku barbar dhigtaa “0” siyaasadaha aan ka hirgelin ururkiina hase ahaatee uu ubaahan yahay in adeegsado. Ka dib markaad qorto “x” iyo “0”, si kooban u sharax siyaasadaha uu o ku barbar qoran yahay oo hoose ku caddee qorshe hawleedka aad ku gaadhayso inay si rasmi ah uga mid noqdaan habraacayada hawl gal ee ururkiina.

-----  
-----  
-----  
-----  
-----  
-----

**HANTIDHAWRIDDA**

Habraaca maareyn ee ugu danbeeya ee aanu doonayno in aan ka doodno waa dabogalka maaliyadeed iyo qalabka dabogal oo ah hantidhawridda. Inta badan saraakiisha NGO/CBO war wanaagsan ka bixiyaan habraaca hanti dhawrka mar haddii uu ka mid yahay shuruudaha hayadaha xakamaynta ee dawladda iyo deeq bixiyayaasha. Has ahaatee waa habraac Ururada ka caawin kara inay noqdaan kuwa le wax ku oolnimo iyo waxqabad maareynta khayraadkooda. Inta aynaan si gaara u dhex gelin hanti dhawrka, waxaan ku baraarujinaynaa inaynu siyaasadaha lacagtana kaga hadli doono qaybtan buugga u danbaysa. Siyaasadaha ururkiina iyo haawsha Hanti dhawrku waxay lee yihiin xidhiidh toos ah. Siyaasaduhu war bay ka siiyaan hanti dhawrka iyo dadkaba ururkiina iyo muraadadiisa maareyn. Badiba hanti dhawrku wuxuu ka marag furaa inay fulayn muraadadaas iyo in kale. Aan hadaba gudagalno hanti dhawrka.

Muraadka laga lee yahay hant dhawr ururka dibadiis ka yimi waa in la helo koox madax banaan oo qirta in waraka lacageed ee urur loo agaasimay si wafaaqsan sharciga ama shuruudaha deeq bixiyaha. Adeegsiga hanti dhawre ururka dibada ka ahi waa sida ugu wanaagsan ee lagu hubin karo in tirooyinku ay sugan yihiin oo ay xidhiidhsan yihiin. Hababka hantidhawrka ee Tijaabo ka baxa ah ee qidaaca gaarka ah iyo ka dawladda waa lacagta iyo iswaafajinta. Hanti dhawriddu waxa kale oo ay dardar gelisaa maareynta.

Marka uu hantidhawr dibada ahi uu hant dhawrayo ururkiina ka codsi kuwa hanti dhawrka wada inay ku darsadaan hawshooda arin kale. Taasoo ah inay Ku darsadaan hawshood hanti dhawr inay talo ka bixiyaan siday maareyntu u kordhin lahayd wax ku oolnimada iyo waxqabadka ururka. Hanti dhawridda lacaguhu wuxuu ka kooban yahay axadhis habaysan iyo qiimaynta hababka lacagaha, dhaqdhaqaaqyada, iyo xisaabaha urur Si looga bixiyo rayi xalaalnimada iyo sugnaanta warbixinaha lacageed. Arrinta is waafajinta ee hanti dhawrku waa in la hubiyo in ururku raaco Sharciyada xukuma hawl gelinta lacagaha guud ahaan sida kuwa la xidhiidha deeqaha lacageed, isticmaalka, maalgashiga, iyo amaahashada. Hanti dhawr iswaafajin wuxuu si gaara u liishaamaa sharciyada la xidhiidha ‘funds’ka sida deeqaha dawladi dawladd kale siiso. In kastoo hanti dhawridda iswaafaqsanaanta gaarkeed loo fulin karo, waxa uu hawl qabadku ku wanaagsan yahay, midh dhalkeeduna ku haboon yahay in lala fuliyo Hanti dhawridda lacagaha.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **FAA'IIDOOYINKA HANTI DHAWRKA**

Hanti dhawrku wuxuu waxtar u yeelan karaa NGO/CBO siyaabo ka badan Caddaynta inuu urur raacay xeerar iyo sharciyo iyo qiradda inaan si xun loo isticmaal in lacagaha. Waa kuwan qaar ka mida waxtarada dihin ee hanti dhawr laga dheefi karaa:

- Hanti dhawrka lacaguhu wuxuu caddayn karaa warar muhiim aa go'aano gaara lagu qaadan karo, kuwaas oo noqon kara go'aano Siyaasadeed ama maamul. Waxay kaa caawin karaan siyaabaha aad ku hubin karto in wararku Gaadhaan cidda ugu haboon loona soo bandhigo sida ugu waxtarka badan cid kasta oo ay tahay inay ku go'aan qaataan.
- Hanti dhawr si degan loo soo habeeyey wuxuu muujin karaa dhaliilo ay lee yihiin hab xisaabeedyadu oo qar in kara sawirka runta ah ee lacagaha, murug isa sii taraya, kobcin lacago iyo adeegyo beylaha.
- Hanti dhawrka iswaafajintu wuxuu caddeeyaa macnaha xeerarka xukuma deeqaha qaarkood, tilmaamaa doorashooyinka uu urur haysto xagga hawl-gelinta, iyo isagoo NGO/CBO ka caawin kara siday 'funds' khasaaraha uga ilaalin karaan; taasoo ka dhalata raacid la'aanta xeerarka ku lifaaqandeeqaha kala duwan ee uu ururku helo.

## **XULASHADA HAY'AD HANTI DHAWR**

Marka kuugu horeysa ee aad xulanayso hay'ad hantidhawr suuragal ma aha inaad si dhab ah oo kalsooni leh u xolato ta kuwa kale ka hawlqabad fiican. Wax badan ayaa ku xidhan aqoonta dadka loo saaray inay kala doortaan hay'adaha hantidhawrka iyo kuwa go'aanka qaadanayaa cidda ay la kulmaan. Marka ay hawl hantidhawr socoto, hanti dhawraha ayaa xilka gaadhista qiimayno ilaa xad ku dhisan aqoontiisa iyo waayo aragnimadiisa oo la xidhiidha sumcada agaasimaha iyo gudidda siyaasada, tayada kontaroolada gudaha, iyo caqli galnimada waxyaalaha ka reeban xalaalinmada warbixinaha iyo waafajisnaanta sharciga. Hantidhawre markuu hubinayo sugnaanta warbixnaha xisaabeed ee urur waa inuu feejignaan deeraad ah u yeesha sida loo raacay sharciga. Haddii la raaci waayo sharciyadaa waxa laga yaabaa inay natiijadoodu noqoto mid waaka iyo warbixinaha lacageed ku keenta isbedello khasaarahooda leh. Hay'adaha deeqaha bixiya iyo hayadaha dawladaha dhexe waxay lee yihiin shuruudo hantidhawr oo ay ka mid yihiin in hanti dhawr lacageed la fuliyo. Si loo buuxiyo shuruudahooda iyadoo ku lamaan tahay dib u eegid Iswaafajin.

## **HANTI DHAWR DIB U EEGID KONTAROOOLADA GUDAHA**

Kontaroolada guduhu waa hab ka kooban hubino iyo isu dheelitirnaan loo hindisay inay yareeyaan khataraha suurtagali karo hawl-gallada Kaashka, xog dhawrka alaabada ama hantiyo kale. Kuwaas oo ka mid yihiin Qaab dhismeedka ururka, habsocodyada, iyo habraacayada badbaadiya hantida, oo suga in warbixinuhu waqtigoodii qabsoomeen oo ay saxan yihiin. Kontaroolada guduhu waa habab uu urur u samaystay inay:

- Iska hortaagaan tuugada iyo dayaca,
- Hubiyaan saxnaanta xisaabinta iyo xogta hawl-galada kale;
- Kor u qaadaan u hogaansanaanta siyaasadaha u dejisan;
- Kobiciyaan wax ku oolnimada hawl-galada;
- Hubiyaan in hawl-galadoodu waafaqsan yihiin sharciyada iyo shuruudaha deeqaha lagu xidhay.

Hababka loo hindisayin lagu gaadho labada ujeedo ee u horeeya waxa Badiba lagu magacaabaa kontaroolada xisaabinta, kuwa saddexda danbe daboolana waxa lagu magacaabaa kontaroolada maamulida.

# **DHISIDA AWOODDA NGO/CBO MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

## **KONTAROOLADA GUDAHA EE XISAABINTA**

Muraadka kowaad ee uu hanti dhawruhu u baadhaa kontarooladan Waa inuu yaqiinsad inay ku kalsoonaan karaan si loogu hubiyo ugnaanta Xogaha kala duwan ee gala dhamaystirka warbixino lacageedyada iyo inay waafaqsan yihiin sharciyada u dejisan. Qiyaasidda hanti dhawraha ee inay suurtagal tahay in qaladku iyo ilduufyadu ka jiri karaan diiwaangelinta iyo kal haadinta dhaqdhaqaaqyada waxay ku salaysan yihiin maaha oo keliya qiimaynta hababka ee waxa kale ee ay ku salaysan yihiin shaqaalaha adeegsada. Sidaas darteed dib u eegidda waxa ka mida qaab dhismeedka ururka, habka shaqaalaynta, iyo xilalka gaar ahaaneed ee shaqaalaha. Waxa uu Hantidhawruhu ku soo gebogebeeyo kontaroolada ayaa tilmaama nooca iyo baaxada qiimayneed ee lagu adeegsado kontaroolada laftooda iyo xogta diiwaan gashan. Muraad kale ee qiimaynta kontaroolada gudaha laga leeyahay waa in la Kasbo jiritaan dareen dihin ee la xidhiidh wax is weydaarin aan la ogayan. Haddii wax isweydaarintu ay heer sare gaadhay, xataa iyadoon la hayn cadeymo meelaysi, hanti dhawruhu wuxuu u digaa agaasimaha iyo/ama guddida siyaasad dejinta. Tusaale meelaysiga dihin waxa u noqon karaa iskaashato iibsata agabka beeraha, iyadoo agaasimaha oo kaligii uu yahay qofka qudha ay ka masuul ka ah diyaarka alaabada iyo rasiidhada, kaas oo ku adkaysta inuu kaash uun qabto.

### **Kantaroolida Gudaha**

- Kontaroolada xisaabinta waa siyaabah lagu raadiyo khayraadka.
- Kontarooladda maamulida waa siyaabaha loo isticmaalo khayraadka.
- Rajistarka mushaharka shaqaaluhu wuxuu kaydiyaa cidda lacagta qaateen.
- Habka ansixinta shaqaalulu waxay hubisaa in dad haboon la qorto ama lagu magacaabo jagooyin haboon

*Sawirka: 25 kontaroolada gudaha*

## **QODOBADA FURAHAAH**

- Siyaasadaha lacageed waxay siiyaan hantidhawraha masrax uu ku hawl geliyo hawshiisa lacageed.
- Hantidhawraha ururka dibadiisa ka yimaadaa wuxuu caddayn doonaa in gurigaaga lacageed uu hagaagsan yahay.
- Waxa kale oo ay ku siisaan waxtaro dheeraad ah sida aragtiyo ku gayeysiin karo inaad isbedelo ku samayso hab maaliyadeedyada si ay wax ku oolnimo ugu shaqeeyaan.
- Hanti dhawrida wax ku oolka ahi waa inuu dib u eego kontaroolada xisaabinta iyo maamul isagoo isla markaas hubinaya is waafajintaada sharciyada dibadeed iyo igmashada maalgelined.

## **DHAMAYSTIRKA GOOBADA**

Waxaynu joognaa gebogebadii safarkeeni lacageed, hase ahaatee ka doodida siyaasadaha waxay noqon kartaa bilawgii. Waxaynu dooranay in aynu u danbaysiino mar haddii ay si weyn u la xidhiidhsan yihiin habraaca hantidhawrka dibadda.

Buugan tilmaamaha ahi si weyn uu uga duwan yahay kuwa kale ee taxnaha Ka yahay. Ka duwanaanshaasi waa mid qaab iyo muxtawiyaad la xidhiidha. Qaabka iyo muxtawiyaadku waa xag habraac e ma aha xag maskaxeed. Waxa kale oo ay tahay mid u eg warqad dhakhtar kuu qoray dhinaca Aaraada la soo jeediyey, sababtoo ah hababka lacaguhu ma ha kuwo hal abuur le sababo quman awgood. Saraakiisa lacageed ee hal abuur lihi marar bey carqalad yihiin haddii ay hal abuuridnimadooda waxa lacagaha lagu qabanayaa ay faraha ka baxdo.

## **DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

Qeybta II ee buuggan tilmaamaha ah, Maaraynta iyo Tababarka Dajinta Qalabka, ayaa waxay ka yara duwan tahay kuwa taxanaha ah. Waxa uu waajahaa in yar oo dhinaca “tababar” ah iyo in badan oo ah sida loo qabto dabiici ahaan. Waxaanu kugu dhiirigalinayaa inaad ku noqoto bogaga iyo inaad qaado talaabo aad ku eegaysid Xaashida shaqo ee Sahanka Maaraynta Maaliyada (Qalabka 1A). Waxa uu ku siin doontaa in kugu filan oo ah xisaabinta waxa aad hada akhriyaysay iyo soo saarista hab fiican si aad u siiso ururkiina hab maaliyadeedyo oo dib loogu habeeyo si la garan karo.

Hubintani waxay u shaqayn kartaa sida jaantuska lagu sameeyo hab lagu casriyaynayo habraacyada maaliyada. Si lagaaga caawiyo hawshan, eeg (Qalabka 1B) ee qaybta labaad, Qorshaynta Horumarinaha maaraynta maaliyada.

Su’aalaha sahanka naftaada, kor u qaadida sahanminta ururkiina, sharafta, iyo meelaha horumarintoodu suuragal tahay (Qalabka 2A) waxaa loo dejiyay si ay kaaga caawiso ururrinta dhamaan wararka habraaca qorshaynta isteraatajiyadaha. Marka aad sahanan dhamayso waxaad helaysaa dhamaan wararka aad u baahan tahay marka aad qorshaynayso shaqo ganacsi (Eeg Qalabka 2B: Timaanta laga soo jeediyay qorshaynta shaqo ganacsi). Labadaba waxaa loo dejiyey ku shaqeynta qalabada maaraynta si loo qaado eegmooyin hoose iyo sare, guda iyo dibad ee ururkiina hadii ay tahay tukaan qof lee yahay ama NGO/CBO yada si caalami ah loo aqoonsan yahay. Waxaan kuu rajaynaynaa inaad ka faa’iidi doonto kuwan. Waxaa kale oo aan ku daray waxoogaa tababaro ah oo loo dejiyo tababarayaasha kuwa danaynaya inay ka faa’iideeyaan xirfadooda iyo dedaalada harumarinta urur.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO  
MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

GLOSSARY	
ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan - Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed - Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan - Dhegaysi Darban - Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho - Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji - Codsii - Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid - Qiimayn
7. Authority	- Suldada - Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin - Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe - Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad - Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani - La xiriira magaalo - Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin - Wada shaqayn - Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiiye - Isgaadhsiiye
18. Community	- Beel - Jaaliyad



**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiijo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi
27. Council	- Wada shaqayn - Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan
29. Counter productive	- Xubin ka tirsan Gudiga degaanka - Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidi la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin - Fulin
62. Information	- Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah. - Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho - Wax Barasho - Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada - Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad - Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan - Shir
75. Minority	- Inta Yar - Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor - Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo - Risaalo
78. Monitoring	- La socod - La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siye - Wada Hadal siye - Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah - Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
95. Quorum	- Maan-gal/Macquul
96. Rational	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
97. Reactive	- Tixraac/Raad raac
98. Reference	- Ilays noqod/Humaag noqod
99. Reflection	- Khayraad
100. Resources	- Dakhli
101. Revenue	- Door-jelid/Door ciyaarid
102. Role play	- Fadhi/Kulan
103. Session	- Aragti wadaag
104. Shared Vision	- Aqlabiyad hal dheeri ah
105. Simple Majority	- Iska yeelid/U ekeysiin
106. Simulation	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
107. Slums	- Furdaamin/Xal
108. Solution	- Daneeyayaal
109. Stakeholders	- Qorshe istaratijiyadeed
110. Strategic Plan	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
111. Strategy	- Soo koobid/Khulaaso
112. Summary	- Astaamo/ Calaamado
113. Symptoms	- Habaysan/Nidaamsan
114. Systematic	- Farsamo/Xeelad
115. Technique	- Jaanjooyada Tababarka/Naqshadeynta
116. Training Design	Tababarka - Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
117. Training Material	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta
118. Training Need Assessment	Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
<b>Priority two words</b>	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaa/Kala gedisnaa
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. Insight.	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud.
160. Regulation	- Xeer Hoosaad.
161. Self Governance	- Isxukumid.
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

---

127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaa/Kala gedisnaa
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. Insight.	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeedo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortii
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud.
160. Regulation	- Xeer Hoosaad.
161. Self Governance	- Isxukumid.
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBO**  
**MAARAYNTA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA LACAGEED**

166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training needs	- Baahi tababar
<b>Priority three Words</b>	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement.	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer
192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**UN-HABITAT  
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)  
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES  
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya  
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7  
E-mail: [infohabitat@unhabitat.org](mailto:infohabitat@unhabitat.org); Website: <http://www.unhabitat.org>

**EUROPEAN COMMISSION**